130

# SOOMAALIYA IYO
## WARGEESYADA ADDUUNKA





SOO SAARAY
WASAARADDA WARFAAFINTA IYO HAN. DADWEYNAHA

F. A.


# SOOMALIYA IYO

## Wargeysyada Adduunka

WASAARADDA WARFAAFINTA
IYO HANUUNINTA DADWEYNAHA
Muqdisho, Juun 1977



Jaalle Maxamed Siyaad Barre
Xoghayaha Guud ee X.H.K.S.
Madaxweynaha J.D.S.



Jaalle Dr.Cabdilqaasim Salaad Xasan Wasiirka Was. Warfaafinta iyo Hanuuinta Dadweynaha

# GOGOLDHIG

Tan iyo intii uu Kacaanka barakaysani ka curtay dalkan, 21kii Oktoobar, 1969, adduunweynaha oo idil waxaa uu indhaha u soo jeediyey geeska Afrika si uu aragti buuxda uga qaato waaga cusub ee ka beryey Soomaaliya iyo himilada uu salka ku hayo.

Taariikhdu waxay ina bartay in kacaan kasta oo ka alloosma meel ka mid ah adduunka uu qaar ka nixiyo qaarna uu ka farxiyo oo ay ku diirsadaan. Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu haddaba qumaati ku noqday gumaysiga nooc kasta ha ahaadee, kadeedka iyo isku dulnoolaasha.

Guutooyinkaas iyaga ahi waxay markiiba il-cadaawe ku soo jalleeceen dhabaha toosan ee ay qaadday Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya ee ka soo horjeeda danahooda iyo horornimadii ay u barteen inay ku shafeecsadaan khayraadka dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika.

Kooxahaasi samadiidayaasha ahi waxay qalabkooda warfidinta ha ahaato wargeysyada, Raadiyaha iyo Telefishanka ku soo weeciyeen sidii ay isku hortagii lahaayeen oo ay uga been sheegi lahaayeen dhabbaha xaqa ah ee ay dooratay bulshada Soomaaliyeed ee Kacaanka ahi.

Waxaase kaloo jirey dawlado kale oo ay ka mid yihiin kuwa Hantiwadaagga iyo kuwa horusocodka ah oo iyagu ku jalleecayey il kalgacaltooyo oo si la yaab iyo hanweynaan ah u fiirinayey waxyaabaha ka socda geeska Afrika kuwaasi waxay wargeysyadooda, telefishanka iyo idaacadahaba u fasirayeen dadyowga dunida kale dhibaatooyinkii iyo kadeedkii ay ummadda Soomaaliyeed soo martay kacaanka ka hor iyo halgan iyo hayaanka ay haatan ugu kicitintay sidii ay ku gaari lahayd ayaatiin wacan ah iyo xornimo taam ah iyo qarannimo dhab ah.

**Hase yeeshee Soomaalida kacaanka ah ee isku hubaysay**

mabda'a H. Cilmiga ku dhisan, iskuna gaaftay isku kalsoonaanta waxaa, iyadoo aaminsan in xaqa uu ka sarreyo dulmiga raacaysana oraahda ah «Beeni raad ma leh», ay irdaha u furtay qof kasta oo rabey inuu yimaado hooygeeda si uu indhihiisa uga buuxsado isbeddelka kacaaneed ee ka socda dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Waxay albaabada u ballaqday, iyadoo gacmo furan ku soo dhaweynaysa, warfidinta adduunka, waxayna saxafiyiinta, meel kastaba ha ka yimaadeen, u oggolaatay inay ku dhaqaaqaan baaris suxufinimo oo ay u madaxbannaan yihiin uguna kuurgalaan isbeddelka xagga siyaasadda, dhaqaalaha, waxbarashada, caafimaadka iyo nolosha bulshada guud ahaanba.

Waxaa kaloo daw loo siiyey inay dejistaan barnaamijyada booqashooyinka ay ku kala bixinayeen dalka iyo inay abaaraan meel kasta oo ay farta ku fiiqdaan amaba ay warbixin iyo caddaynba ka helaan.

Maxay noqotay haddaba natiijadii? Waxay noqotay in warfidiyeenka runsheegga ah ee arrimahaas ka daacadda ahi ay erayadoodi ay markii hore kaga been sheegeen Soomaaliyada kacaanka ah ay ku beddelaan kuwo run ah oo si dhab ah u qeexaya xaqiiqada kacaanka horusocodka ah iyo isbeddelka nololeed ee ka alloosmay geeska Afrika.

Waana kuwan qaar ka mid ah maqaalladii ay ka qoreen wargeysyadooda Soomaaliya oo aannu halkan idinku soo minguuriney iyadoo aan filayo inay akhristayaasha u iftiimiin doonaan siyaasadda iyo halganka Soomaalida maanta.

**Mahadsanidin**

(Dr. Cabdilqaasin Salaad Xasan)

Wasiirka Warfaafinta iyo

Hanuuninta Dadweynaha

TUSMO:


| | Bogga |
|---|---|
| Wargeyska «Sawt Al-Arab» . . . . . . . . | 1 |
| » «Al-Kashaaf Al-Falastin» . . . . | 15 |
| » «Al-Qabas» . . . . . . . . . . | 101 |
| » «Bayruut Al-Masaa» . . . . . . . | 110 |
| » «Iqra» oo Sacuudi ah . . . . . | 118 |
| » «Injinis Naydar» . . . . . . . . | 127 |
| » «Sawt Al-Arab» . . . . . . . . | 146 |

# WARGEYSKA "SAWT AL-ARAB"

## DALXIISKA

**Soomaaliya:** Dabeecaddu waxay ku mannaysatay Soomaaliya bilic aad u wanaagsan iyo hodontinimo Xoolaha aan cidina lahayn kuwooda waaweyn iyo kuwa yaryarba taasoo ka dhigtay geeska Afrika meel aad ugu habboon dalxiis, intaas waxa u dheer Soomaaliya xeeb cagaar ah oo dherarkeedu yahay 3200 oo Km. taasoo ay ka babanayso leydh wanaagsan oo caafimaad leh.

Shacbiga Soomaaliyeedna waa ku deggan oo dhaqankiisa iyo Hiddihiisu aad u qoto dheer yihiin ha noqoto Muusikada, Heesaha, Qoridda looxa iyo caagga taasoo u suuragelisay in ay ku soo hirtaan dadka dalxiiska ahi.

Dalka Soomaaliya waxa aad ugu soo batay dalxiiska intii ka dambeysay Kacaankii Oktoobar ee caweysnaa 1969kii kacaankaasoo si aad ah ugu lib helay hagaajinta dalxiiska una abuuray Wasaarad gaar ah taasoo iminka isu badashay Wakaalad madax banaan. Muddadii Wasaaraddu jirtay waxay samaysay sahamis guud ahaaneed oo lagu baadhayey meelaha ku habboon Dalxiiska. Waxayna soo saartay qawaaniin lagu daryeelaayo kaymaha, meelaha baadiyaha ah xoolaha dibad ku noolka ah iyo shimbiraha iwm. Waxa kaloo ay wax ka qabatay jidadka gala magaalooyinka xeebaha, dhismaha, hudheelada raaxada badan, meelaha nashada iyo tamashlaynta iyo tuulooyinka dalxiiska si loo soo dhaweeyo dadka tamashlaynaya looguna raaxeeyo, taasoo ka mid ah siyaasadda kacaanka ee dalxiiska ujeeddadeeduna aanay ahayn dhinaca dhaqaalaha oo keliya ee ay tahay meelaha uu ka soo baxaayo dakhliga qowmiga ahi taasoo keenaysay heerka labaad ama ka saddexaad.

**Wasiirka Dalxiiska:**

Waxannu ku tala jirnaa inaanu aad uga faa'iidaysano dalxiiska annagoo u oggolaanayna dadka shisheeyaha, dhallinyarada dalalka Hantiwadaagga ah iyo dawladaha aanu saaxiibka nahay inay booqasho ku yimaadaan dalkayaga. Isagoo sii wata hadalkiisii Jaalle Jaamac Rabiile Good, oo ahaan

jiray Wasiirka dalxiiska wuxuu yiri: «dalxiisku wuxuu leeyahay waxtar iyo waxyeellooyin dhinaca bulshanimada sidaa darteed waxanu doonaynaa inaanu ka faa'iidaysano dalxiiska ee aannu isagu naga faa'iidaysan, anagoo iska jirayna gafaf ay ku dhaceen dalalka qaarkood gaar ahaan kuwa soo koraya ee Afrika iyo Aasiya ee aad uga faa'iidaysta Dalxiiska. Annaguna haddii aannu nahay mujtamac Hantiwadaag ah iyo dad Islaam ah noo suura gelimayso inaanu ku gacan saydhno dhaqankayaga, diintayada iyo hiddahayaga iyo weliba siyaasadayada horumarinta dalxiiska sidaa darteed waxaanu u soconaynaa si digtoonaan ah iyo qorsho aanaan ka leexan.»

S — Waa maxay dadka aad u oggoshahiin inay dalxiis ku yimaaddan dalkiinna?

J — Waxaanu u oggolahay dalkayaga dalxiiska dawladaha Carabta ee aan walaalaha nahay, dalalka Hantiwadaagga iyo Dawladaha saaxiibka nala ah. Annagoo dooranayna dadka aan joogitaankoodu wax u dhimayn siyaasadda dalkayaga, bulshada Soomaaliyeed iyo habka Hantiwadaagga oo annu ku dhaqmayno waanu qaadnay tallaabooyinkii lagu hubsanayey tamashlayaasha noocaas ah.

S — Mabda'a Dalxiisnimadu waxa weeyaan adduunka oo loogu furmo si aan xad lahayn, hase yeeshee siyaasadda xukuumadda Soomaaliyeed ee aad caddaysey waxa ka muuqata inaanay suuragalaynin horumarinta dalxiiska inta ay ku xidhan tahay doorasho dad aan tiradoodu badnayn, sideebaynu markaa u fasiri karaynaa in la helo horumarin dalxiisnimo, soo dhawayn fiican iyo in dadku ka yimaaddo meel kasta iyadoo ay jirto shuruudo ku xiran soo gelitaankooda dalka?

J — Fikraddu waa mid meesha ku jirta hase yeeshee mar haddii aan annagu u guntanahay inaanu ka fogaanno wixii gafaf ah kuna dhegsanaano mabaa'diidayada, hiddahayaga iyo habka Hantiwadaagga aanu ku dhaqmayno waxanu isku dayeynaa inta kartidayada ah inaanan culays cusub saarin ciidamada nabadgelyada, maxaa yeelay waxay hayaan hawl ku filan sida Wasaaradda Dalxiiskuba ay u hawla badan tahay; sidaa darteed ma doonayno inaanu abuurno dhibaatooyin cusub......Waxa nagu filan in dalxiis ay noo soo aadaan walaalayahaga Carbeed annaguna gacma furan ayaanu



ku soo dhaweynaynaa dalkooda iyo walaalahooda Soomaaliyeed.

S — Waa maxay tallaabooyinka aad qaadeen si hore loogu mariyo dalxiiska?

J — Dhul fara badan oo ka mid ah Soomaaliya ayaa ku habboon Dalxiiska, qaarkood waxay u baahan yihiin hagaajin waxna waanu ka qabanaynaa meela kalana waxanu la kaashanaynaa horumarintooda kaalmooyin dawladaha Carabta ee aan walaalaha nahay, waanuna ku kalsoonahay inaanu helayno kaalmooyinkaas gaar ahaan haddii aanu ku biirnay Ururka Dalxiiska Carbeed.

Meela badan ayaa jira oo hore loo mariyey aadna u fiican una diyaar ah soo dhaweynta dadka dalxiiska ah, tusaale ahaan magaalada Kismaayo aad baa looga shaqeeyey waxaanay ku habboon tahay meel loo tamashle tago heerkeeda dalxiisnimana aad u sarreeyo. Waxa aan lagula tartamayn magaalada Kismaayo goobaheeda dabaasha oo dhinaca ku ahaya meelaha laga ugaadhsado xoolaha kayma galeenka ah.

Waxa u suura galaysa ruuxa tamashlaha ah inuu isku kala bixiyo bataaxda isagoo lugihiisu ku jiraan badda isla markiibana uu qaato bunduqiisa oo galo kaynta uuna ugaarsado shimbiraha iyo xoola dibadeedka. Dhinaca Woqooyiga waxa jira Gobolka Sanaag oo aad ugu habboon dalxiisnimada Carabta sababtoo ah isagoo ku dhaw Jasiiradda Carbeed iyo Dalalka Khaliijka isagoo aad uga korreeya badda kasoo lagu qiyaasay 2400 oo addin ama cag waanuna bilawnay horumarintiisii.

Waxa kaloo jira meela kaloo badan oo ku habboon dalxiisnimada haba noqoto meelaha u dhaw xarunta Muqdisho. Weli waxaan si aad ah hore loogu marin dhinaca dalxiisnimada meelaha durugsan.

S — Haddii aynnu u soo noqono waxyaalaha uu ku raaxaysto qofka dalxiiska ahi maxay ka qabatay Wasaaraddu sidii loo heli lahaa jajabni iyo tashiilaad ku dhiirrigelisa dalxiis-

yahanka boqashada Soomaaliya?

J — Saddex doodood aan ka eegno arrintaas:

b. Dhinaca soo gelitaanka dalka aad baa loogu fududeeyaa ruuxa doonaaya booqashada dalxiiska waxaana jirta xubno u qaybsan soo dhaweynta dalxiisyahanada ha noqoto garoonada Dayuuradaha, Dekadaha iyo wixii la mid ah.

t. Arrinta ku lug leh meelaha la booqanayo, diyaarinta barnaamijyada, doorashada meelaha la tegayo, hudheellada iyo gaadiidka xukuumaddu waxay ku kacday inay dhisto hudheello waaweyn oo aad u raaxo badan iyo tuulooyin dalxiis, haddana waxay ku tala jirtaa in kuwa badan la dhiso qorshahana waxaa u dhigayaa in la jeexo Hudheello cusub iyo in loo hagaajiyo jidadka meelaha Dalxiiska ah iyo kaymaha.

j. Shaqaalaha iyo adeegga, iyadaana ugu daran marka aynnu ka hadlayno arrimaha dalxiiska. Wasaaraddu waxa ay ku tababartaa dalka gudihiisa dadka qabanaya hawlahaas. Dugsi gaar ahna way u samaysay waxana la filayaa in aad hore loogu mariyo. Waxaa kaloo ay Wasaaraddu ku tala jirtaa inay keento dad ka mid ah walaalahayaga Carbeed oo hawshaa yaqaanna, taasoo fududaanaysa mar haddii aannu ku biirnay ururka Dalxiiska Carbeed.

S — **Intee bay dhan tahay tacagta loogu tala galay horumarinta** dalxiiska qorshaynta shanta sano, sidee baase loo bixinayaa?

J — Waxaa loogu tala galay lacag dhan 12.59 malyuun Shillin in lagu dhiso Hudheello, Guryaha raaxada iyo tuulooyin dalxiis kuwaaso laga dhisaayo magaalooyinka Muqdisho, Marka, Baraawe, Jasiira iyo guryo lagu raaxaysto xagaagii oo laga dhiso Kismaayo.

Sidii aan hore u sheegnay waxa jira meelo horumarintoodu ay u baahan tahay lacag fara badan waxaanuna la khaashanaynaa kaalmada iyo macluumaadka walaalahayaga Carbeed. Waxaanuna qabnaa in Ururka Jaamacadda Carabtu uu wax nagala qaban karaayo sidii aan u heli lahayn kaalmadaas waxaana jirta in ay na dhexmareen wadahadallo ku saabsan arrintaas, waxaanuna ku kalsoonahay in arrintaas wax laga qabto bisha Juun ee 1975ka.

S — Ma jiraan heshiisyo dalxiisnimo ay Soomaaliya la gashay dawladaha Carbeed amase kuwa shisheeyaha?

J — Haa. Waa jiraan heshiisyo na dhexmaray annaga iyo kooxaha dalxiiska ee dalka Talyaaniga. Wasaaradduna waxay waddaa wada hadallo la filayo in heshiis laga gaadho bisha Juun ee foodda innagu soo hayso.

S — Ma naga siin kartaa fikrad tirada dadka dalxiiska ah iyo lacagta idinka soo gashay saddexdii sano ee ugu dambaysay?

J — Way adag tahay inaynu hello tiro run ah oo sugan, sababtoo ah muddadii Wasaaraddani jirtay oo gaaban, dalxiiskuna uuna macna lahayn waqtigii ka horreysay kacaanka Oktoobar, hase yeeshee waxaa uu bilawday inuu kobco muddadan dambe sababtuna waxaa weeye xukuumadda kacaanka oo aad ugu dadaalaysa.

Wuxuu ku soo ururiyey Wasiirku hadalkaas uu la yeeshay Wargeyska «Sawtu Al-Carab» isagoo yidhi:- Dawladda Soomaaliyeed way u diyaar garaysay wax alla wixii lagama maarmaan u ah horumarinta Dalxiiska, hase yeeshee walaalahayaga Carbeed hore u lama soconin in dalkayagu yahay mid ku habboon dalxiiska, waxaanuna abuuraynaa dad aqoon u leh luqada carbeed iyadoo la ogsoon yahay in haddaba dadka ka shaqeeya dalxiiska ay badidoodu ku hadlaan afka Carabiga.

Wasiirku wuxuu intaa ku daray isagoo yiri: Awoodda Soomaaliya ee dhinaca Dalxiisnimada way ka badan tahay tan dalalka carabta iyo Yurubba, aayaha dalxiisnimadu aad buu u fiicnaan doonaa sababtoo ah lacag jaban ood wax walba ku helaysid, adeeg wanaagsan, macaamilo fiican iyo wax

alle wixii raalli gelinaya uuna raaxaynaya qofka dalxiiska ah.

Waxaa lagu rabbeeyaa xoolaha dalxiiska ku wacan melo locgu talagalay oo ay ku tarmaan, waxaana jira kuwa Soomaaliya uun u gaar ah oo ay ka mid yihiin Dabacaddaha, Dinnaddabadeedyo, dhawr jaad oo daayeerro ah, waxa kaloo Soomaaliya ku badan hargaha xoolaha ee laga sameeyo shandadaha dumarka, kabaha, dharka qaarkood iwm.

Ugaadhsiga xayawaanaadka dibad joogga ee Soomaaliya ma fududa haddii si loo eego rafaad badan ayaa dhex mara Ugaadha iyo qofka ugaadhsanaya, waxaanay ku caan baxday belanimo iyo iyada oo halis wax gelisa taasoo jeclaysiinaysa dadka ugaadhsada.

Ugaadhsaduhu wuxuu ayda u qaataa alaabooyinka lagu raaxaysto, inkastoo aanay jirin qaboojiye loogu tala galay meesha ugaadhsiga; hase yeeshee ugaadhsaduhu wuxuu ka helaa bilicda quruxda san ee dabiiciga ah iyo waxyaabaha kala geddisan ee ilawsiinaya dhibaatada ugaadhsiga.

Si fudud ayaa loo helaa marka la joogo Soomaaliya warqadda bannaynaysa ugaarsiga sababta oo ah xukuumadda oo dhiirrigelinaysa qofka dalxiiska iyo ugaarsadaha sidaa darteedna soo saarta waraaqo noocaas ah aan sicirkeedu badnayn. Wuxuu aad uga helayaa dalxiisyahanku Soomaaliya marka uu arko kooxaha shimbiraha ah ee kala gedisan oo ay ka mid yihiin kuwa cuna hilibka, shimbir badeedda, shimbiraha cuna kalluunka iyo kuwa kale oo fara badan. Dadka jecel inay cunaan hibilka shimbirahana waxa ku sugaaya Soomaaliya Kumayaal digaagga togagga oo iska daansha-daanshoonaya gobahaas iyo kameray.

### Dheemanta Badweynta Hindiya

Xarunta Soomaaliya ee Muqdisho iyadu waxay ku dhacdhaa meel ka durugsan 120 mayl xarriiqa badha adduunka, waxa ka dhacda laydh macaan taasoo ku faafta guryaheeda cadcad ee ku yaalla badda xeeligeeda waxayna taasi dhalisay in lagu magacaabo Dheemanta Cad ee Badweynta Hindiya.



Magaalada waxa ku yaalla masjidyo dhaadheer, fooqaq ballaadhan, guryo cusub, iyo kuwo ku soo jiita, suuqya waaweyn, waxaana ku badan baararka wax laga cuno ee fiican, sayladaha wax laga gato, meelaha lagu caweeyo taasoo siinaysa magaalada qurux iyo bilic intaas waxa dheer meelaha lagu kaydiyo qalabka taariikhiga ah ee aad kuu soo jiidanaysa, taasoo muujinaysa taariikhda qotada dheer ee Muqdisho ee ah magaalada ugu de'da weyn magaalooyinka xeebta bari-a Afrika.

Arrimaha aad ku raalli gelinaaya marka aynu degno quruxda dheemanta badeed waxa ka mid ah sayladda Dahabka ee ku taalla badhtamaha Xamartii hore (Xamar weyne) halkaasoo lagu sameeyo siyaaqadda ha noqoto kuwa qoorta lagu shaqlo kaatumada ama farraatiga sida qofba u yaqaano, silsiladaha dahabka ah, qalabka fudud ee wax lagu qurxiyo, badhamada shaararka kuwaasoo loo sameeyey qaab ka marag kacaya heerka sare ee farsamada iyo samaynta. Xaafadaas ama sayladdaas wuxuu qofku ku arki karaa sida fiican ee loo jarjaray dheemanta taas oo u gooni ah Soomaaliya. Xaafadda Xamar weyn oo ku taalla badhtamaha magaaladii hore waxa weeye meel la dego Muqdisho halkii ugu horraysay tan iyo hadana aad baa loo degan yahay jidadkeeda cidhiidhiga ah iyo jaangooyadeeda hufani waxay ka marag kacayaan ilbaxnimada dadka Soomaaliyeed ee dabada fog.

Isla qaybtaa gabowday ee Muqdisho waxa ku yaalla meelaha lagu sameeyo Allindiga halkaas oo ay isugu yimaadaan dad ka soo kicitimay qaybaha kale ee gobolka Banaadir, waxa ay fadhiistaan godad yaryar oo isu dhaw iyo meelo loogu tala galay oo aan guudka ka hadoodillayn, waxaanay badhaystaan dallaayado si gaar ah loo sameeyey oo ka ilaaliya kulka qorraxda.

Xaafaddaas waxa ku yaalla laba masjid: ka horre waxa lagu magacaabaa masjidka Fakhru diin waxaanay u noqonaysaa taariikhda dhismihiisu xilligii suldaankii u horreeyey ee xukuma Muqdisho, isagana loogu magac daray. Ka labaadna waa masjidka Sheekh Cabdulcasiis, masjidkaas dhismihiisu wuxuu muujinayaa daabac faarisiyeed, waxaanu ku yaallaan jidka Liido ee ka bilaabma xeebiga ama xeebta waxaanu leeyahay minaarad wareegsan oo dheer.

## Dal Taariikh Dheer leh shacbigiisuna asal yahay

Waxaa ku baahsan dalka Soomaaliya meela badan oo taariikhi ah gobolka Woqooyiga waxa ku taalla qalcad la dhi-say qarnigii 19aad ee ka marag kacaysa geesinimadii dagaal-yahankii wadaniga ahaa Al-Sayid Maxamed Cabdillaahi Xas-an oo abbaanduule ka ahaa dagaalkii kululaa ee ay ummadda Soomaaliyeed ku qaadday gummaysigii Ingiriiska, Talyaaniga iyo Amxaarada. Waxaa kaloo ku badan gobollada Waqooyi-ga magaalooyin taariikhi ah oo lagu dhisay dhagax nooc goo-niya ah magaalooyinkaas oo laga helo agagaarka Cammuud, Ceelaayo, Saylac, Bandar Cabbaas, Dogor, Boosaaso, Mudug iyo Gobolka J/Sare.

Dalka Soomaaliya waxa ku yaal nooc kaymo nooc goo-niyo ah oo la yaab leh sida kaynta Daallo oo kale taasoo aad u bilicsn dherarkeeduna uu ka sarreeyo badda 2440 cag kuna taalla agagaarka Ceerigaabo. Waxa kaloo jira kayma-yaal oo fara badan aadna u bilicsan iyo munaadir bilicsan oo soo jiidanaya ruuxa daawanaya, waxa intaas dheer magaaloo-yinka taariikhigi ah ee ku yaal xeebaha ku gawdiida gacanka Cadmeed.

Buuraha Gacan-libaax waxay ka mid yihiin waxyaalaha dabiiciga ah ee quruxda badan leh waxaana laga helaa loox-yo midab leh oo ku xardhan dhagxaanta, taasoo muujinaysa astaamihii dhaqan aad u qota dheer. Kismaayo agagaar-keedana waxa ku yaal jasiiradaha Baajuuni oo laga helo ast-aamo taariikhi ah oo qiima leh caddaynayana dhaqankii amaba ilbaxnimadii hore ee Soomaaliyeed.

Waxaa ay muujinayaan waxyaalaha qoran ee taariikhiga ahi iyo astaamahaas uu horreeyey waqtigoodu ilbaxnimadii iyo hiddihii toosnaa ee shacbiga Soomaaliyeed lahaa qarniya-dii la soo dhaafay, shacbiga Soomaaliyeed ma aha dhawaan soo bax u soo bixitimay cariga Soomaaliyeed; maxaa yeelay waxyaalaha qoran ee Taariikhiga ahi waxay muujinayaan in dadka Soomaaliyeed yihiin isla dadkii Soomaaliyeed kuman-yaalka sano ku dhaqnaan jiray dalkooda, dadkaas oo leh il-baxnimo qoto dheer hidde, dhaqan, astaamo, caadaad, iyo ta-



qaaliid ay ka dhaxlaan carruurtu awoowyadood. Haddii aad gasho guri ka mid ah guryaha dadka Soomaaliyeed oo ku yaalla miyi ama magaalo markiiba waxa lagula soo gaadha-yaa cunto, cabbid iyo khudaar kuwa ugu wanaagsan. Dal-kaas waxa loogu magacaabay Soomaaliya iyadoo ka kooban laba eray «Soo» oo micnaheedu yahay soco iyo «Maal» oo iyana micnaheedu yahay lis,; maxaa yeelay qofka wax marti-gelinayaa sida caadadu tahay markiiba wuxuu u soo lisaa lo'da, geela, ama ariga martida u timadda. Sidaa darteed ayaa loogu bixiyey magacaas oo tilmaan u ah is-jacaylka, dee-qsinimada, hufnaanta iyo u jajabnida martida.

Dad kalana waxay la tahay in (Soomaal) laga soo dha-mbashay eray carabi ah oo ah (DUUMAAL) macnaheedu yahay dhulkii barwaaqada iyo hodantinimada badnaa.

Dalka Soomaaliyeed waa ku qurux badan oo bilicsan qorraxduna u soo baxdo samadiisa sannadkoo idil, waxaanu ka heli karaa ruuxa nasashada baarayaa wax allaale iyo wixii raalli gelinaya u raaxaynaya ee maqsuud ka dhigaya, ha noqo-to ugaadhsiga uu ka ugaadhsanayo kaymihiisa shareerka ah ama xeebixiisa ay ka buuxaan noocyo badan oo kalluun ihi taasoo aan laga helayn adduunka intiisa kale.

U dhawaanshaha meelaha ugaadhsiga ay u dhawdahay xeebta, waxay u suura gelinaysaa ruuxa dalxiiska ah inuu aad u ugaadhsado, inuu daawado xoolaha dibad joogga ah iyo qof waloo jecel inuu ku raaxaysto qorraxda dalka bacad-kiisu wanaagsan yahay.

## (Warshadda ITOP)

Warshadda Itop waxay ka mid tahay Warshadaha dalka ee doorka weyn ka qaadanaya horumarinta sanaacada iyo sanaacadda beeraha, halkaasoo lagu sameeyo Fawaakihda iyo khudaarta, warshaddu waxay soo saarto waxa ka mid ah:-

1. Tamaandhada oo dawr nooc ah.
2. Waxay miirtaa tamaandhada, Maangoo, Babaayga iyo kirifoonka.

3. Macmacaanku ku habboon cuntada ee Maangaha iyo Babaayga.

Waxa kaloo ay warshaddu siisaa warshadaha kale waxyaalaha laga miiro Maangaha, Babaayga iyo kirifoonka oo ah qushka ka soo hara.

Awoodda wax soo saaridda ee Warshaddu waxay hadda maraysaa 45 malyuun oo qasacadood, sannadka 1975ka waxay soo saaraysa 97 milyan oo qasacadood.

Warshaddu waxay diyaar u tahay inay dalalka Carabta u dirto waxyaalaha ay soo saarto 1975k oo idil.

**Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan kama soo hor jeedo Tacliinta Islaamka, Dhigitaanka Luqada Soomaaliga bedalka Carabiga qama soo hor jeedo midnimada Carabta.**

Doorashada Hantiwadaaggu waa mid ka dhalatay baadhitaan qoto dheer mana ah mid isaga timid si lama filaan ah ee waxa loo darsay mujtamaca Soomaaliyeed dhismihiisa dhaqaaleed iyo kan bulshaba.

**Madaxweynaha kacaanka Soomaaliyeed, Jaalle Sarreeye** Gaas Maxamed Siyaad Barre wuxuu ku yiri war cad oo rasmi ah «Waxannu u dooranay Hantiwadaagga Cilmiga ah isagoo ah jidka keliya ee loogu bedali karo degdeg dalka lagana dhigi karo ummad koraysa dhaqaaleheeduna horemarsan yahay»

Ummadda Soomaaliyeed wada jir ayey ugu riyaaqday go'aankaa taarikhiga ah ee cadaynaya horukaca lagu gaadhay iyo ka hadda loo jeedo. Dadka oo si aad ah ugu bogay daraadeed ayaa isbedel xoog lihi ka dhacay dalka muddo gaaban taasoo lagu tilmaamayo inay tahay waxa laga wareero laguna gaadhay Hantiwadaagga Cilmig ku dhisan. Kacaanka Soomaaliyeedna wuxuu ku xidhayaa halgankiisa dhinaca qoomiga iyo kan diinigaba.

Kacaanka Soomaalieed wuxuu dhaqan gelinayaa Hantiwadaagga isagoo tixgelinaaya duruufta u gaarka ah ummada Soomaaliyeed, iskana dhagatirimaayo waaya'aragnimada



mujtamaca dawliga ah ee ku saabsan dhaqangelinta Hantiwadaaga. Duruufta gaarka ah ee halkaa looga jeedaa waxay tahay hiddaha, dhaqanka, nafsiyadda iyo waxyaalaha la rumaysan yahay. Soomaalidu waxay u fahamsan yihiin diirta in loo soo dejiyey sidii loo heli lahaa cadaalad bulshonimo iyo sinaan lagu baahiyo dadweynaha. Soomaalida kacaanka ahi waxay la dagaalamaysaa Imbiriyaaliyadda iyo kala qaybsanaanta mujtamaca, waxaanay u halgamaysaa horumarinta dalka.

Muxuu qabtay kacaanka Soomaaliyeed ilaa iyo hadda?

Dhinaca Hiddaha 12kii Jannaayo 1973kii ayuu kacaanku hirgalay qoritaanka afka Soomaaliyeed oo la baray dadka sida wax loo akhriyo iyo sida wax loo qoro. Indheer garatada qaarkood waxay doonayeen in taasi degdeg u dhammaato hase yeeshee kacaanyahanada way qabaan in ujeeddooyinka qotada dheer lagu gaadhi karo si aan tukhantukho ku jirin.

Hantiwadaagyahan runta ahi wuxuu u shaqeeyaa inaanu fashilin, haddii taasi dhacdana maaha Hantiwadaagyahan run ah.

Waxa habboon in la sheego in dadka Soomaaliyeed ay u rumaysan yihiin Hantiwadaagga inay kaga bixi karaan dhibaatooyinka haysta isagoo an aqoon dheer u lahayn mafaahiimtiisa, hase ahaatee waxa uu hubaa inay awood u siinayso si looga baxo dhibaatooyinka ka haysta xagga nabad, midnimada, xorriyadda iyo dhaqaalaha. Dhulka Soomaaliyeed waa barwaaqo; hase yeeshee dhaqaalihiisu hoos ayuu u dhacsay yahay, sidaa darteed ayey lama huraan u tahay in kacaanku arrintaas wax uga qabto isagoo ka bilaabaya gunta iyo si miyir ah.

Waxaa la furay Dugsiyo cusub, maxaa yeelay waxaa waajib ah in la gaarsiiyo aqoonta ummadda oo idil, waxaase lama huraan ah in la mideeyo dhaqanka ayagoo iskuduubanna lagaarsiiyo dadweynaha; sida darteed ayuu kacaanku ula wareegay Dugsiyadii shisheeyaha iyo kuwii Carabtaba.

Dad badan baa ku dhaliila Soomaaliya inaanay ku had-

layn afka Carabiga, iyadoo xubin ka ah ururka Carabta. Hase yeeshee Madavweynaha Soomaaliya wuxuu u arkaa arrintaa in ummadda Soomaaliyeed ay ka baxdo aqoon darrada, taasna waxa looga bixi karaa inay ku bartaan dadka Soomaaliyeed wax akhris iyo wax qaridda afkii ay ku hadlayeen boqolaalka sano, taasina ma aha afka Carabiga ee waa kan Soomaaliga.

Dad badan ayaa weyddiistay in Xisbi loo abuuro kacaanka; hase yeeshee kacaanku wuxuu ka eegayaa arrintaas dhinac kale, waxa yiillay dalka Soomaaliya ee ay ka ceegaageen xisbiyo tiro badan. Dalka waxa jiray xisbiyo fara badan shacbiga Soomaaliyeedna wuxuu rumaysan yahay inay asxaabtaasi khiyaamaynaysay; maxaa yeelay dheg umay dhigin dhibaatooyinkii faraha badnaa uu la ciirayey, ee waxa ay ku hirdamaayeen dana gaar ahaaneed oo ka fog kuwa dadweynaha iyo dalka ee guud ahaan.

Kacaankuna wuxuu ka dhashay markiisii hore isagoo ka soo hor jeeda asxaabtaas. Arrinta qiimaha weynina waxay tahay in marka hore kor loo soo qaado aqoonta dadka lana baro mabaadiida hantiwadaagga, kaddib ayaa laysugu geyn karaa Xisbi Hantiwadaag ah.

Si kale haddii aynu u niraahno kacaanku wuxuu raacay jidkii toosnaa kaasoo ah in la abuuro kaadir qumman inta aan la samaynin Xisbiga.

Kacaanka dalka Soomaaliyeed wuxuu taageerayaa uu la jiraa qadiyadaha Carbeed iyo xuquuqdooda caddaaladda ku qotama. Sida uu u taageerayo dadka reer Falastiin ee Carbeed iyo guud ahaan ummadda Carabta ee u halgamaysa nolosha xalaasha ah. Tawradda Soomaaliyeed waxay u aragtay Israa'iil inay midiidin u tahay gumaystayaasha iyo waran uu ku tumaatiyaayo ama ugu taagan Bariga dhexe, kaasoo aan halkaasuun u gaar ahayn ee lagu dilayo Afrikaanka. Sidaa darteedna ayaa dalka Soomaaliya uga taageeray shirkii Madaxweynayaasha Carabta ee magaalada Rabaat sida ay ku jirto danta ummadda Carbeed iyo himiladooda.

Dalka Soomaaliya waa hodan dadkiisuna ma aha sabool



hase yeeshee gumaystayaashii shisheeyaha ahaa ayaa dhigay halkaas. Gumaysigii kamuu shaqaynin horumarinta dalka ee wuxuu ku abuuray dadka Soomaaliyeed caadooyin fool xun ay ka mid yihiin wahsiga iyo isku kalsooni la'aan awoodooda. Dadweynaha Soomaaliyeed way diidanaayeen middaa..... intii la gumaysanayey, hase yeeshee awood u may helin bedeliddiisa.

Taasi waxay dhalisay inaanay baran wax soo saaridda, maal heliduna waxa ay noqotay mid qiimo weyn ku leh mujtamaca dareemaya saboolnimada, weliba waxay bedashay mabaadiida, sidaas ayuu dalku ku sugnaa tan iyo dabayaaqadii sannadkii 1969kii oo ah markii uu curtay kacaanka cawcysani. Markiiba kacaanka waxa ka horyimid sidii uu u hirgelin lahaa laba arrimood ee asaasi ah; waa mide in la midceya shacbiga Soomaaliyeed shakhsiyaddiisa. Waa ta labaade in laga hortago saboolnimada dib u dhaca iyo aqoon daridii haysatay dalka.

Waxa la gudboonaa kacaanka inay ka raariddo dadweynihii aan u baran shaqada, wax soo saaridda una hoggaansanaa ama isu dhiibay cabsida saboolnimada, dib u dhaca iyo himilad la'aanta, inuu ilaahay u siiyey caqliga iyo garaadka inuu ugu adeego noloshiisa. Jidkaas ayuu ka bilaabay kacaanku sidii loo bedali lahaa mujtamaca looguna hayaamin lahaa himilooyinka uu tiigsanayo. Shacbiga Soomaaliyeed waa ku Muslim ah oo rumaysan «ILAAHAY» dhinacaas marka laga eego wuu midaysan yahay, halgankii uu u soo galay gobanimadiisana wax laga urinayey daabica diiniga ah. Hase yeeshee waxa la gudboonaa Kacaanka inuu ka saaro shacbiga waxyaabaha diinta ka baxsan ee la soo dhex geliyey iyo kob iska fadhiga. Waxa kaloo la gudboonaa kacaanka inuu ka saaro indheer garatada Soomaaliyeed ee dibadda wax ku soo baratay lana dagaalamay gumaysiga kaalin wadaninimona muujiyey islaweynida iyo inay heegan u noqdaan daryeelka danta guud ahaaneed.

Dhibaatada kale ee ka hor timid kacaanku waxay ahaayeen xisbiyadii tirada badnaa, tirada asxaabtaana todobaatan ayey kor u dhaaftay dalka Soomaaliya, waxa aanay ka qaadanaysan badh tilmaamyadeeda iyo astaamaheeda xayawaan-

aadka markii ay taasi ka dhammaatay oo ah magacyadii xaya-waanaadka ayey u leexdeen dhinaca dhirta oo ay ka qaateen badh tilmaamyeedyo. Tiradaa faraha badan ee asxaabta dad aan u baran nolosha dimuqraadiyadda dhabta ah muddo badan ku hoos noolaa gumaysi shisheeye ah waxay dhalisay kala fi-ridh iyo tafaraaruq, waxaana halkaasi ku lumay himiladii uu waqtiga dheer u soo halgamayey mujtamaca Soomaaliyeed.

### La dagaalanka Qabyaaladda

Cudurka halista ah ee ka hor yimid kacaanka Soomaali-yeed waajibna ay ahayd inuu wax ka qabtaa waxay ahayd qabyaaladda. Qabyaaladdu waxay ahayd hub ku jira gacanta gumaysiga waxaana lama huraan ahayd inuu baabi'iyo kacaan-ku tiirarkana u saaro. Arrinta aan taa ka dhicin halisnimada, waxay ahayd saddex qaybood oo ka mid ah dalka Soomaali-yeed oo weli ku jira gacanta Gumaysiga.

Mawqifka Madaxdii siyaasiga ahayd intii ka horraysay kacaanka waxa uu la jiray dawladaha shisheeyaha, waxaanu ka soo hor jeeday danaha shacbiga iyo ummadda Soomaali-yeed. Madaxdaasi wuxuu ahaa asaaskeedu burjuwaasiyad-da oo ay ka mid yihiin ganacsata, dadka meelaha waaweyn ka haya dawladda iyo saraakiisha ciidammada qalabka sida qaarkood.

Markii kacaanku dhashay ka dib ayey ku dhawaaqeen horseedkii Tawradda in lagu dhaqaayo dalka Hantiwadaagga Cilmiga ah maxaa yeelay wuxuu yahay jidka keliya ee lagaga bixi karo dib u dhaca dalkana lagu gaadhsiin karo horumar dhaqaaleed iyo mid bulshadeed.

Kacaanka Soomaaliyeed u muu arag dhaqan gelinta Hanti-wadaagga Cilmiga mid ka hor imanaya haysashada diinta Is-laamka ee toosan, maxaa yeelay Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisani siday u arkaan horseedka kacaanku wuxuu daryee-layaa danaha dadweynaha balaadhan, oo ay ka mid yihiin:- Raacatada, Beeraleyda, Shaqaalaha, Askarta Indheer garatada, Ganacsatada iyo hawlwadeenka dawladda Soomaa-liyeed.



# WARGEYSKA
## " AL-KASHAAF AL FALASTIINI "

**Duullimaadkii isticmaarku ku soo sameeyey Soomaaliya** ya wuxuu ahaa guushii dhinaca juquraafiga ee u gaadhay dhul markii reer Burtaqiis «Faaskoo Digaama» kaasoo ku he-lay jidka Reeja Saalix bilawgii dhibaatooyinka siyaasadeed ee Qaaradda Afrika iyo bilawgii dalballaadhsiga Yurub ee Qaaradda iyada ah. Doonyaha reer Yurub ee ku soo xidhay xeebaha Bariga Afrika ayaa iyana sabab u ahaa dhibaatooyin-kii iyo cabsidii dadka Soomaaliya oo la kulmay dhibaatooyin fara badan oo dafitaan iyo daba ka weerar xoolahooda la dha-co iyo gaddislay lagu khasbo dirkaba.

Shacbiga Soomaaliyeedna wuxuu u guntaday sidii uu u difaaci lahaa xoolihiisa iyo noloshiisa, nafa badanna wuu u huray dagaalkii dhex maraayey iyaka iyo shisheeyaha ku soo duulay taasoo ay badiba ku guulaysan jireen gumaystayaasha iyo wareematada aadka u hubaysnayd.

Dalka Soomaaliyeed waxa intii ka horraysay duullima-adka reer Yurub ku soo duuli jiray Amxaarada kaasoo yee-shay qaab diineed si loola dagaallamo diinkii Islaamka ee ku fidayey carriga Soomaaliyeed oo walwal ku hayey inuu baa-bi'iyo dawladda Xabashida ee Masiixiga ahayd.

Waxa soo baxay qarnigii 16aad oo u dhashay Soomaa-liya geesi wadani ah kaasoo ah Imaan Al-amiir Axmed Ibra-ahiin oo lagu naynaasi jiray «Axmed Guray». Geesigaasi Imbaraadooriyad heer sare ah ayuu ka abuuray magaalada «AWDAL» waxaanu abaabulay ololayaal Militari ah uu kaga hor tagayey weerarkii ay wada jirka ugu soo qaadayeen ciida-mada Xabashida iyo kuwa Boortiqiisku.

Boqortooyada Soomaaliyeed way ku guulaysatay dagaa-lladii socanayey 1528-1535kii, waxaana ay dileen abbaan duulihii Bortaqiiska «Kiristoofar Di Jaama» oo ahaa nin la dhashay «Faaskoo di Jaama».

Waxa kale oo ay ku bireeyeen ciidamadii Axmed Guray

«Najaashii» iyagoo qabsaday dhulka Xabashida marka laga dhigo afar meelood saddexdalool, xukukiisuna wuxuu ku fiday ilaa iyo xuduudda Suudaan, magaalada Herar maraa waxay noqotay xarunta dawlad Islaam ah tii ugu weynayd oo ka dhalata woqooyiga iyo galbeedka Soomaaliyeed.

Waxa la dilay Allaha u naxariistee «Amiir Axmed Guray» sannadkii 1543kii Madaxtinimadii iyo haggaamiskii boqortyadana waxa la wareegay inankuu abtiga u ahaa oo la oran jiray «NUURADIIN» kaasoo awood u helay inuu ilaaliyo dawladdii Soomaaliyeed tan iyo 1568kii, halkaasoo ay weerarro qadhaadh ku soo qaadeen Amxaarada iyo Bortaqiiska oo is huwani kadibna ay ku soo ururtay boqortooyadiisii soohdinteedii asalka ahayd, halkaasoo ay tuuntuunsatay inay ilaaliso jiritaankeeda iyo madax bannaanideeda ilaa ay ka qabsadeen Masaaridu 1872kii ayna haysteen muddo toban sano ah.

Arrintu si kastaba ha ahaatee mudadii ay Boortaqiisku ka dagaalamayeen ama ay gaadhka ka hayeen xeebaha Soomaaliyeed iyo guud ahaan badweynta Hindiya u may suura gelin inay qabsadaan oo xukumaan Soomaaliya. Raadka aad u muuqda uu kaga tegay duullimaadkii Boortaqiisku Xeebahaas wuxuu ahaa isagoo muujiyey degaanka istiraatijiga ah ee Soomaaliya ku leedahay cadceed kasoo baxa iyo bartamaha Afrika taasoo dhalisay inay holliyaan sahamisyadii gumaystayaasha Ingiriiska, Faransiiska iyo Talyaaniga waqtiyadii danbe.

Qarnigii 19aad ayaa dawlad yari ka dhalatay Xeebta koonfureed ee Soomaaliya dawladdaas oo u madax ka ahaa «Saciid Barqash» oo u dhashay dalka (CAMMAAN), halkaasuu xukumayey tan iyo intii talyaanigu soo galay. Astaamihii Suldaankaasina waxay aad ugu muuqdaan guryahay iyo qalcadaha magaalada Xamar.

Qoqobkii iyo qaybsigii ku dhacay Afrika dabayaaqadii qarnigii 19aad wuxuu dhaliyey in la kala qoqobo dalka Soomaaliya oo ay qaybsadaan gumaysiga Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo Xabashida iyo in loogu tala galo goob Ingiriisku gumaysan jiray markii hore loona yaqaan «NFD» inay gumaystato Kiinya.



**Duullimaadkii Ingiriiska:**

Tan iyo intii ay qabsatay dawladda Ingiriisku dalka Cadan oo ay xoog ku qabsatay sannadkii 1839kii, waxay isu badashay halkaasi meel qiima weyn u leh gumaystaha Ingiriiska oo u kaga duulo koonfurta Carbeed. Waxa ay culays saareen ciidamada gumaysiga Xeebta Koonfureed ee gacanka Cadan, halkaasoo uu ku noolaa shacbiga Soomaaliyeed ee nabadda jeceli, ujeedada hanqal taaggaasina waxay ahayd inuu ka samaysto Xeebta Soomaaliyeed goobo Istiraatiiji uu kaga duulo dal weynaha Soomaaliyeed si uu gacanta ugu dhigo meelaha uu ka hinqanayo dhaqaalihiisa iyo awoodda dadka kadibna uu ugu takri falo hadba sidii waafaqsan danaha gumaystinimo ee u ka leeyahay bariga Afrika.

1840kii ayaa Ingiriisku sameeyey duulimaad uu ku qabsaday Baabul Mandab oo fure u ah «Qubatu Kharaa» . . . . . iyo Jasiiradda «INFAAT» oo iyana muftaax u ah dekadda Saylac. Isla sannadkaas ayuu Ingiriisku ka iibsaday suldaankii Tojorro jasiiradda Muusaa waxaanu ahaa qiimaheedu 10 kiish oo bariis ah.

Markii la furay biyo mareenka Suways 1869kii ayuu muuqday qiimaha Soomaaliya ay u leedahay Istiraatijiyada dagaalka iyo ganacsiga markaasaa u bilaabmay tartanka dawladaha wax adoonsadaa si ay u qabsadaan Soomaaliya, halkaasoo ay ka helayaan haybad, saldhigyo Military iyo dhul ay isku ballaariyaan.

Dawladda Ingiriisku waxay la samaysatay Suldaanka Tojorro mucaahada dhigaysa inuu ku ballan qaado tixgelinta talocyinka ay u soo jeedinayaan wakiilada dawladda Ingiriiska, hase yeeshee mucaahadadaasi ma dhaqan gelin tan iyo sannadkii 1884kii halkaasoo dawladda Faransiisku la samaysatay suldaankaas mucaahadadaas oo kaligood u danaynaysa. Kadibna waxaa furmay heshiiskii Ingiriisku la dhigtay xaakimkii Saylac iyo Suldaanka Magriita.

Ingiriisku wuxuu markaa u qaybiyey dalka Soomaaliya laba meelood:

1) Qaybta hore waxay ka bilaabmatay qooriga baabul Mandab ilaa iyo Saylac.

2) Qaybta labaadna waxay ka bilaabmataa Saylac ilaa iyo Raasxaafuun.

Waxa u suura gashay dawladda Ingiriiska inay ku soo dhaweyso madaxdii qabaa'ilka Berbera xag maalsiin ama hadiyad u keenid, kaddibna ay la dhigato mucaahadaad dan u ah xukuumadda Ingiriiska dhammaantoodna waxay qorayeen in dawladda Ingiriisku ay mas'uul ka tahay meelaha ay saamaynayaan mucaahadaadkaasi, iyadoo ay taasi jirto ayey dawladda Ingiriisku la gashay heshiis gooni ahaaneed ninkastoo madax ka ahaa qabiil intii ka dambaysay 1888kii.

20kii Juun 1878kii ayaa lagu dhawaaqay maxmiyadda Ingiriiska ee Soomaaliya taasoo ka bilaabmaysa qooriga Jabuuti ilaa iyo Bandar Siyaada, diillinta 49 dhinaca Bari, maamulkeedana waxa la raaciyey xukuumadda Hindiya iyadoo sii maraysa Cadan iyo Bambaay.

**Duullimaadkii Faransiiska:**

Tan iyo 1835kii ayey dawladda Faransiiska bilawday ahmiyadday u hayso Afrikada Bari, waxaanay qaadday tallaabooyin isdaba jooga ah oo sahamis ah, si ay uga hesho halkaas saldhig Faransiisku leeyahay oo ilaalisa nabadgalyada kooxaha sahamiska ah ee ay meelahaas u diri jirtay kuwaasoo ku gabban jiray hullaabyo kala duwan.

Markii ay dawladda Ingiriisku xoog ku qabsatay Cadan 1839kii oo ay ka gooysay maxmiyaddii (LAXAJ) iyadoo ku dal balaadhastay jasiiradaha ku yaalla gacanka Cadan qaarkood ayey ku hambabartay dawladda Faransiisku inuu yahay carrigaasi meel qiima weyn u leh istiraatijiyadda gaar ahaan baatroolsiinta doonyaha Faransiiska, markaasay u dirtay ergo huwan magaca (Ergo Cilmiyeed) waxaanay u dirtay dalka Soomaaliya si ay u soo sahamiyaan taasoo dhalisay inay kulan la yeelato xaakinkii Saylac oo ka codsaday Faransiiska inuu ilaaliyo dalkiisa, isaguna uu siiyo garooc dhul ah oo u dhaw Tojorra. Waxa iska muuqanaysa markaas in dawladda Faransiisku markiiba dhufatay codsashadaas, maxaa yeelay gacaankaa Tojorro wuxuu leeyahay laba wax tar:



1) Waa dekad ku taalla jidka badda.

2) Waa furaha dabiiciga ah ee loo raacayo ganacsiga Xabashida iyo Soomaalida.

Taas waxa raacay xeelado iyo hollimo iyo cadaadis muuqda iyo mid qarsoon sidii loogu baahin lahaa xukunka Faransiiska halkaas. Taasina waxay dhalisay heshiiskii (ABOK) taasoo la kala saxiixday 11kii bishii Maarso 1863kii arrimaha ugu waaweyn ee ku qarnaa waxa ka mid ahaa iyadoo la siiyey Obok dawladda Faransiiska, laga bilaabo (Raas Cali iyo Raas Doomiira). Taasoo qiimaheedu uu ahaa 50.000 oo Faranka Faransiiska oo loo qaybiyo laba jeer bixintiisa.

30kii bishii Abriil 1863kii ayaa laga qotomiyey calanka Faransiiska dekadda Obok waxaanay ahayd tallaabadii u horraysay ee uu ku soo galay shisheeyuhu carradaas, kadibna way dal balaadhsatay dawladda Faransiisku halkaasoo ay la saxiixatay Suldaankii Tojorro 23kii bishii Agoosto 1884kii. Waxa ku qornaa qodobka saddexaad ee heshiiskaas inuu suldaanku dhigo wuxuu leeyahay gacanta Faransiisku si ay u ilaaliso.

Qodobka lixaadna wuxuu qorayey in Suldaanka la siiyo mushahar dhan bishii 500 oo Faranka Faransiiska ah, wasiirkiisana 80 lacagtaas ah. Sidaa ayuu Faransiisku u qabsaday Tojorro . . . . 25kii bishii Diisambar 1884kii ayaa rasmi ahaan loogu wareejiyey Tojorro Faransiiska.

Bishii Febraayo 1885kii ayaa dawladda Faransiisku mucaahado saxeexatay Suldaan Axmed Lahiida, taasoo ogolaanaysa in Faransiiska laga siiyo gobollo mandiqada (JOOBA-AD), sidaasoo kale ayuu Faransiisku ula saxiixatay heshiis qabaa'ilka Ciisaha taariikhdu markay ahayd 26kii bishii Maarso 1885kii waxaana ku qornaa qodobka saddexaad duqaytida qabaa'ilkaas oo oggolaaday inuu Faransiisku ilaaliyo dalkooda.

**Duullimaadkii Talyaaniga:**

Laga bilaabo 1877kii dawladda Talyaanigu waxay isku

dayeysay inay ka dal balaadhsato bariga Afrika gaar ahaan dhulka (CASAB). Waxaanu ku cambeeyey dal ballaadhsigedaasi xeebta koonfureed oo Soomaaliyeed taasoo magaca ahaan u raacsanayd Suldaanka Sinjibaar.

Sannadkii 1885kii ayey si caddaan ah u gashay dawladda Talyaanigu hirdanka gumeysinimo ee loogu jiro Afrikada Bari, waxaanay isku dayday inay ka qayb galiso dawladaha Ingiriiska iyo Jarmalka qaybsiga carradaas si mid waliba u hesho meel ay gumaysato. Markii ay gaashaanka ku dhufatay xukuumaddii Suldaan Barqash inay ka siiyaan Talyaaniga xeebta Soomaaliyeed meel uu cagaha dhigo ayuu isku dayey wakiilkii Talyaanigu inuu isticmaalo xoog, hase yeeshee qunsulka Ingiriiska ayaa kula taliyey inaanu ku dhaqaaqin tallabadaas oo kale ee uu isku dayo inuu arrinta ka soo galo dhinaca ganacsiyeed. Sidaa darteed ayaa la kala saxiixday heshiis ganacsi oo dhex maray Suldaanka iyo dawladda Talyaaniga 28kii bishii Maarso 1885kii.

Sannadkii 1888kii ayey ku amartay amase weyddiisatay dawladda Talyaanigu qunsulkii u fadhiyey Sinjibaar inuu la yeesho wada hadallo rasmi ah suldaanka Sinjibaar sidii uu ugu dhaafi lahaa Talyaaniga webiga Jubba, amase carrada Kismaayo ama inuu siiyo xeebta koonfurta Soomaaliyeed dhul dherarkiisu 60 mayl yahay oo ku dhacaaya Koonfurta xariiqa qaybiya dunida, hase yeeshee suldaanku wuu ku gacan saydhay arrimahaas iyadoo dawladda Ingiriiska dabada ka wadday. Markii ay istaageen wada hadaladii labada dhinac ayey aadday dooni kuwa dagaalka oo Talyaanigu leeyahay dhinaca Sinjibaar.

Is-afgaran waagii ka dhex taagnaa dawladda Talyaaniga iyo Suldaan Barqash wuxuu galay meel cidhiidhyoon, waxaana soo dhex galay arrintii dawladb shisheeya ah (Ingiriis iyo Jarmal) oo u hiiliyey Talyaaniga taasoo ku khasabtay Suldaankii inuu u hogaansamo waxa ay doonayaan reed Yurub isagoo jooga Sinjibaar, Shacbiga Soomaaliyeedna arrintaa aad ayuu uga dhiidhiyey aadna waxa looga kacay magaalo iyo miyiba xeebaha iyo dhulka gudihiisa, waxayna ku baaqeen waxgaradku iyo duqaytidu halgan iyo dagaal lagaga hortago faragelinta shisheeyaha, taasoo ku sandullaysay Suldaankii inuu caddaan u taageero waxa shacbiga Soomaaliyeed doonayaan iyo inuunu garooc qudha ka siinin dalka Soomaaliyeed dal Shisheeya ah kana oggolaan horumarin garabsiyeed iyo inay baabi'iyaan xukunkooda xeebaha dalka Soomaalida.



Dhiidhigaas iyo gadoodkaasi wuxuu ku baahay gobollada koonfureed ee dalka Soomaaliya waxaana u bogay dadyowga ay gumaystaan Ingiriiska iyo Jarmalku. Dawladda Ingiriiskuna waxay yaqiinsatay in haddii ummadda Soomaaliyeed ku guulaysato kacaankeedaas ay taasi dhalinayso in la waayo haybadeeda iyo xukunka ay ku leedahay dhulkaas. Dawladaha Ingiriiska iyo Jarmalku waxa ay la safteen dawladda Talyaaniga waxaanay ka qayb galeen mashruuc ay u wada jiraan oo lagu go'doomaynayo xeebaha Soomaalida. Ciidamada Talyaanigu waxa ay ku urureen woqooyiga Kismaayo kuwa Ingiriiskuna badhtamaha iyo Koonfurta Kismaayo, kuwa Jamarkuna Dhinaca Koonfureed iyo koonfurta Mambaasa. Mudadii go'doonka lagu hayey xeebaha Soomaaliyeed (1866-1889) waxa ay la dhigatay dawladda Talyaanagu Suldaanada iyo duqaytida dalka heshiisyo ay ku magacawday ama ku huwatay inay ilaalinayso madaxbanaanida, faafinaysana ilbaxnimada.

24kii Maarso 1891kii ayey ku dhawaaqeen masaayadda Muqdisho inay ilaalinayso dawladda Talyaanigu. Dawladda Talyaaniguna waxay ku dhawaaqday inay si toos ah u ilaalinayso dhulka ka bilaabma woqooyinga Warsheekh (diilinta balaca 5.30) Woqooyiga tan iyo (diilinta balaca 8.30) Woqooyiga halkaasoo ay ka bilaabmayso Suldaamadda Majeerteeniya, taasoo baahsan ilaa iyo diilinta dherarka 49 bariga.

Kadib markii woqooyiga dalka Soomaaliya uu u gacan galay Talyaaniga ee ay ku baahiyeen xukunkooda xeebaha woqooyiga, uuna liciifay xukunkii iyo haybadii Suldaan Barqash ku lahaa xeebaha Koonfureed, kadib markii shacbiga Soomaaliyeed kaga kacay magaalooyinka Muqdisho, Baraawe, Kismaayo ee ay diideen ama ku gacan saydheen inay u hoggaasamaan goosteenna inay jilibka u dhigaan gumaysi kasta oo shisheeya ah, ayey siyaasadda Ingiriisku bilawday inay ku khasbaan suldaanka inuu la heshiiyo dawladda Talyaaniga si ay ugu suurowdo inuu ku dhigo gacanta dadka Soomaali-

yeed ee ku nool meelaha xeebaha ah ee koonfurta dalka Soomaaliya. Sidaa darteed ayuu Suldaanku u qoray waraaq boqorkii Talyaaniga uu ku caddeynayo inuu jecel yahay inay saaxiibtinimo dhex marto dawladda Talyaaniga, uuna raali ka yahay heshiis kasta oo Talyaanigu la galayo shirkadda (Bariga Afrika ee Ingiriiska) Shirkaddaasi waxa ku shaqaysta oo ay u adeegtaa siyaasadda Ingiriiska iyo ujeeddooyinkiisa ku saabsan dhiigmiiradka dhaqaalaha, iyo inay wada jir u qabsadaan Kismaayo iyo carradeeda.

Warqaddaasi waxay dhalisay wadahadallo dhex mara dawladda Talyaaniga iyo Shirkaddaas la soo sheegay iyo in la soo saaro heshiis dhex maray dawladaha Talyaaniga iyo Ingiriiska 3dii bishii Maarso 1889kii kuna saabsan sidii ay u qaybsan lahaayeen dhulka Kismaayo, sidaa darteed ayaa gacanta loo geliyey dhulka ka bilaabma webiga Jubba oo ay ka mid yihiin Kismaayo, dekadaha Baraawe, Marka Muqdisho iyo wixii la xidhiidha, taasoo badh wareegeedu uu yahay 10 mayl iyo Warsheekh badhwareegeedu uu yahay 5 mayl laga bilaabo badda dabeedna loo koco gudaha, dawladda Talyaaniga ayaa gacanta loo geliyey.

Sidaas ayey dawladda Talyaanigu gacanta ugu dhigtay qayb ka mid ah dhulka Soomaaliyeed iyada oo ay dawladda Ingiriisku kaalmo ku siisay. Intii uu Talyaanigu xukumayey dalka hoos ayuu u dhacay dhaqaaluhu waxaana ku faafay dhulka akhlaaq xumo laaluush iyadoo uu balaadhay ganacsiga addoonimo ay ka dilaalayeen xukaamtii Talyaaniga ahayd. **Si caddaan ah ayaa gaddislaynta iyo iibsiga addoonta waxa** lagu qori jiray buugagga Maxkamadaha waxaana saxiixi jiray xaakinka Talyaaniga.

**Duullimaadkii Amxaarada:**

Wuxuu bilaabmay sahamiskii duullimaadka Xabashida ee dalka Soomaaliya 30kii Juun 1891kii markii uu u diray raasmukanam koox Xabashi ah iyo dadyow budhcad ah inay ku duulaan dhulka Soomaaliyeed ee (OGAADEENYIA) taasoo dhalisay boob kadibna in loo soo diro wakiil kala gorgortama dadka ku dhaqan dhulkaas inay laba tuule u bixiyaan cashuur amase baad.



Budhcaddaa **amxaaradu waxay** qabsadeen (Biyo Kaa Booyaa) taasoo ka mid ahayd dhulka Soomaalida ee Ingiriisku lahaa «waa ilaalinayaa» iyo gobolka (Gildiisiyo) ee u dhexeeya meelaha ay kala haysteen Ingiriiska iyo Faransiisku.

Inkastoo ay jireen heshiisyo dhex maray dawladaha Ingiriiska iyo Talyaaniga hase yeeshee duullimaadkaas xabashidu qarbudaadda iyo dhaca ay ka samaynaysay gobolka Itoobiya gudihiisa ismuu taagin, kaasoo markii horaba ay u qoodeeyeen dawladaha reer Yurub markii ay qaybsanayeen Afrika Xabashida.

Xabashidu way wadatay siyaasadeedaa dal ballaadhsiga ah ay ku qabsanaysay dalka Soomaaliya ilaa ay gaadhay koox Amxaaro ahi magaalada Hargeysa, iyadoo ku dhawaaqday Xabashidu in dhulka tuulada (Habar) ay tahay meelaha ugu horreeya ee ay leedahay Xabashidu.

Dawladaha Ingiriiska iyo Talyaanigu waxay bilaabeen wada hadallo ku saabsan sidii ay u qaybsan lahaayeen dhulka, kuwaasoo lagu soo gabagabeeyey borotokool ay kala saxiixdeen 5tii May 1894kii halkaasoo lagu caddeeyey meelaha **ay kala xukumayaan, kaasoo ka bilaabmaya Jiliidsiya ilaa** diilinta balaca 8 woqooyiga taasoo ku qabsan xuduudda goboleedka: Geerheyn, Bartray,, Dayr Cali ilaa iyo dhinaca midig ee tuulada Jildiisiya iyo tan iyo Jigjiga iyo mayl-mayl, gadaalka diilinta (8) woqooyi kaasoo maray kala goys dherarka 48 bari Cariniitish kadibna wuxuu aadayaa diilinta kala goyska balaca (9) darajo woqooyi la jirta diilinta 49aad Bariiniitish ilaa iyo badda. Waxa kale oo u qorayaa borotokoolkaasi inuu ganacsiga xor noqdo dalka loo yaqaan (Ogaadeeniya) iyo inay qaybsadaan dawladaha Ingiriiska iyo Talyaanigu ganacsiga furdadda Saylac oo ay wada ilaaliyaan.

Hase yeeshee dawladda Ingiriisku waxay la gashay boqorkii Xabashida (Minilik) sida ya qorayso mucaahidadaas la kala saxiixday 1897kii, dawladdaa Ingiriisku waxay u qoondaysay Xabashida meel balaadhan oo ka mid ah dhulka (HAWD) iyo agagaarkiisa meeshaasoo ku hodana baadka xooluhu daaqaan ee dalka Soomaaliya, arrintaasi waxa ay dhacday iyadoo aan la ogeysiin dadka Soomaaliyeed lagalana

tashan, iyagoo weliba isu haystay inay ilaalinayso dawladdaasi. Dawladda Ingiriisku waxay u samaynaysa arrintaas inay Xabashidu ka taageerto dagaalka uu Ingiriisku kula jiray kacaankii «Al-Mahdi» ee dalka Suudaan.

**Halgankii ay Dadka Soomaaliyeed la galeen Gumeysiga:**

Qaybtii lagula kala tegay dhulka Soomaaliyeed oo ay gosteen kalana qoqobteen dawladaha Gumaysigu aad ayuu uga xanuunsaday dadka Soomaaliyeed ee wadaniyiinta ah waxaanay liqi waayeen in dhulkoodu noqdo cad ay googoostaan cadaawuhu.

Arrintaasi waxay u baahnayd in la abaabulo halgan cusub oo lagu qaado gumaystaha reer galbeed. Waxa soo baxay markaa sannadkii 1899kii geesi Soomaali ah oo wadani ah oo la yiraahdo Sayid Maxamed Cabdillaahi Xasan oo ay Ingiriisku u bixiyeen (Wadaadkii Soomaaliyeed ee waallaa).

Geesigaasi wuxuu abuuray dhaqdhaqaaqii daraawiishta ahaa oo xoog leh waxaanu ku baaqay in dagaal lagu kiciyo gumaystayaasha Ingiriiska, Talyaaniga iyo Amxaarada lana xoreeyo dalka,waxanu ku magacaabay gumaystayaashaa is huwaanta ah xukunka gaalada. Kacaankaa markaa ka dhashay dalka Soomaaliyeed iyo dhaqdhaqaaqaa gobanimadoonka ahi wuxuu kabayey amase dhammays tirayey dhaqdhaqaaqyadii gobannimadoonka ee ay hor kacayeen dalka Suudaan Mahdigii Maxamed Axmed iyo dalka Masaarida uu u horseedayey Axmed Curaabi.

Wuxuu muujiyey Sayid Maxamed dagaalkii militariga ahaa mudadii uu ku jiray geesinimo iyo xeelado militari oo laga yaabay, waxaanu awooday inuu ururiyo dadweynaha Soomaaliyeed oo u hoos galo horseednimadiisa. Ingiriiskii ay is hayeenna waxay la yaabeen qalcadihii dhagaxa ka samaysnaa ee aadka u adkaa uu ku dhisay mudada gaaban saldhigna uu uga dhigay dhaqdhaqaaqiisa gaar ahaan qalcaddii (TALEEX) taasoo balaadhka gidaarkeedu uu ahaa 12-14 cag (4mitir seeska hoose) dhererka qalcaddaasina waxay ahayd ilaa 60 cag (19mitir).



Waxa uu ku bilaabmay dhaqdhaqaaqii gobannimadoonku ee uu u horseeday Mahdiga Soomaailya Sayid Maxamed Cabdulle Xasan olole balaaran oo kor loogu qaadayo aqoonta shacbiga Soomaaliyeed, habka Sayid Maxamedna wuxuu ahaa mid aad u sarreeya markiibana saameeya dadka, sidaa darteed ayaa ummadda Soomaaliyeed ku soo hiratay una hogaansameen horseednimadiisa oo ay ku xidhmeen talooyinkiisa.

Arrimihii ugu horreeyey ee u ka dhiidhiyey waxa ka mid ahayd sahamiyayaashii ama ergooyinkii ka socday Kinisadaha ee ka shaqaysnaayey dalka Soomaaliya gudihiisa.

Markii ay u caddaatay inaanay wax tar u lahayn Diidmada afka ayuu ku tashaday inuu yahay halganka dagaalka jidka qudha ee arrimaha wax laga qaban garo, kolkaasuu ururiyey dadkii waddaniyiinta ahaa ee Soomaaliyeed si uu ula dagaallamo nacabka.

Sayid Maxamed wuxuu ka billaabay dhaqdhaqaaqiisa Maxmiyadda Soomaaliyeed ee uu haystay Ingiriiska gaar ahaan dhinaceeda koonfur bari ee durugsan. Muddo kaddibna waxa uu hawlihiisii ka billaabay togga Nugaal oo u dhexeeyey dalka Soomaaliya ee Ingiriisku gumeysanayey iyo qaybtii Talyaanigu uu haystay, halkaasoo uu ku xoojiyey furdadda (Al-bay) hubkii iyo saanaddii ay Soomaalidu kala yimaadeen badweynta Hindiya. Dawladda Ingiriisku Ciidamo ayey kasoo urursatay Afrika, Hindiya iyo Koonfur Afrika si ay ula dagaalanto Sayidka iyo dhaqdhaqaaqiisa waxayna dejisay jaangooyo ay ugu tala gashay inay shirqoosho isagoo nool, hase ahaatee Sayid Maxamed kaga muu guulaysan goobaha dagaallada ciidamo ka fara badan kana hub badan oo keliya; hase yeeshee wuxuu ku guulaystay afar olole oo isdaba jooga oo ay ugu tala galeen basaasiinta Ingiriiska inay ku qafaashaan nolol, wuxuu ku guulaystay inuu ka fakado ololayaashaa.

Inkasta oo dagaalkii dhexmaray Sayidka iyo Ingiriiska sannadkii 1903-1904 ay abaanduule ka ahaayeen niman Ingiriis ihi, hase yeeshee niyad jab ayaa ku dhacay askartii laga soo daad gureeyey Afrika, Hindiya iyo Koonfur Afrika waxana u caddaatay Ingiriiska kadib markii layskaga hor

yimid dhawr goobood inaanay waxba taranaynin dagaalladaas ay abaabulayaan; maxaa yeelay ciidamada daraawiishta waxa ay isaga talaabayeen goobo fara badan si ay isaga jiraan inay isku ilaawan meel keliya.

Kolkaas ayey ku tashatay Dawladda Ingiriisku inay kaalmo ka dalbato dawladda ay saaxiibka ku yihiin gumaysiga ee Faransiiska. Dawladdaa Faransiiskuna heshiis ayey saxiixday lagu diidayo inaan hub uga tegin ciidamada Soomaaliya dhinaca (Furdadda ama Dekedda Jabuuti).

Waxa kaloo ay dawladda Ingiriiska la gashay heshiis dawladda Talyaanigu heshiiskaasoo qoraya inay kala dagaallamaan ciidamada Talyaaniga xoogga gobannimadoonka Soomaaliyeed dhinaca ay ka wadaagaan xuduudda.

Amxaaradu iyaduna way ka qayb gashay dagaalkaa gumaysinimo ee lagula dagaallamayey gobannimodoonka Soomaaliyeed iyo dagaaladii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan. Waxaynay had iyo jeer fadqalalo kula jireen ciidamada Soomaaliyeed ee ku dhaw soohdimada Xabashida. Hase ahaatee isgaashaan buuraysigaasi waxba ka muu beddelin arrinta.

Markii ay caddaatay in laga adkaan karin dhaqdhaqaaqa uu hoggaaminayey Sayid Maxamed ee uu kaga guulaystay Ingiriiska goobihii dagaalada ayey dawladda Ingiriisku go'aan ku gaadhay inay wada hadallo la yeelato halyeygaa Soomaaliyeed. Sidaa darteed ayey u egmatay dawladda Ingiriisku inuu Talyaaniga wadahadallo la yeesho Sayidka isagoo ka wakiil ah, dawladda Ingiriiskuna ay saxiixdo heshiiska lagu gaadho wadahadalladaas.

Wadahadalladaasi waxa ay dhaliyeen heshiis nabadeed oo la saxiixay 5tii bishii Maarso 1905tii. Heshiiskaasi wuxuu qorayey in is-afgarad iyo heshiis joogta ahi ka dhexeeyo Sayid Maxamed Cabdulle Xasan iyo ciidamadiisa iyo xukuumadda Ingiriiska iyo cidda raacsan, sidaasoo kalana uu heshiis ka dhexeeyo Xabashida iyo Ingiriiska, wixii is-afgaran waaya ee soo baxana si kalgacaltooyo loo dhameeyo. Waxa lagu caddeeyey mucaahadadaas dhulka uu xukumaayo Sayid Maxamed iyo madaxbananaanida ganacsiga iyo meela-



ha daaqsiimada ah.

Hase yeeshee Sayid Maxamed iyo taageerayaashiisu way ogaadeen halista ay leedahay mucaahadadaasi iyo khiyaamada ka dambaysa ee lagu dabar goynayo dhaqdhaqaaqiisa, sababtoo ah marka la qoqobo mandiqada uu xukumay Sayida iyo dadka la jira; sidaa darteed ayuu ku dhawaaqay inuu ka baxay heshiiskaas sababtoo ah iyadoo aan la socon karayn himilada ummadda Soomaaliyeed ee xorriyadda iyo Madaxbanaanida.

Markii ay fashishay siyaasaddii heshiisyadaa ayey u baydhay dawladda Ingiriisku siyaasad cusub oo kale, bishii Juun 1912kii ayey kula shireen wakiillada Ingiriisku meel u dhow magaalada Laas-caanood, waxayna doonaysay in la joojiyo dagaalka Ingiriiska iyo dawladaha reer Yurub ee kalana ay u aqoonsadaan Sayid Maxamed inuu yahay boqorka dadka Soomaaliyeed oo idil.

Halyeygii Soomaaliyeed wuu diiday arrintaas waxaanu ugu jawaabay wafdigii ingiriiska ahaa (Habeenna kuma seexan inaan noqdo boqor, ujeeddadayduna ma ahayn middaas hadda iyo waqtiyada soo socda toonna, ujeeddadayda keliyihi waxay tahay inaan ka caydhiyo gumaysiga dalkayga ummaddaydana u soo dhiciyo xuquuqdoodii la dhacay, inaan dhulkayga ka ilaaliyo oon ka nadiifiyo gaalnimada iyo nifaaqa kadibna dani igama hayso inaan noolaado ama dhinto). Weedhaasi waxay ahayd mid xad u yeeshay wadahadalladaas muujisayna inay ku dhammaadeen natiijo la'aan.

Waxa cusboonaaday hawlihii dagaalka ciidamada Ingiriiskuna waxa ay galeen dhufayska iyo inay ka ilaaliyaan ciidamada Soomaalida cuntada iyo hubka dagaalkaasina aad buu u dheeraa (1912-1920).

Markii uu dhammaaday dagaalkii hore ee dunida dawladda Ingiriiskuna ay ka mid ahayd gaashaanbuurtii guulaysatay ayey goosatay inay baabi'so dhaqdhaqaaqii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, waxaanay ku dagaal gashay hub cusub oo ah dayuurado. Waxaanay sumaysay ceelal fara badan oo ka qodnaa dalka. Sidaa darteed ayaa waxa ku

dhacay xarakadii daraawiishta ugu dambaystii cudurka Furuqa iyo Shubanka, kaasoo dhakhso ugu faafay ciidamadii qalabka siday; sidaa darteed ayaa qaar badani u dhinteen cuduradaas, markaasay ku la firdheen gobollada Soomaali weyn.

Markii ay hareereeyeen ciidamadaa Ingiriisku qalcaddii Taleex ayuu ula guuray Sayid Maxamed ciidankii markaa ku hadhay qalcadiisii ugu dambaysay ee ku taallay buurta «Iimey» ee Soomaalida galbeed oo dacalka ku haysa togga «Diibi-Shabeelle» halkaasayna geeridii ugu timid Sayidkii.

Lix sano kadib markii la duugay Sayidka ayaa ciidamada gumaysiga ee Ingiriisku u saareen guutooyin soo baadha qabrigii lagu aasay si ay maydkiisa u soo saaraan ooy u dhigaan Rugta kaydinta Taariikhaha ee London (Museum). Hase yeeshee intii aanay fogaanin ciidamadaasi ayaa markiiba warku gaadhay dadka reer guuraaga ah ee Soomaaliyeed kolkaasay degdeg uga saareen maydkii Sayid Maxamed Cabdulla Xasan qabrigiisii hore, oo ay ku duugeen meel qarsoon. Ciidamadii la diray oo ka koobnaa Ingiriiska iyo Amxaarada waqti xeedh iyo Fandhaal kala dheceen ayey gaadheen meeshii waxaanay u tageen qabrigii oo haawanaaya, manay helin cid u tilmaanta qabriga cusub ee qarsoon oo aanay ogayn dad yar mooyaane oo ka mid ahaa kuwii ugu daacadsanaa dhaqdhaqaaqa haybadana lahaa lana socday Sayidka ilaa uu ka dhimanayey.

Geeridii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan ee 1921kii waxay ku dhalisay xammaasad iyo wadaninimo shacbiga Soomaaliyeed kaasoo is hor taagay iskaashi ay la yeeshaan maamulkii gumaysiga ee nus qarniga taagnaa.

Waxyeelladaas ama jugtaas gaadhay dhaqdhaqaaqyadii uu hoggaaminayey Sayid Maxamed Cabdulla Xasan kumay luga xaadhin dareenkii wadanimo ee ummadda Soomaaliyeed, maxaa yeelay waxa jiray halyeyo kale oo halganka halkiisii kasii waday. Waxa jiray matalan abaanduulihii wadaniga siyaasiga ahaa Xaaji Faarax Oomaar oo u guntaday sidii uu ula dagaallami lahaa baahinta maamulka gumaysiga Ingiriiska ee ka dhisnaa dalka Soomaaliyeed ee Ingiriisku gumaysto hase yeeshee jidkii halganayd ee u raacay halyeygani wuu ku duwanaa kii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan sababtoo ah Sayidku wuxuu kula dagaallamay gumaysiga hub hase yeeshee Faarax Oomaar wuxuu kula dagaallamay habka qalinka sidii uu sameeyey «Mahadma Gaandi». Markii uu la dagaallamayey gumaysigii Ingiriiska sidii uu u xoreeyey dalkiisa isagoo aan isticmaalin hubka.



Wuxuu sheegey Xaaji Oomaar oo ahaan jirey nin mutaclima hodan ku ah isagoo ahaan jirey kaliye taliyaha Gobol Sannadkii 1911kii, hase yeeshee waxay darreemeen inuu dhuminaayo maamulkooda maxaa yeelay wuxuu uu sheegay dadka sida xun ee maamulayaasha ingiriiska ula dhaqmaan dadka waxaana ku kicin jirey dadka si ay uga dhiidhiyaan cashuura ah kor loo qaaday waxaa ay marka garteen ingiriisku in ninkaasoo kale uu dhibaato ku dhalinaayo, maxaa yeelay siyaasadda ayuu waqti u helay inuu ka shaqeeyo. Sidaa adrteed ayaa lagu wareejiyey ciidamadda Soomaaliyeed darejo sarkaalnimo kolkaa wuxuu ka sheqeeyey hawshaa muddo sanadda ah, markii u ka tegey militerigi wuxuu ku noqdey siyasaddii isaga oo ka soo horjeeda maamulka gumeysiga inkastoo aan xisbi siyaasiga aanu lahaayn.

Soddonkii wuxuu u socdaaley Xaaj Oomaar dalka Hindiya, waxaanu noqdey sarkaal aad ugu dhow mahadma Gandhi, waxanu gaadhsiiyey falsafaddiisa, markii dambana wuxuu ka soo noqdey Soomaaliya si u wada hawsha, 1932kii, ayuu u direy arjigii u horreyey xafiiska gumeysiga ee dalka ingiriiska iyo Wasiradda Arrimaha Dibedda ee dalkaas, isagoo oo ka ashtakoonaaya wakiilna ka ah dadweynaha argagixisadda iyo cadaadiska gumeystayaasha ay ka sameeynayaan dalka.

Wuxuu ka ashtakoonaaya ama uu ashtakeeyey wakiilka ingiriiska u fadhiyey Soomaaliland waxaanu ka ashtakeeyey caddaalo darrada iyo sida xun ay ula dhaqmaan hawlwadeenka maamulka khariban dadka soomaaliyeed. Gumeystaaha ingiriiskuna waxa ay ka dalban jireen markii ay xukumadda dhexe ee London soo weydiiso badhasaabka sababaha u sameeyey arrimaha laga soo ashtakoonayo duqaytadii Soomaaliyeed ee ku xidheen gumeysiga in ay soo qoraan

Araaji ka horjeeda midda Faarax Oomaar, inta badan maamulka ingiriiska ayaa qori jirey araajidaas odayaasha wey ka saxiixan jireen waxaanay ku ammaani jireen badhasaabka iyo maamulkiisa, waxaaney ku eeden jireen Faarax Oomaar in aannu ahayn rabash doone oo keliya ee uu yahay nin siyaasadda xiisad ka sameeya cidna aanu wakiil ka ahaayn.

Sida saaxiibkii Mahadma Gaandi ayuu Xaaji Faarax Oomaar nolashiisa badhkeed ku dhameeyey xabsiyada, hase yeeshee taasi baqdin kama aynay galin qalbigiisa kamanay horjoogsan sidii uu u baadi dooni lahaa xuquuqda siyaasiga iyo bulshanimada dalkiisa iyo waxa ay tahay xaqiiqa gumaysiga, waxaanu ku guubaabiyey inaanay xagga siyaasadda uga dabcin.

Afartanaadkii oo cumriga Xaajigu ahaa 80 sano ayaa la qabtay wayaana loo masaafuray jasiiradaha (Qamaraan) oo u dhaw magaalada Cadan halkaasoo uu ku xidhnaa isagoo masaafuris ah, xaaladiisa caafimaadkuna ay aad hoos ugu dhacday. Rayul caamkuna wuxuu rumaysan yahay in la sumeeyey, Xaajigu wuxuu ku geeriyooday magaalada Hargeysa oo u hadda ku aasan yahay wax yar ka dib markii la soo daayey.

Geeridii Xaaji Faarax Oomaar ma ahayn mid soo gabagabaysay dareenka wadaniga ah ee dadka Soomaaliyeed; sannadkii 1945 ayaa waxa ka soo baxay dadkii Soomaaliyeed ee uu gumaysanayey Ingiriisku abaanduule xagga diinta ku xeel dheer oo ah Sheekh Bashiir, waxaanu doonayey inuu halgankiisa mariyo tubtii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan. Sheekhaas oo la sheegay inay qaraabo ka ahaayeen Sayidka dhinaca hooyooyinka uu cabsi badnaa dhinaca diinta, waxaanu u xaglin jiray falsafadda suufinimada wuu ku shaqayn jiray.

Wuxuu ka abaabulay abaanduuluhu hogaankiisa dhinaca bariga ee qaybta Soomaaliya Ingiriisku gumaysan jiray, markiibana wuu ku soo xidhmay dadku geesinimadiisa iyo haybaddii uu xagga diinta ku lahaa daraadeed. Markiiba bishii Maajo 1945kii ayuu weerar ku soo qaaday hawlwadeenkii reer Yurub iyo meelihii militarigu u fadhiyey, halkaasoo isna rasaas badan lagu furay; hase yeeshee intii an lasoo weerarin habeenimadiiba ayey isaga iyo dadkii la socdayba ku noqdeen saldhigoodii, hase yeeshee waa la eryanayey ilaa laga dilay, halkaasoo uu ku darmay dadkii shahiidnimada ku dhintay aadna loo weyneeyey. Waxa ay la ahayd hawlwadeennadii gumaysiga ee Ingiriiska ee joogay magaalooyin Burco iyo Hargeysa inay weli taagan tahay tacliintii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan oo aan la dhaamaystirin ama la baabi'in.



Halgankii gobanimodoonkuna sidaas ayuu u taxnaa ilaa lagu jabiyey dawladdii Talyaaniga dagaalkii labaad ee dunida, halkaasoo lagu wareejiyey meelihii Talyaanigu gumaysan jiray «Ummadaha Midoobay» si loo gaadhsiiyo gobanimadooda.

2dii bishii Jannaayo 1950kii ayuu oggolaaday Golaha loo dhan yahay ee Ummadaha Midoobay go'aan qoraya in la siiyo dalka Soomaaliya gobanimadiisa toban sano ka dib muddadaasoo ay haynayso Ummadaha Midoobay in loo diyaariyo muumul gudaha ah, kadibna ay gobanimo buuxda qaataan 1960ka. Hase yeeshee hore ayaa loo soo dhigay muddo lix bilood ah waxaana lagu dhawaqay 26kii Juun 1960kii, taasoo ka dhalatay halgankii shacbiga Soomaaliyeed iyo dareenkii qoomiga ahaa ee xoogga badnaa ee u hilinayey xorriyadda iyo madaxbannaanida, halkaaso ku dhawaaqday xukuumadda Ingiriisku gobanimada dalka Soomaaliyeed ee ay gumaysanaysay iyadoo ay ujeeddadeedu ahayd inay ku darayso barwaaqa sooranka Komanweliska.

Sidaas ayey u gaadheen gobannimadooda laba gobol oo ka mid ah qaybihii Soomaalida loo googoostay. Soomaalidii Ingiriisku gumaysan jiray iyo tii Talyaanigu gumaysan jiray markiiba way midoobeen oo waxay abuureen Jamhuuriyadda Soomaaliya 1dii bishii Luuliyo 1960kii.

**Horraantii bishii Febraayo sannadkii 1974kii ayuu gaadhay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaashu go'aan taariikh ah oo u gudbiyey mas'uuliyadda kacaanka Soomaaliyeed heer cusub iyo isbeddel kacaanimo oo waxtar leh. Halkanna waxaan ku sheegaynaa xilka go'aankaas taariikhiga ahi uu wato.**

1. Markii laga baaran degay xidhiidhka taariikhiga ah iyo iskaashiga qotada dheer ee u dhexeeyey Soomaalida iyo dadyowga Carbeed.

2. Iyadoo la rumeysan yahay inay Carabtu weligoobba taageerayeen qadiyadahaas Soomaalida.

3. Iyadoo la xusuusan yahay in xukuumadihii hore ee Soomaaliyeed iyo xukuumaddan kacaanka ay kaalin weyn ka cayaareen taageeridda qadiyadaha Carabta.

4. Xukuumadda Kacaanka Soomaaliyeed iyadoo af iyo adinba ku taageertay dagaalka Carabtu ay la galeen Imberiyaaliyadda iyo Sahyuuniyadda, had iyo jeerna caddeynaysa in danta Carabtu ay ku jirto inay midoobaan dhexdoodana iska kaashadaan, ilaa ay ku guulaysteen inay soo ceshadaan karaamadooda markii wax xille ku sameeyeen Sahyuuniyadda iyo gaashaanbuurtooda dagaalkii 6dii Oktoobar 1973kii.

5. Xukuumadda Kacaanka Soomaaliyeed, kamay wahsan inay xusuusiiso dawladaha Afrikaanka ah in gumaysigu doonayo inuu qaybiyo oo kala qoqobo si ay u kala yaacaan oo ay isugu soo hiran waayaan, iyo inuu baajiyo iskaashi dhexmara dadyowga Afrikaanka iyo kuwa Carabta.

6. Kacaanka Soomaaliyeed kaalin weyn buu ka qaatay dhismaha wadajirka Carabta iyo Afrikaanka ilaa ay qaawisay cadawga dhexdooda ku jira taasoo dhalisay inay dawladaha Afrikaanka ah badankoodu ka goostaan Israa'il xiriirkii diblomaasiga ahaa.

7. Guusha laga gaadhay kaalintaasina waxay abuurtay hawo cusub oo dhalisay inay iska kaashadaan Afrikaanka iyo Carabtu dhinacyada sinnaanta, caddaaladda iyo danaha isku midka ah.



8. Kacaanku wuxuu ku ballan qaadayaa had iyo jeer daryeelka danaha Soomaalida isagoo tixgelinaya qawaaniinta dawliga ah taasoo uu ku socdo had iyo jeer.

9. Soomaaliya way ku jiraysaa weligeed dagaalka xaqa ah ee ay kula jirto xukunka Imbiriyaaliga ah, si ay Afrika ugu aydo hodantinimadeeda sidaasoo kale Carabta iyo adduunka intiisa kalana ay manaafacaadsadaan khayraadkooda iyadoo la siman yahay sharcina lagu kala soconayo.

10. Iyadoo la tixgelinayo arrimaha aynu soo sheegnay ayuu u shaqaynayaa shacbiga Soomaaliyeed qarannimadiisa mabaadiidiisa, dhaqaalihiisa, horumarinta siyaasadeed iyo bulshanimo, taasoo waafaqsan xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee kacaanka.

11. Si ay u waarto guusha ay soo hoynayaan Afrikaanka iyo Carabtu ayey Golaha sare ee kacaanka iyo Kan Xoghayayaashu go'aan ku gaadheen inay Soomaaliya ku biirto Jaamacadda Carbeed.

Go'aankaas daraadii ayaa golaha Jaamacadda Carabtu uu shir isugu yimid magaalada Qaahira 14kii bishii Febraayo 1974kii, waxaanu goosatay in loo oggolaado Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya inay ku soo biirto Jaamacadda Carabta.

Fadhigaas waxa ka hadlay Xoghayaha arrimaha dibadda ee Soomaaliyeed, Jaalle Cumar Carte Qaalib, waxa uga mahadnaqay madaxdii ka soo qayb gashay shirkaas sidii fiicanayd eey u soo dhaweeyeen ku biiridda Soomaaliya ee Jaamacadda Carabta. Waxaannu tilmaamay xidhiidka taariikhiga ee dhaliyey in shacbiga Soomaaliyeed door weyn ka ciyaaray taageeridda walaalahooda Carbeed.

Markii la maqlay in loo oggolaaday Soomaaliya inay ku biirto Jaamacadda Carabta ayaa farax iyo raynrayni ku baahday dalka Soomaaliya oo idil. Shacbiga Soomaaliyeed wuxuu u arkay tallaabadaa kacaanka ah inay adkaynayso dhidibada u aasayso kaalinta habboon ee u ku leeyahay shucuurta Carabta dhexdeeda. Waxanu dareemay qof kasta oo Soomaaliyeed inuu u beddelay kacaanka Soomaaliyeed halgankii taariikhiga ahaa ee shacbiga wax la taaban karo, halkii ku haboonaydna

laga muujiyey markii uu goostay kacaanku in meesha ku habboon shacbiga Soomaaliyeed ay tahay inuu la noolaado dhaqdhaqaaqa shucuubta Carbeed.

Shacbiga Soomaaliyeed dhawr casho ayuu u dabbaaldegayey farxaddaa weyn ee uu ku biiray walaalihiis iyo guusha socodkaas taariikhiga ah ee boqolaalka sano soo taxnaa.

17kii bishii Febraayo 1974kii ayaa dadweynaha Soomaaliyeed isugu soo baxay bannaanbax weyn si ay u dhagaystaan khudbaddii qaayaha lahayd ee uu Madaxweynaha golaha sare ee Kacaanku Jaalle Maxamed Siyaad Barre uu ka jeediyey halkaas.

Fagaaraha golaha Ummadda oo ceeryoomay ayey ku kulmeen dad lagu qiyaasay 150.000 oo qof, halkaasoo ay kula kulmeen abbaanduulaha kacaankooda si ay u muujiyaan inay ku faraxsan yihiin tallaabooyinka uu qaadayo kacaankoodu isagoo guulba guul ka daba keenaya.

Jaalle Siyaad wuxuu ku bilaabay hadalkiisii mahadnaq uu u jeediyey dadkii isugu soo baxay fagaarahaas sababtoo ah iyagoo joogto u taageeraya go'aannada kacaanimada ee qiimaha weyn leh ee uu qaadayo golaha sare ee Kacaanka iyo kan dawladda go'aankaasoo ka tarjumaaya waxyaalaha uu jecelyahay dadka Soomaaliyeed iyo danahooda.

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku wuxuu tilmaamay xidhiidhka taariikhiga ah, dhaqaaleed ee uu dhexeeya shacbiga Soomaaliyeed iyo shucuubta Carbeed. Wuxuu ku yiri kulan taariikh ah oo uu la yeeshay Jaalle Siyaad Danjirayaasha dalalka Carbeed u fadhiya Muqdisho, laguna maamuusayey munaasabadda biiritaanka Soomaaliya ee Jaamacadda Carabta.

«Ummadda Carabtu waxay weligoodba taagnayd dhinacayaga iyadoo nagu taageeraysay halgankii dheeraa oo aanu soo galnay gaar ahaan kii aannu u soo galay madaxbanaanida».

Wuxuu intaas raaciyey Madaxweynuhu isagoo yiri «kadib markii aan gaarnay gobanimadayada maanaan ilaawin xidhiidhka aannu la leenahay dunida Carabta oo nala wadaagayey duruuftayada oo idil, sidaa darteed ka maanaan fogayn qadiyadooda ee waxannu hubnay inay tahay mid cadaalad



ah. Waannu gudanay xilkii naga saaraa inaanu difaacno qadiyadaha Carabta oo aanu isku xidhan nahay. Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyana kaalin weyn bay ka ciyaartay sidii laysugu soo dhaweyn lahaa Carabta iyo Afrikaanka».

«Waxaanuna quuldaraynayaa in midnimada iyo wada jirka Carabta iyo Afrikaanku ay xoojinayso nabadda, horumarinta iyo xoraynta dadyowga weli la addoonsado.»

Wuxuu ku soo gabagabeeyey Madaxweynuhu hadalkiisii isagoo yiri «biiritaankayaga aannu ku biirnay Jaamacadda dawladaha Carbeed waxa ku jirta danta shacbiga Soomaaliyeed, tan shucuubta Afrika iyo tan dadyowga Carbeed, aadna waxan u rumaysnahay inay tahay tallaabadaas loo bogay mid ku toostay hilinkii habboonaa».

Waxa lagu joojinayey khudbaddaa Madaxweynaha sacab xoog leh iyo dadweynaha oo ku dhawaaqayey nolosha Jaalle Siyaad iyo nolosha kacaanka. Sidaa darteed ayey u noqotay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaalia xubintii labaatanaad ee dawladaha ku jira Jaamacadda Carabta iyo dawladdii 8aad ee Afrika ee ku biirta ururkaas.

Shaki kuma jiro in biiritaanka Soomaaliya ee Jaamacadda Carabtu uu siinayo Ummadda Carbeed carro cusub oo Afrika ah iyo badweynta Hindiya. Sidaas oo kale ayuu biiritaankiisi uga dhigayaa Soomaaliya lafteeda buundadii isku xidhaysay wadanka Carabta iyo wadnaha qaaradda Afrika, waxanu xoojinayaa isu soo dhawaadka Carabta iyo Afrikaanka, taasoo ku saabsan dhinac kasta, waxaanu waxtar u leeyyahay sidii looga adkaan lahaa turrunturrooyinka uu dhigayo gumaysigu siduu u baajin lahaa xiriir dabiici ah oo dhexmara Carabta iyo Afrikaanka.

Caafimaadka Qofku wuxuu ku jiraa Caafimaadka Mujtamaca

Kacaanka hortii baalkaasi wuxuu ahaa mid madaw. Ruuxa Soomaaliyeed ee bukaa muu heli jirin daryeelka Caafimaadka ee habboon, ee wuxuu la taahi jiray tan haysa ka badan, maxaa yeelay suura gal may ahayn inuu ka helo dhakhtar ama sariir cusbitaaladii u xirnaa inay daweeyaan carruurta madaxda, dadka danaha weyn iyo kuwa ku nool sad bursiga.

Kacaanka hortii cusbataaladu way yaraayeen Dhakhtaraduna may dhaafayn tirada faraha badidooduna waxay ahaayeen shisheeye.

Muddo dheer ayaanu horumar ka dhalan meelaha wax lagu daweeyo ee cusbataalada tiradooduna ay yarayd takhaatiirtana aanay waxba ku kordhin. Ruuxa jirani way adkayd si uu dawo u helaa haddii la helana qaali ayey ahayd, ka sokow lacagta sicirka qaaliga ah ee aanu iska bixin karin qofka saboolka ahi dawooyinka badankooda lagama heli jirin dalka.

Taa sababteedu waxay ahayd iyadoo aanay jirin qorshe ku saabsan Caafimaadka iyo iyadoo aan lagu dadaali jirin baarida rasmi ahna la samayn jirin sidii looga bixi lahaa dhibaatada Caafimaadka ee ka taagan dalka. Markii uu curtay kacaanku lagama maarmaan ayey noqotay inuu halkaa ka bilawbo arrinta oo uu siiso daryeelka Caafimaadka iyo daawada inta ay mudan tahay, kadibna ay u dejiso qorshe cilmi ah oo laga baaraan degay lagagana bixi karo dhibaatada ka taagan dhinaca caafimaadka.

Badhtilmaameedka uu u dajiyey kacaanku qorshadii wax laga qaban lahaa arrintaas waxay ahayd «Caafimaadka Ruuxa wuxuu ku jiraa Caafimaadka Mujtamaca». Kacaanku wuxuu culays saaray sidii loo sugi lahaa Caafimaadka ruuxa Soomaaliyeed taasoo ka dhalanaysa in loo dejiyo barnaamij dhamays tiran oo ah daryeelka Caafimaadka, waxa kaloo la faafiyey garashada Caafimaadka kaasoo ku dhex jiray ololaaashii aqoon korodhsiga ee kacaanku ka sameeyey xagga Siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada iyo waxbarashada.



Hase yeeshee waxa jirta arrin lama huraan ah inaynu ku hakano si aynu u qiimayno siyaasadda Caafimaadka uu kacaanku dhaqangeliyey.

xaqiiqqadiisa waxa weeye in yarida meelaha ay wax inaga soo galaan iyo koobidda awooddeennu ay suurta gelin weyday kacaanka inuu duuduubo baalkii madoobaa ee xagga Caafimaadka Soomaaliya ka haystay iyo in si degdeg ah wax looga qabto dhibaatooyinka Caafimaadka ee isdultuurnaa. Kaddibna waxa dhacday dhibaatadii abaarta oo gelisay kacaanka intixaan taariikhi iyo kacaanba ah, maxaa yeelay dhibaatadaasi way ka weynayd kartida Soomaalida iyo awoodooda wayna ka weynayd awoodda dalal wada jira oo ka horreeya Soomaaliya.

Ka sokow in wax laga qabto tiradii yarayd ee Dhakhtarada iyo cusbitaalada, bukaan socdka, kalkaaliyayaasha waxa la soo gudboonaaday kacaanka Soomaaliyeed inuu dadaal gaar ahaaneed siiyo dadkii ku noolaa goobihii abaarta, guud ahaan dalkoo idil. Run ahaantii dhibaatada abuurtu waxay ahayd mid aad u balaadhan kana hor imanaysa dabeecadda iyo qadarka, hase yeeshee lama huraan ayey ahayd inuu kacaanku isticmaalo awooddiisa qadar kastaba ha lahaatee, sidii looga hortegi lahaa dhibaatooyinka badankooda gaar ahaanna iyadoo kaalmooyinkii ay walaalaha Carbeed u fidiyeen Soomaaliya wax ka tartay dhinacaas una kaalmaysay kacaanka sidii loo tirtiri lahaa dhibaatooyinka ka haysta xagga Caafimaadka.

## Guulaha Dadweynaha:

Waxa suuroobaysay in arrimo badan ka soo qaadanno geestaas, hase yeeshee waxaannu tilmaamaynaa arrimaha soo socda :

1. Maamul isku koobid la'aan, waxa u suurowday kacaanka siyaasada maamul koobid la'aan daraaaddeed in ay sabata bixiso gobollada dalka Soomaaliyeed oo ay ka saarto dhibaatooyinkii haystay kacaanka hortii markii uu ku koobnaa daryeelka Caafimaadku magaala madaxda oo keliya, wuxuu ku guuleystay kacaanku inuu dha-

qan geliyo siyaasad lagu tilmaami karo (Sinnaanta Juquraafiyeed ee dhinaca Caafimaadka) taasoo lagu baahiyey dalka oo idil.

2. Taasi waxay dhalisay in loo qaybiyo dadka ka shaqeeya caafimaadka ha noqdeen Takhaatiir, Kalkaaliyaal iyo mas'uuliyiinba iyo shaqaalaha Caafimaadka idilkiisba Gobollada iyo Degmooyinka uu dalku ka kooban yahay iyadoo la tixgelinayo duruufta meel kasta.

3. Mar haddii ay duruuftaasi qallafsan tahay guud ahaan waxa dhici karta in la qaybiyo dad badan oo shaqaala ah tirada dadkaas oo yar daraaddeed ayaa kacaanku u badheedhay inuu ballaadhiyo goobaha ama rugaha lagu barto Caafimaadka, kuwaasoo ah Dugsiyada Tababarka Kalkaaliyayaasha Caafimaadka iyo kuwa shaqaalaha ee Muqdisho, iyo in la badiyo tirada ardayda loo qaato Dugsiyadaas oo kale ee ku yaal magaalada Hargeysa.

4. Waxa kaloo kacaanku dejiyey barnaamijyo lagaga hortagayo cudurrada, iyadoo la fulinayo siyaasadda qaybinta maamulka ayaa lagu baahiyey barnaamijyadaas magaalooyinka iyo tuulooyinka oo idil. Waxa habboon inaanu xusno culayska la saaray in layska ilaaliyo cudurrada oo gun u ah barnaamijyadaa, maxaa yeelay waxa laga tilmaan qaadanayaa murtida oranaysa «Quraanjo in le'eg oo cudur iska ilaalis ah ayaa ka waxtar badan qandaar dawa ah».

5. Sidii loo xoojin lahaa barnaamijyadaas ayaa la dhisay rugaha Caafimaadka ee lagu daryeelayo hooyada iyo carruurta. Guud ahaan waxa la hagaajiyey meelaha dadka lagu daweeyo sida loo hagaajiyey tacliinta iyo aqoonta caafimaadka ee Dugsiyada.

6. Lama huraan ayey ahayd inuu kacaanku baabi'iyo daryeelka caafimaadka ee ay ka faa'iideysanayeen dad yari, waxaa la baabi'iyey meelihii gaarka ahaa ee lagu shaqaysanaayey, daaweyntii iyo daawooyinka waxa looga dhigay dadka lacag la'aan.



7. Sidaas awgeed ayuu kacaanku ula wareegay keenitaanka dawooyinka oo idil loona sameeyey Iskaashatooyin badan, markii kormeer toos ah lagu soo rogay sicirka lagu iibinayo lana tixgeliyo marka la iibinayo waxtarkooda.

8. Arrimahaas aynu soo sheegnay oo idili waxay u suura galiyeen kacaanka inuu xaqiijiso tallaabo weyn markii uu ka qayb geliyey dadweynaha fulinta barnaamijka iyo hawlaha caafimaadka ee la qaaday. Wuxuu ku guuleystay kacaanku in la gaarsiiyo garashada siyaasadeed ee mawaadinka Soomaaliyeed heer uu ku dareemo xilka ka saaran daryeelka caafimaadka.

**Horumarinta Mucasasaadka iyo xoojinta khadamaadka.**

Run ahaantii guulahaas la soo hooyey iyo sida weyn ee dadweynuhu raalli uga noqdeen wuxuu ku diiriyey kacaanka inuu dejiyo qorshe aad looga shaqeeyey oo ku saabsan horumarinta sannadaha 1974-1978ka. Sidii loo joogteyn lahaa hirgelinta mashruucaadka horumarinta.

Qorshahaas waxa ka mid ah aadna loo tixgelinayaa in la kordhiyo meelaha Caafimaadka iyo in la keeno qalabka looga baahan yahay, si ay ugu suuragasho hagaajinta iyo horumarinta hawlaha ay ummadda u hayso. Sannadkii 1973kii waxay ahayd tirada cusbitaalladu 63, 1978kana waxay gaarayaan 79. Tirada Shaybaadhyada waxay ahaayeen markii qorshuhu bilaabmay 24, dhammaadkeedana waxay gaari doonaan 52. Tirada sariiraha jiifka cusbataalladu waxay ahaayeen 5087 sannadkii 1973kii. Sannadka ugu danbaysa qorshaha waxay noqonayaan 6699. Arrimahaas aynu soo sheegnay waxay u qaybsanaan doonaan gobollada soo socda: Shabeellaha Hoose, Shabeellaha Dhexe, Jubbada Hoose, Hiiraan, Mudug, Galguduud, Bari, Nugaal, Togdheer, Sanaag, Gedo, Hargeysa, Bakool iyo Baydhabo.

Kororsiimada laga filayo meelahaas wax lagu daweeyo waxay u baahan tahay kororsiimo u dhiganta xagga Takhaatiirta, Kalkaaliyayaasha iyo shaqaalaha meelaha kale ee caa-

fimaadka. Waqtiga aynu joogno waxa laga helaa Soomaaliya 70 Takhtar ay weheliyaan kuwa shisheeye ay tiradoodu gaareyso 86.

Bishii Agoosto 1970kii ayey bilawday xukuumaddu hirgelinta barashada xirfadda kalkaaliyanimada oo muddo saddex sano ah socon doonta iyo soo saarida dad waaya arag ku ah shaybaaryada.

**Aayaha Caafimaadka.**

Kacaanku wuxuu aad ugu dadaalayaa sidii loo dabargoyn lahaa cudurrada kaneecada, qaaxada, furuqa, cagaarshowga, suuxdinta waana xanuunnada aad ugu fida dalalka u dhaw xariiqa qaybiya dunida ama kuwa u dul maro.

Cudurka qaaxadu waxa weeye xanuunnada aad u halista ah ee ku faafa Soomaaliya sababtuna waxa weeye xagga cuntada, liidashada aqoonta caafimaadka iyo iyadoo aan la qaadin tallaabooyinka loo baahan yahay ee lagaga hortagayo.

Cudurradaas waxa lagaga hortagi karaa iyadoo hore loo mariyo qalabka caafimaadka, la ballaadhiyo soo saaridda kalkaaliyayaasha, in la dhiso machad lagu tababbaro hawlwadeenka caafimaadka iyo rug Shaybaar oo lagu eego caafimaadka guud iyo in la dhiso bukaan socod eegto badan. Waxa la dhisay 17 bukaan-socod eegtooyin ah oo cusub iyo 16 rugaha caafimaadka taasoo uu dhammaaday dhismaheedu muddadii saddexda sano ee qorshaha gaaban 1971-1973kii.

Qorshaha horumarinta 1978ka oo xukuumadda kacaanka hore u sugtay waxay culays saaraysaa sidii hore loogu marin lahaa heerka cuntada ee ruuxa Soomaaliyeed iyo sidii loo hagaajin lahaa hawlaha caafimaadka ee magaalada, miyiga, tuulooyinka, laguna fulin lahaa barnaamij horumaris ah cusbataallada Gobollada iyo Degmooyinka iyadoo cusbataallo cusub laga dhisayo meelaha soo socda: Marka, Jawhar, Kismaayo, Baydhabo, Xuddur, Garbahaarray, Hargeysa iyo Garowe.

Waxa kale oo ay xukuumaddu ka dhisaysaa 14 cusbataal Degmooyinka Baydhabo, Ceelwaaq, Doolow, Jalalaqsi, Xaradheere, Caabudwaaq, Lughaya, Bayra, Cadale, Jirdaax, Qansaxdheere, Taleex, Balad Xaawo iyo Saakow.

Waxa mudan in la sheego inay dhistay xukuumaddu marka laga reebo labada cusbataal ee waaweyn ee ku yaal magaalada Muqdisho, cusbataalka dhalmada iyo xanuunka dumarka kaasoo ay yaalliin siddeetan (80) sariirood oo dhalmada ah iyo boqol (100) sariidood oo xanuunnada dumarka ah.

Waxa kale oo la dhisayaa laba cusbataal oo dadka waalan ah; ka hore waxa laga dhisayaa Muqdisho, waxanu qaadayaa laba boqol (200) sariirood ka labaadna magaalada Hargeysa, waxanu qaadayaa (400) oo sariirood, waxa jira isaguna cusbataal kale oo u gaar ah cudurka baadilka, waxanu qaadayaa (1000) kun sariirood, waxana si gaar ahaaneed loogula dagaallamayaa faafidda xanuunka qaaxada.

Waxa kaloo la dhisayaa afar (4) cusbataal oo kiiba qaado (100) sariirood oo lagula dagaallamayo cudurka aynu soo sheegnay, waxa jira isna cusbataal u gaar ah xanuunnada caloosha oo Muqdisho laga dhisayo, waxanu qaadayaa boqol (100) sariirood.

Cusbataalladaa badanayaa waxay u baahanayaan tirada Takhaatiirta oo kororta, maxaa yeelay tobannaan cusbataal oo la dhiso iyadoo aan loo hayn Takhtarro iyo Kalkaaliyayaal ma yeelanayaan waxtar. Sidii loo siyaadin lahaa takhaatiirta waaya aragnimadoodana kor loogu dhigi lahaa ayaa la dhisay cusbataalka Jaamacadda oo qaadaya afar boqol (400) oo sariirood, si loogu suura geliyo ardayda inay dhaqan geliyaan casharradii ay qoraalka ku soo qaateen.

Arrimaha kacaanka Soomaaliyeed ku dadaalayo waxa ka mid ah sidii loo hagaajin lahaa cuntada dadweynaha oo idil. Arrintaasna waxa kormeeraya Hay'ad lagu magacaabo «Guddiga Cuntada» oo loo dhisay dhaqan gelinta wanaajinta cuntada si loo rumeeyo ujeeddada caafimaadka ee qotada dheer, waxaana iska kaashanaya Wasaaradaha ku lugta leh dhinaca cuntada, si ay u faafiyaan baraarujinta caafimaadka iyo ka hortagga cudurrada la kala qaado iyo inay sameeyaan daraasaadka iyo baaritaanka la xiriira arrimahaas.

Cusbataallada faraha badan ee ay Wasaaraddu ku dhistay qiimaha hooseeya waxay xaqiijinayaan arrimaha soo socda :

Daryeelka caafimaadka Hooyooyinka iyo Carruurta. - Daweynta xanuunnada la kala qaado. - Caafimaadka guud iyo degaanka. - Fulinta barnaamijyada cudurrada. - Kordhinta baadhitaanka cudurrada. - Ilaalinta kaydinta iyo istaatikada caafimaadka. Kor u qaadka garansiinta dadweynaha qiimaha caafimaadka.

Lama ilaawi karo waxyaalaha ay ka qabatay Wasaaradda Caafimaadku horumarinta caafimaadka Xoolaha, taas oo la socota hodantinimada dalkeenna xagga xoolaha. Waxa ay sameeyaan guddiyada gaarka u ah arrimahaa kormeer ay ku maraan dalkoo idil oo lagaga tallaalo cudurrada xoolaha.

Dadka haysta xoolahana waxa la baraa jidka ugu wanaagsan ee xoolaha loo dhaqo ama cuntada loo siiyo.

Arrimahaas aynu soo sheegnay waa guulo waaweyn haddii aynu ogaanno in 70% dadka Soomaaliyeed ay ku nool yihiin xoolaha.

Waxa aynu la saconnaa in horumarinta ballaadhan ee caafimaadka laga gaadhay aanay ahayn waxyaalaha waaweyn ee u xaqiijiyey Kacaanka Soomaaliyeed ee ay jiraan guulo fara badan oo la soo hooyey, waxaana rumaysanahay annagoo ka raalliya waxyaalihii aan u soo joogay 12kii maalmood sida kacaanka Soomaaliyeed uu ugaga hortagay awooddiisa kooban dhibaato dabiici ah tii ugu weyneyd oo shacbiga haleesha taasoo ahayd abaartii.

**Annaga ayaa u talinayna Dalkayaga lagana helimaayo Saldhigyo Millatari Soomaaliya.**

Waxaad indhihiinna ku aragteen beentaas aan raadka lahayn... Eraygaas ayuu ku soo gooyey Xoghayaha Arrimaha Dibedda ee dawladda Soomaaliyeed, Jaalle Cumar Carte Qaalib, saxafiyiintii markii ay ka soo laabteen socdaal ay ku tageen dekadda Berbera iyagoo watay dayuurad kuwa tooska u duula ah. Dayuuraddu waxa ay dul martay dekaddaas, waxa kaloo dul martay dhul ballaadhan iyadoo ku soconaysay duulitaan aan aad u sarrayn. Nimankaas saxafiyiinta ihi waxay indha indheeyeen bari, galbeed, woqooyi iyo koonfur, waxaanay ka soo laabteen socdaalkaas oo ay ku kulmeen. Isagoo sii wata hadalkiisa ayuu yiri Jaalle Carte, «Waxaanu doonaynay inaad indhihiinna ku soo aragtaan oo aad soo dhuuxdaan runtu waxay tahay intaanaan idinla hadlin... Run ahaantiina beentaasoo kale ma aha wax lala yaabo, waana mid laga filayo had iyo jeer imbiriyaaliyadda iyo Israa'iil oo cadaawad joogta ahi ka dhaxayso kacaanka Soomaaliyeed. Anaguna waxaanu kaga hor tagaynaa dagaalkaas gaashaan u daruur iyo annagoo xoojinayna tubta horsocodnimada aanu raacayno, annagoo gaashaanka ku dhufanayna nacab kasta oo waxyeelaya xorriyadayada, arrin walbana caddaan baan uga hortagaynaa iyadoo aanay jirin wax aannu ka cabsoonaynaa.

Eedaha la noo soo jeedinayaa ma aha kuwa na bajinaya, si badheeh ahna waa uga hortagaynaa, saldhigyada Soofiyeedka ay kaga sheekaynayaan inay ku yaalliin furdadda Berbera hadalkeennana aynu ka bilawnay waxanu uga hortagnay si cadaan ah sidaad u aragteen, kumaanan deffirayn eedahaas hadallo annu sii daynay ee waxannu idin geynay meeshii ay lahaayeen waxa jira saldhigyo Soofiyeedku leeyahay, waxaanad indhihiinna ku soo aragteen inaan taas waxba ka jirin. Waxannu weydiinnay Jaalle Carte mar ka mid ah waqtiyadaa aanu la kulmaynay, maxaa eedahaas loogu soo jeedinayaa dawladda Soomaaliyeed, waxaanu ku jawaabay: «Taas waxa ka dambeeya sababo badan.. waad maqasheen sharaxii Madaxweynaha Golaha Kacaanka, Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre ee ku saabsanaa ceebahaas sidii uu sheegay. Israa'iil iyo Sahyuuniyadda caalamiga ah ayaa ka dambeeya arrintaas si ay u kala kexeeyaan midnimada Carbeed oo ay ugu dhex abuuraan shaki. Dhinaca kale imiriyaaliyadda, isticmaarka iyo xoogagga wax dhiig miirtaa waxay doonayaan maarmaarsiimo ay ku daboolaan dhaqdhaqaaqa imbiriyaaliyadda ay ujeeddadiisu tahay inuu ka abuuro saldhigyo millatari meelo dhaw... iyo in la sii daba dheereeyo joogitaanka gumeysiga shisheeyaha ee Xeebta Soomaaliyeed (Jabuuti) iyagoo ku andacoonaya in lagaga hortagayo saldhigga Soofiyeedka ee la been abuurayo.

Waxa iska caadi ah inay kulmaan ujeedooyinka Israa'iil

iyo Imbiriyaaliyaddu... biiritaanka Soomaaliya ay ku biirtay walaalaheeda Carbeed iyadoo degaankeeda Juquraafigu qiimo weyn leeyahay ayey noqonaysaa badda Casi mid Carbeed, waxa kaloo uu qiima weyn u leeyahay joogitaanka Carbeed ee Badweynta Hindiya iyo marinka badda Cas ee istiratijiga ah, sidaa ayeynu u fahmi karnaa eedaha loo soo jeedinayo Soomaaliya oo u soo kordhiyey Carabta waxtar istiraadji ah oo qiimo leh. Istiraatijiyadaasi kuma koobna Badweynta Hindiya iyo Badda Cas oo keliya ee waxay ku siman tahay Afrika gudaheeda halkaasoo ay Israa'iil ay dhuumaalaysi ku gashay iyadoo gar wade u ah imbiriyaaliyadda, waxaanay ku yeelay qaaradda Afika godad ay wax ka sameyn karayso.... Soomaaliyana iyadoo bahaysanaysa walaalaheeda Carbeed iyo Afrikaanka ayey dhartirtay oy qaawisay ujeeddooyinka Israa'iil iyo waxyaalaha ay ka waddo qaaradda Afrika.

Shirarkii uu la yeeshay Madaxweynaha Kacaanka Soomaaliyeed Madaxda kale ee Afrikaanka iyo shirarka Midowga Afrika, waxa ay Soomaaliya ka cayaartay doorka u dabiiciga ah horseedka Carabta iyo Afrikaanka, halkaasoo ay keentay xaqiiqda Israa'iil.

## AL-KASHAAFA

**Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu ku baaqay in dagaal lagu qaado aqoondarrida.**

Markii lagu dhawaaqay xuruufta lagu qorayo afka Soomaaliga, ayey lagama maarmaan noqotay tallaabada lagu dhaqaaqo si aqoonta loogu faafiyo dadweynaha dhexdiisa si loo gaaro horumar dhaqaaleed iyo mid bulshanimo. 7dii bishii Maarso 1973kii ayuu Madaxweynaha kacaanka Soomaaliyeed, Jaalle Sarreeye Gaas Maxemd Siyaad Barre khudbad weyn uu ka jeediyey shir ay isugu yimaadeen shaqaalaha Soomaaliyeed gegida Banaadir ee kubadda cagta, halkaasoo lagu faraayey ololihii lagula dagaalamaayey aqoondarrida. **Khudbaddaa wuxuu ku yiri Madaxweynuhu:-**

«Kacaanku wuxuu ku ballan qaaday markii uu dhashay inuu xididdada u bixiyo dhibaatada ka taagan xagga dhaqanka. Arrintaas markii aad looga dooday ee laga wada



hadlay ololaha lagu qaadayo, ayuu go'aan ku gaaray Golaha kacaanka iyo kan Xoghayayaashu in la bilaabo ololahaas, si uu u baran karo qof walba oo Soomaaliyeed magaalo ha joogo, miyi ha joogo, gobollada ha joogo, degmooyinkase ha joogee wax qorid iyo wax akhris sannadkan dhamaadkiisa. Waxannu doonaynaa inaanu bilawno sannadka soo socda in loo diro dadka ka aflaxa ololahaas baadiyaha si reer guuraaga wax loo baro taasoo inoo suuragelinaysa in xididdada loo bixiyo aqoondarrida oo 99% dadkeenna dhibaatadeedu hayso».

Degdeg waxaa loo abuuray guddi qaran oo ay ku jiraan saddexda Madaxweyne ku-xigeen si ay u noqoto hay'ad sare oo dejisa qorshaha siyaasadda lagula dagaallamayo aqoondarrida. Waxa kale oo la sameeyey guddi sare oo farsamo oo hirgelisa ama dhaqan gelisa siyaasadaha iyo harnaamijyada ku suubsan arrintaas madaxna uu ka yahay Wasiirka Waxbarashada kana ay tirsan yihiin wakiillo Xafiiska Siyaasadda iyo Wasaaradda Warfaafinta, waxaanay qaban qaabinaysaa abaabulka iyo kicinta.

Arrintii u horraysay ee qoraalka ama wareegta ee ka soo baxday Madaxtooyada waxay oranaysay: «Ka qayb galka Ololaha la dagaallanka aqoondarradu waajib ayey ku tahay waxgarad kasta oo Soomaaliyeed oo mas'uul ah awoodna u leh inuu wax baro dadka kale, gaar ahaan guddiga fulinta baridda Afka Soomaaliga.»

Ololahaas xamaasad ayaa lagu qaaday iyada oo afartankii (40) guriba meel laysugu geeyey, meelo ku habboona loogu talagalay oo dadka wax lagu baro. Halkudhaguna wuxuu ahaa «meel kasta oo banaan dhulka ha hadoodilaato, yaanay haddoodilaan, gidaarro ha lahaato yaanay lahaanin, waxa loo isticmaalayaa fasallo lagu qaato Ololaha la dagaalanka jahilga». Fasalladaas waxa laga sameeyey meelaha dibadda, dhirta hoosteeda, beeraha nasashada, meelaha lagu cayaaro, guryaha hortooda, guryaha shaneemooyinka iyo meelo loo kireeyey, intaas waxa dheer in meel kasta oo suura gal ah laga furay fasallo tusaale ahaan Bukaan-socodka «Cariif» oo ku yaalla xaafadda Hawlwadaag, waxa loo qaybiyey 26 fasal ooy mid kasta ku bartaan 45 qof tirada

guud markaa waxay noqonaysaa 1170 qof.

Ruux walba oo Soomaaliyeed oo waxgarad ahiba wuxuu ku dhaqaaqay fulinta dhawaaqii Madaxtooyada hal ku dhaguna wuxuu ahaa «Hadaad taqaan bar, hadaadan aqoonna baro, waana hal ku dhag salka ku haya mabaadiida Iskaa-wax-u qabso. Istaatikadu waxay na tusaysaa in tirada dadka waaweyn ee isku qoray fasallada heerkii hore ee Ololaha — Abriil 1973kii ilaa Jannaayo 1974kii ay gaarayso 400,000 kuwaas ku guulaystay imtixaankii. Tiro intaa ka badan ayaa iyaguna wax ku bartay Idaacadaha iyo wixii la mid ah, tiradooduna waxay gaaraysay 600,000 waxaanay ka gudbi karayeen Imtixaankaas oo kale. Sidaas ayuu kacaanka Soomaaliyeed isagoo dhuuxaya awoodiisa gaar ahaaneed uga xorreeyey malyuun qof oo Soomaaliyeed muddo bilo yar ah aqoon darida. Natiijadaas wanaagsan ee ka dhalatay Ololahaasi fure ayey u noqotay jidka guusha waana mid ku dhiirigelinaysa in Ololahaas xamaasad loo sii wado.

Ummadda Soomaaliyeedna waxbarasho ayey u guntatay ha noqoto da'diisu ama shaqadiisu wax kasta. Ololaha la dagaallanka jahliga si fiican ayuu u socdaa si kor loogu qaado Waxbarashada iyo dhaqanka dadweynaha. Dadkii ku guulaystay ololahaa way sii wataan waxbarashadoodu ku saabsan aqoonta kala geddisan ha noqoto Juqraafiga, Taariikhda, Sayniska, Xisaabta iwm. Dadkaa qaarkoodna waxaabay qaateen shahaadadda Dugsiyada Hoose, Wasaaradda Waxbashaduna waxay kaga faa'iidaysanaysaa dadkaasi inay ka dhigaan Dugsiyada Ololaha si aanay dadkaasi dib ugu noqon jahligii laga xorreeyey haddii lagu ilaawo heerkaas ay gaareen. Xukuumadda kacaankuna waxay ugu talagashay barnaamij ballaaran oo ka geddisan waxbarashada caadiga ah, kaasoo ah in gudbayaasha wax la baro lix bilood sanad kasta soconaysana muddo saddex sano ah. Halkaasuu qofku baranayo wanaajinta iyo horumarinta afka Soomaaliga (Toddobaadkiiba 4 saacadood) aqoonta guud ahaaneed (toddobaadkiiba 2 saacadood), Casharrada muhiimka ah ee qofku baranayo waxa ka mid ah Idiyoolajiyada Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan. Taa macnaheedu wuxuu yahay in dadka ka soo baxaya fasallada Ololaha ay dhamaysanayaan barnaamij siyaasi ah waxna ka baranayaan mabaa-



diida Iskaa wax u qabso iyo Xaashiyaha 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka. Ujeeddada u weyn ee barnaamijkaasi waxa weeye in dadweynuhu fursad u helo waxbarashada iyagoo barananaaya waxyaabaha waaweyn ee muhiimka ah marka ay ka gudbaan qaybta hore ee Ololaha. Kadibna waxa loo diyaar garayn qofka inuu waxbarto gutana waajibkiisa, waxaana abuurmaya ruux aad u garanaya qiimaha iyo waxtarka uu ka helayo marka uu daacad u noqdo dhaqan gelinta Hantiwadaagga cilmiga ku dhisan.

Sidii qorshadu ahayd waxaa la bilaabay sannadkan 1974ka Olole ballaaran oo laga hirgelinayo baadiyaha, madaxda gobollada iyo Degmooyinkana waxa amar lagu siiyey inay dejiyaan qorshadii ay ku dhaqan gelin lahaayeen waajibkaa qaraneed.

Reer miyigu waxay yihiin bulshada intiisa badan, waanay adag tahay sida loo beddelo noloshooda, kacaanka Soomaaliyeed aad ayuu isugu taxalujinayaa si kor loogu soo qaado noloshooda guud, taasoo ka muuqanaysa qorshaha shanta sano.

Waxa lagu talajiraa 10 Dugsi oo tijaabo ah oo midkiiba wax ku barato 400 oo arday, haddii lagu guulaystana waxay saldhig u noqonaysaa nidaam lagu ballaarinayo waxbaridda dadka waaweyn. Inkastoo dhibaato lagala kulmay heerka 2aad ee Ololaha ee reer Miyiga, marka loo eego kii 1aad ee magaalooyinka, sababtoo ah dadkaa reer miyiga ah oo had iyo jeer ku jira geeddi iyagoo u raadinaaya baad iyo biyo xoolahooda, hase yeeshee waaya-aragnimadii ololaha qaybtiisii hore oo ay ugu waaweynaayeen xamaasaddii waddaniga ahayd iyo kacaanimadii dadweynuhu muujiyey si arrintaa guul uga keenaan ayaa ku dhiirrigelinaysay reer miyiga inay gaashaanka u daruuraan dhibaata kasta oo ka hor imanaysa, sidii ay horumar u gaadhi lahaayeen.

La dagaallanka aqoondarridu ahmiyad weyn ayey siinaysaa xukuumadda kacaanku maxaa yeelay lagu guulaysan maayo in kor loo qaado garashada siyaasadeed ee shacbiga lana fidiyo mabaadiida Hantiwadaagga cilmiga si dadwey-

nuhu u fahmaan lama huraanimada isbeddelka taariikhiga ah iyadoo hantiwadaaggu yahay meesha uu ku hiranayo ad-duunku si uu horumar u gaadho, iyada oo hantigoosadkuna meel ciriiriyoon marayo, suuragelimayso taasi haddii uu ya-hay dadku ku aan waxba garanayn.

Ololuhu wuxuu dhalinayaa inuu awood u siiyo malaa-yiin qof oo Soomaaliyeed inay xirfooyin cusub bartaan ku kalsoonaadaan naftooda iyo awooddooda iyagoo helaya fur-sad ay kula siman yihiin walaalahooda kale ha noqoto dha-qaalaha, bulshanimada iyo siyaasadda.

**Wax ku barasho lacag la'aan laga bilaabo dugsiyada hoose ilaa Jaamicadda.**

Tacliintu waxay ahayd mas'uuliyaadka waaweyn ee xu-kuumadda Soomaalidu doonaysay inay wax ka qabato. Bo-qolkii sano ee gumaysigu haystay dalka Soomaalida wuu ka xaarantimeeyey inay dadku wax bartaan, hab waxbarashana looma samayn dalka muddadan dambe ka hor. Habkii ho-re wuxuu waafaqsanaa siyaasadda isticmaarka, kaasoo ah inaan dadka la barin macrifadda casriga ah inkastoo ay siyaasadaha gumaystayaashu ku kala duwanaayeen middaas.

Markii dalka Soomaaliyeed qaatay gobanimadiisa wu-xuu dhaxlay laba hab oo waxbarasho kala geddisan, mid-kood wuxuu ka taagnaa gobolka Waqooyi oo Ingiriisku gu-maysan jiray ka labaadna kii Koonfurta oo u Talyaniigu gu-maysan jiray. Hababkaasi waxay ku kala geddisnaayeen saacadaha wax la baranaayo ee marxaladaha tacliinta saddex-da ah iyo afka wax lagu baranaayo, waxii kaloo ay ku kala geddisnaayeen caadada waxbarashada: intaas waxa dheeraa in dugsiyada Hoose ay ka furnaayeen meelo dalka ka mid ah, hase yeeshee kuwa sare ay ku koobnaayeen xarunta iyo magaalooyin yar oo waqooyiga ah. Arrimihii la gudboo-naa xukuumadaha Soomaaliga markaa waxay ahaayeen in la mideeyo habka waxbarashada lana dhamaystiro in loo dajiyo qorshee lana ballaariyo gaar ahaan la gaarsiiyo tac-liinta sare Gobollada iyo Degmooyinka.

Run ahaantii waa la mideeyey xagga habka oo afar sano ayaa laga dhigay marxalad kasta. Muddada waxba-rashada dugsiyada Hoose ee gobollada Waqooyi Ingiriisku gumaysan jiray waxay ahayd saddex sano dhinaca Koonfu-reedna waxay ahayd saddex sano, marxaladda dhexe ee Go-bollada Waqooyi waxay ahayd afar sano, Koonfurna saddex sano, mudada Dugsiyada sare dhinac kasta waxay ahayd afar sano. Waxbarashada Waqooyi waxay lahayd hab Ingiriis, ta Koonfurtuna waxay lahayd hab Talyaani.

Sanadihii ka dambeeyey madaxbannaanida waxba iska-ma beddelin waxbarashada sabatu waxay ahayd nimankii dalka xukuumayey markaas oo meel gaaban wax ka arkayey iyo iyagoo danahooda gaarka ah daba ordaayey, sidaa darteed-na aan laga qaadin tallaabooyinkii habboonaa beddelaadda habka waxbarashada si uu ugu adeego danaha dalka.

Habka qudha ee ay ku kala geddisnaayeen dhinaca waxbarashada gumaystayaashii iyo xukuumadihii Soomaali-yeed ee ka dambeeyey wuxuu ahaa iyagoo waxbarasho di-badeed ee dawladaha shisheeyu siinayeen Soomaaliya ay dadkii Soomaaliya xukuumayey gudahooda ka qaybsan ji-reen. Laguna muumulayey musuqmaasuqii markaa ka taagnaa dalka.

**Madaxweynaha oo la hadlaaya Ardayda Jaamacadda wadaniga ah.**

Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu dhaxlay habkaa wax-barasho oo laga murugoonayo waxaana la gudboonaa in la beddelo habkaa, taasoo ahayd in laga bilaabo asaaska, wa-xaana lagama maarmaan ahayd in laysku xiro habka waxba-rashada iyo horumarinta dalka hadda ha noqoto ama mus-taqbalka soo aaddan. Taa loogama boganayn in la beddelo waxyaabaha lagu barto Dugsiyada ee waxay ahayd in la de-jiyo hab waxbarasho oo ballaaran si dadweynaha oo idili uga faa'iidaystaan.

Xukuumadda kacaanku waxay bilawday dhismaha dug-siyada bishii Oktoober sanadkii 1969kii kuwa hoose ilaa iyo kuwa Jaamacadaha, taasi waxay ahayd tallaabo lagu fu-linayo siyaasad uu dejiyey Golaha Sare ee Kacaanku oo ora-naysa in fursad loo siiyo qof kasta oo Soomaaliyeed oo gaa-

ray da'da waxbarashada inuu barto tacliintiisa ilaa iyo heerka u sarreeya, si taasi u suurowdo lacag la'aan ayaa laga dhigay waxbarashada marxaladaheeda oo idil, taasina jid ayey u furtay dadkii saboolka ahaa ee an heli jirin lacagta dugsiyada lagu dhigto, waxa kaloo ay dhalisay in ardayda iyo dugsiyaduba bataan.

Markii la qoray farta Soomaaliga ayaa run ahaan wax badani iska beddeleen habka waxbarasho, afka wax lagu baranaayaana uu noqoday isaga, taasi fursad weyn ayey u tahay ardaydii boqolka sano ku baranaayey af aan kooda ahayn. Si aan dhibaato uga dhalan fulinta habka cusub ee waxbarashada ayuu kacaanku ula wareegay dugsiyadii shisheeyuhu maamulayey waxaanay ahaayeen 42 Dugsi qaarkood waxay ahaayeen kuwa raacsan Talyaaniga oo lagu dhigi jiray afkooda, waxaana lagu maamulaayey habka Talyaaniga gudihiisa wax lagu maamulo.

Dugsiyada qaarkoodna waxa dhistay Masar waxaanay ahaayxn 14 dugsi oo ka kooban kuwa dhexe iyo kuwa sare, waxaa wax ka dhigi jiray barayaal Masaari ah waxaana wax lagu baran jiray afka Carabiga oo kaliya.

Nooca saddexaad waxa lagu baran jiray afka Ingiriisiga oo kaliya. La wareegaas ujeedadiisu ma ahayn shisheeye nacayb ee waxay ahayd in la mideeyo habka wax lagu baranayo dalka, barayaashii maamuli jiray dugsiyada gaarka ah way la dheceen arrintaas, waxaanay fuliyeen siyaasadda dawladda ee waxbarashada, sidaa ayey ugu guulaysatay dawladda Soomaaliyeed markii ugu horraysay taariikhdeeda wax lagu bartay hab keliya. Afafka kala gedisan ee wax lagu baraayey waxay dhaliyeen dhibaatooyin xagga bulshada iyo siyaasadda maxaa yeelay qof waliba wuxuu jeclaa afkii uu isagu wax ku bartay si dahsoonna wuxuu ugu xaglinayey dalka luqadaa lagaga hadlo, taasina lamay socon danta Soomaaliya iyo sharaftiisa. Intaa waxa dheeraa iyadoo qas ka taagnaa habka waxbarashada afafkaa faraha badan awgeed, ardaydana waxaa waajib ku ahaa inay si fiican ugu hadlaan laba ama in ka badan saddexda af ee wax lagu baranaayey oo ahaa Ingiriisiga, Talyaaniga iyo Carabiga inta aanay u weecan waxyaala ay ku shaqayn lahaayeen.



Waxaa loo baahnaa in af waliba oo dhaqankiisu gaar yahay loogu tala galo barayaal badan oo si gaar ah wax loo baray, barnaamijyo gaar ah taasoo dhallinyaradii ku dhalisay walwal.

Wasaaradda Tacliinta waxaa ka hor yimid mas'uuliyad balaaran sanadkii 1973kii, taasoo ahayd in lagu faafiyo kutubta wax laga barto afka Soomaaliga. Dhibaatadu ma ahayn daabacaadda kutubta, ee waxay ahayd waqtigii loogu tala galay in lagu faafiyo oo ku koobnaa awoodda Wasaaradda, weliba waxay ahayd qorshadu inaan kutubtaas lagu faafin dugsiyada keliya ee dadweynaha kutub afka ku qoran loo faafiyo. Macallimiintii wax qori karaysay oo dhan way ka qavb galeen arrintaas hadana lama soo saarin kutubtii wax ku fillaan lahayd.

Isla markaa barayaasha Soomaaliyeed waxay qoreen buugag ku qoran af Carabi, iyo Ingiriisi si buugaggaas looga dhadhansado dhaqanka Soomaaliyeed oo ay ku baahaan dadweynaha. Buugaggii hore waxa saldhig u ahaa dhaqanada shisheeyaha, Soomaaliduna kama ay doodi karayn.

Isbeddelkaasi wuxuu dhaliyey in la badiyo dugsiyada, waxaana la dhisay laga bilaabo Oktoobar 1969kii sannadkiiba 170 fasal, maxaa yeelay waxa kordhay tiradii ardayda intii kacaanku curtay, waxaana lagu qadarayaa korsiimadaas 164 %.

Isbeddelkaas ku dhacay habka waxbarashara iyadoo ay is badaleen tiradii ardayda wuxuu dhaliyey in la dedajiyo barnaamijyada tababarradda barayaasha iyo in la kordhiyo dadka tababarayaashaa wax ka dhigayo. Iyadoo la kaashanaysa Bangiga dawliga ee dhismaha ayaa kacaanka Soomaaliyeed uu balaadhiyey sanadkii 1973kii kuliyadda «Lafoole» ee lagu tababaro macallimiinta.

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta waxa ay dhistay dugsiyada xannaanada carruurta da'doodu tahay 3-5 dugsiyada noocaas ihi ma jirin kacaanka hortiis, carruurtana waxa la geyn jiray dugsiyada «Qaranka» marka ay da'doodu tahay 4-5 laba sannadood ayey halkaas ku soo baran jireen

mabaadi'da Islaamka iyo «Quraanka Kariinka».

Waxa kale oo kacaanku ku dadaalay waxbarashada dugsiyada dhaqaalaha guriga ujeedadiisuna ay tahay in la abuuro hooyo Soomaaliyeed oo ka qayb gali karto dhismaha dalka. Inkasta oo tacliinta buuq ka taagnaa kacaanka hortiis hadana waaba la iska ilaaway in wax la baro dumarka. Mar hadduu kacaanka Soomaaliyeed rumaysan yahay sinnaanta ragga iyo dumarka dhinac kasta lama huraan waxa ah in markaas kor loo soo qaado waxbarashada dumarka, taasoo aan ku koobnayn dhaqaalaha guriga ee ah midda rasmiga ah laga bilaabo tacliinta hoose ilaa iyo Jaamicadaha.

**Fududaynta guud ahaaneed ee Waxbarashada Dadka:**

Istiraatijiyada Waxbarashada ee qorshaha 1974-1978 waxay tixgelinaysaa arrimaha soo socda:

1) In kor loo qaado wax akhriska iyo wax qoridda 99%
2) In loo fududeeyo qof kasta oo doonaya inuu wax barto.
3) Inay la socoto Waxbarashadu horumarinta dalka, taasoo macnaheedu yahay inay wada socdaan waxyaalaha la baranayo iyo habka ijtimaaciga dhaqaalaha iyo dhaqanka dadku.
4) In la balaariyo Waxbarashada Farsamada.
5) In la balaariyo intii gal ah Jaamacadaha dalka.

Waxa lama huraan ah haddii uu dal soo korayo inay qorshaynaato istiraatijiyadiisu, haddii kale wax ku ool noqon maayo dadaalkiisa iyo dhaqaalaha kaga baxaya Waxbarashada. Sidaa darteed ayeye Wasaaradda Waxbarashadu waddaa diraaso ku saabsan in la ogaado awoodda dadka ee qaranka, si suura gelinaysaa Wasaaradda in la qaado toobiyahay isu keenaya Waxabarshada Farsamada iyo ta guud. Arrinta aad loogu baahan yahay maanta waxay tahay dad tababar ku filan wata oo maamula warshadaynta dalka, waxayna ku tala jirtaa Wasaaraddu in la kordhiyo dugsiyada Farsamada.



Kacaanku wuxuu iyana dadaal ku filan siiyey Tacliinta sare. 1973kii ayaa la sameeyey Wasaarad cusub oo u gaar ah Tacliinta Sare, maxaa yeelay waxa badanaysa ardayda ka soo baxaysay dugsiyada sare iyo kuwa Farsamada. Waxa kaloo la dhisay Machaddo sare.

Jaamacadda wadaniga ah oo ahayd intii kacaanka ka horraysay magac uun hadda waxay noqotay mid u qalanta magacaas. Waxa la dhamays tiray kuliyadihii dhaqaalaha iyo sharciga waxa kaloo lagu biiriyey shan kuliyadood oo cusub oo kala ah Sayniska, Beeraha iyo Waxbarashada, Daawada iyo Xoolaha, halkaas waxa inooga muuqda sida Wasaaraddu ugu dadaalayso aqoonta cilmiga.

Waxa la filayaa in Jaamacadda wadaniga ah ee Soomaaliyeed kaalin weyn ka cayaarto horumarinta dalka qorshaha 1974-1978ka. Halkaasoo ay soo saarayso xoog ay tacliintisu sarrayso ha noqoto waxbarashada guud ahaaneed ama ta meheradaha iyo Farsamada taasoo waxtar u yeelanaysa horumarinta dalka dhinacyada bulshada, dhaqanka iyo dhaqaalahaba.

### Al-Kashaafa

**Ciidamada Qalabka sida ee Soomaaliyeed — waxay ilaalinayaan kacaanka dadka Gafuurkana waxay jabinayaan cadaw kasta.**

Ciidamada Soomaaliyeed ee qalabka sidaa waxay ka koobsn yihiin: Ciidanka wadaniga ah, ciidanka boliiska iyo ciidanka Asluubta.

Ciidanka Soomaaliyeed wuxuu abuurmay 12kii bishii Abriil 1960kii si uu u ilaaliyo madaxbanaanida dalka ugana jiro weerar dibadeed, inuu difaaco qaranimada wadaniga ah adkaynta qaranimada iyo midnimada carrada Soomaaliyeed, iyo inuu u soo jeedo xoriyadda shacbiga iyo danihiisa.

Intii ka horraysay gobanimada may abuurin Talyaanigu ciidamo Soomaaliyeed, iyagoo ka cabsi qabay wadanimadii

ku baahday shacbiga Soomaaliyeed markaas. Waxa ay haysteen cuntubyo ciidanka qalabka sida oo ah Talyaani aan cidi tarixin. Ciidamada Booliska iyagu waxay ka koobnaayeen Soomaali, hase yeeshee waxa madax u ahaa saraakiil Talyaani ah.

Waqooyiga dalka Soomaaliya oo u gumaysan jiray Ingiriisku waxa uu ka sameeyey maamulka gumaysigu cuntubyo ciidamo Soomaaliyeed ah oo ay saraakiil Ingiriis ihi u taliyaan, cuntubyadaasi tabar fiican bay wateen waanay yiqiineen hoggaamiska Soomaalida. Waxay haysteen xooggaa «Dabaabado ah iyo hub dagaal oo kale» waxaana loo sameeyey inay ilaaliyaan maamulka Ingiriiska ee dalka jira. Ciidamada Soomaaliyeed dhismahoodu wuxuu soo maray marxalado dhawr ah waxaana lagala kulmay dhibaatooyin aan yarayn, isagoo ka hadlaaya arrintaas wuxuu yiri Jaalle Siyaad «Waxaa dhigay aasaaskii ciidanka Soomaaliyeed 24 sarkaal oo Soomaali ah waxaanay ahayd ama ka mid ahaa dhibaatooyinkii aannu la kulanay kolkaas sidii loo midayn lahaa habka tababarka iyo Waxbarashada manay ahayn arrin fudud si loo abuuro ciidan wadani ah oo xoog weyn oo difaaca dalka markay arrintu xumaato, kana hortaga dhibaatooyin faraha badan ee hortaagan dalka iyo inuu ka qayb galo xallidda mashaakilka dhibaatooyinkaaso maxaa yeelay Tacliintayada heerkeedu wuu hooseeyey, awoodayada dhaqaalena ma abuurnayn.

Markii ay abuuran tahay Jamhuuriyadda Soomaalidu oo ka koobnayd laba qaybood oo ka mid ah dhulka Soomaaliyeed ee balaadhan, iyadoo saddex qaybood ay wali ku jiraan gumaysiga hoostiisa una dagaallamayaan xorriyaddooda iyo inay ku soo biiraan dalkooda hooyo ayaa la garan karaa in is-afgaranwaaga xagga soohdimaha uu qaadanayo qaab cusub marka aynu eegno Afrikada bari, maxaa yeelay is-afgaranwaagu kama taagna meela istaraatiiji ah oo keliya ama garoocο yar oo dhul ah ee waxuu ka taagan yahay dhul aad u ballaaran oo Soomaaliyeed ay dawladdo Afrikaan ihi doonayaan inay liqaan.

Mana aha is-afgaranwaagu dawladahaas oo doonaya inay qaataan dhul Soomaaliyeed oo ballaaran ee waxay rumaysan yihiin caqliyaddii hore ee duullimaadkii diiniga ahaa ee Afrika. Caqliyaddaas oo u arkaysa dawlad Soomaaliyeed oo ka dhalata Afrikada bari, inay halis ku tahay meelaha u dhaw. Si looga hortago dhibaatadaa iyada ah ayey dadka Soomaaliyeed isu qoreen askarinimada iyagoo xamaasadaysan, shacbiga Soomaalidu si la yaab leh ayuu ugu xiraa noloshiisa nolosha ciidamadiisa.



Xukuumadihii ka talin jirey dalka Soomaalida ka dib markii ay xoroobeen labada gobol way fahamsanaayeen arrintaas waanay u dadali jireen ciidamada. Markii uu curtay kacaanku 21kii Oktoober dadaal gaar ah ayuu siiyey ciidammada, sidaa darteed ayaa loo abuuray Soomaaliya ciidan xoog leh oo ilaalin kara soohdinta dalka fuqana jabinaya nacab kasta.

Ciidanka Soomaalidu hadda oo ay ka soo wareegtay 14 sano dhismihiisii aad ayuu uga dhisan yahay xagga Makaanikiyada tababar wanaagsanna wuxuu ku haystaa xeeladaha dagaalka ee xagga bariga, badda iyo cirka, heeganna wuxuu u yahay inuu ka hortago duullimaad kasta oo kaga yimaadda dibadda. Hase yeeshee uma tallaabayo xuduudka inta ka shisaysa, maxaa yeelay shacbiga Soomaaliyeed oo kaliya ayaa meel marin kara aayihiisa danbe, sida ay ina tusayso waaya-aragnimadiisu.

Kuma koobna muhiimada Ciidamada wadaniga ah ee Soomaaliyeed difaaca dalka iyo ilaalinta madaxbannaanidiisa oo keliya ee wuxuu qayb ka qaataa horumarinta dhaqaalaha dalka dedejinta dhismihiisa iyo adkaynta nidaamka Hantiwadaagga ah. Waxa jira iyakuna ciidamada Booliiska oo ka mas'uul ah ilaalinta qaanuunka iyo nabadgelyada dalka gudihiisa, mana jiro Booliis kaga horreeya xagga tabarada ku saabsan ka hortagidda danbiyada iyo soo saaridoodda. Taliska ciidamadaasi waxa weeye magaalada Muqdisho. Taliyuhuna wuxuu ka bixiyaa awaamiirta taliyayaasha saldhigyada iyo gobolada ku baahsan dalka oo dhan, waxaa la abuuray saldhigyo iyo rugo raacsan ciidamadaas, waxaana jira Reedhiyow layskala hadlo 48ka saldhig ee dalka ku yaalla, taasoo ku siman tuulooyinka aad u durugsan. Waxa jirta qayb ka mid ah oo raacsan ciidamada nabad sugidda iyo

qaybta danbiyada baarta oo ah lafdhabarta ciidanka Booliiska Soomaaliyeed iyo xubinta uu ku dhaato.

Ciidamadaasi waxay ku shaqeeyaan hab aad u horreeya waxaanay haysataa qalabka loo kaashado danbiyada, xaruntooduna waa Muqdisho.

Ciidamada Booliisku waxay leeyihiin qayb u qaabilsan dayuuradaha waxaanay haystaan dayuurado cusub oo kuwa fudud ah iyo kuwo waaweyn si loo gaadhsiiyo ciidamadaa meel kastoo dalka ka mid ah, uguna gaadhaan muddo daqiiqado ah, waxa kaloo loogu gargaaraa dadka xanuunsanaya iyo kuwa dhaawaca ah si loo qabadsiiyo gobollada ama xarunta cusbataalada.

Xubinta gaadiidka ee ciidanka Booliiska waxay leedahay baabuuro fara badan ay madax ka yihiin hawlwadeenno si fiican loo tababaray, waxaanay wataan baabuurro cusub oo loo yaqaan (888). Waxay ku wareegaan magaalada xarunta ah waxaana loo soo diraa kaalmada laga rabo Booliiska.

Iyaguna waxa jira dalka Soomaaliya oo aan ahayn ciidamada xoogga dalka iyo kuwa Booliiska oo ah Ciidanka Asluubta kana mas'uul ah ilaalinta xabsiyada iyo dadka ku jira waxaana ka mid ah wajibaadkiisa hanuuninta dadka maxaabiista ah iyo xirfooyin ka dhigaysa dad fiican oo wadaniyiin ah inta ka hartay noloshooda.

Ruuxa doonaya inuu ku taxmo qayb ka mid ah ciidamada qalabka sida ee Soomaaliyeed (Xoogga Dalka, ciidanka Booliiska iyo ka Asluubta) waa inuu da'diisu u dhaxaysaa 17 — 25, ooyna ka muuqato xamaasad dhallinyaranimo, dad la socodkiisuna uu fiican yahay, waana inuu aad u adadagyahay. Marka la ogolaado waxa la siiyaa lix bilood oo tabar ah oo ay maamulaan hay'adaha kala gedisan ee dalka.



**Soomaalia Waxay Noqonaysaa Dal Dalxiis Ku Habboon Ku Hodan, Kaymihiisu Fiican Yihiin Xoolo U Gaar Ahna Laga Heli Karo.**

Dalxiisnimadu waa mid ay daneeyaan dadyowga iyo dawladuhuba waqtigan oo aan ku koobnayn dabaq wax haysata. Dawladaha badankooduna waxay aad uga shaqeeyaan sidii loo baabiin lahaa waxyaalaha dhibaatada u keenaya qofka dalxiisyahanka ah, lacag badan waxay ugu tala gashaa in wax lagaga qabto mashaariicda dalxiisnimada, weliba dalxiiska waxa laga helaa lacagta adag waana waxyaalaha qaybta ka qaata horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada iyadoo saamaynaysa dhaqanka iyo barbaarinta xoojinaysana isafgaradka dadyowga. Mar haddii ay Soomaaliya tahay meel dabeeca wanaagsan leh, meel degaankeeduna fiican yahay hawadeedu macaan tahay, kaymuhuna boqolkiiba toban 10% dhulkeeda ku daaban yihiin (678.000 Km). Iyo hodantinimo xoola kala gedisan oo u gaar ah iyo waxyaalaha taariikhiga ah oo ku tusinaya ilbaxnimada dalka hidde iyo dhaqan an wax loo dhigaa jirin ayey lama huraan ku noqotay kacaanka Oktoober oo mas'uuliyad weyn iska saaraya dhaqaalaha wadaniga ah ee dalka Soomaalida inuu aad ugu dadaalo horumarinta dalxiiska oo la soo nooleeyo iyadoo ka mid ah meelaha dhaqaaluhu ka hinqado.

Sidaa darteed ayaa xukuumadda kacaanku u dejisay sharciyo tallaabooyina u qaadday sidii loogu samayn lahaa dalxiisyahanada waxyaala ay u baahan yihiin, Soomaaliyana u noqon lahayd belad dalxiis.

**Waxaa jira xeer lagu ilaalinayo dhirta iyo ugaarta**

Dalka Soomaaliya oo ku yaalla xeebta Afrika ee diiran hodanna ku ah ugaar u gaar ah oo kala jaadjaad ah, kaymo waaweyn oo dhulka qurux siiya arrimahaa dabiiciga ah ayaa saldhig adag u ah dalxiisaynta oo waxtar u leh dhaqaalaha dalka. Qawaaniinta ay dawladdu soo saartay sidii hore loogu marin lahaa horumarinta dalxiiska waxa ka mid ah mid soo baxay 1960kii oo faraya in la dhawro dhirta iyo ugaadha.

1970kii waxa soo baxay qaanuun wax ka badalaya kaa

hore oo oranaya waa in la qaadaa tallaabo kasta oo waxtar u leh hay'adaha maamulka kaymaha si ay u gudato waajibkeeda, waxaanu xaaraantinimaynayaa dhoofinta dhuxusha dhirta taas oo dhalisay in dhir badan la gooyo xukuumadihii kacaanka ka horreeeyeyna aanay xil iska saarin.

Dalka Soomaaliya wuxuu leeyahay xeebaha Afrikaanka ta ugu dheer taasoo ku gawdiida badweynta Hindiya iyo Gacanka Cadmeed dherarkeeduna yahay 3200 Km, waxayna ku dhacdaa meel istiraatiijiya.

Xukuumadda Soomaalida guulo ayey ka soo hoysay dhinaca dalxiiska ay ka mid tahay Wakaalad loo abuuray dalxiiska taasoo ka mid ah qorshaha mudada gaaban ee 1968 — 1970ka.

Qorshahaasi waxa ay tahay ujeedadiisu in la abaabulo oo la dhiirigeliyo dalxiiska iyadoo laga faa'iidaysanayo horumarka tiknoolajiyada ee dhinacaas waxa la sameeyey hodheella waaweyn, meelo loo hoydo, rugo ugaadhis, meelo laga kalluumaysto waxa hore loo mariyey ciyaaraha Hiddaha iyo Dhaqanka iyo wixii la mid ah ee lagu maaweeliyo dadka booqashada u imanaya Soomaaliya.

Qorshaha horumarinta dhaqaalaha 1971 — 1973ka waxay culays saartay sidii loogu suura gelin lahaa inay fuliso mashaariic xagga dalxiiska ah oo ay ka mid yihiin dhismaha Hudheelka Jubba oo ku kacay 13 malyuun oo shilin meelo lagu dabaasho baarar wax laga cuno cawasyada lagu tunto, taallooyinka, masaajidyo iyo waxyaala fara badan oo la mid ah in tababaro dadka ka shaqeeya hudheelada si loo helo dadkii maamulihii hudheelada heerka 1aad ah ee u sarreeya.

**Ugaadhu waa Fan, wax lagu madadaasho, iyo wax la jeclaysto.**

Inkastoo aanay jirin istaatiko sheegaysa tirada ugaarta dad ogolka ah iyo ta dibad jooga ah ee dalka, hase yeeshee waxa ogsoon yahay inuu yahay dalka Soomaaliya meesha ugu ugaadhlaha badan adduunka, taasoo ka dhigaysa inuu noqdo wadan dalxiis loo aado. Waxa ka mid ah ugaadha ku badan rugaha caamka ah iyo meelaha lagu ugaarsado Maroodiga, Wiyisha, Libaaxyada, Jamuuska, Dameer dibadeedka, Harima cadka oo dhawr nooc ah iyo jaadad kale oo ugaar kala duwan ah, waxa kale oo ku badan dalka Soomaalida lo' dibadeed iyo deerooyin aan laga helin Afrikada inteeda kale. Marka laga eego saddexda meelood ee ugaarsiga oo kala ah:-

1. Koonfur galbeedda Kismaayo, Woqooyiga Hargeysa, iyo Jasiiradda u dhaw Muqdisho. Sharciga cusub ee ugaarsigu wuxuu qorayaa sida soo socota:-

1. Meelo la xaaraantimeeyey in laga ugaarsado oo ah bananka Laak, Gudka, Daablay, Muqdisho iyo Mandheera.

2. Meelo lagu ugaarsado mararka qaarkood, waxaana ka mid ah Boorama, Booshboosh, iyo woqooyiga webiga Jubba.

3. Meelo aanay wada reebanayn ka ugaarsigoodu, waxaana ka mid ah Jawhar, Baladweyne, iyo Buulaburde.

Waa la hagaajiyey jidadka loo maro meelaha lagu ugaarsado ee soo socda:-

Jidka Laagbadane, Gudka, Daabley, waxa kaloo la hagaajiyey oo la dhisay waddooyinka Roobi, Booshboosh iyo Laaga badane, waxana loo sameeyey meelo ay dayuuradaha fududi soo fariisan karaan, xukuumaduna waxay diyaargaraysay dabargonaanta ugaarta.

## XAFIISKA GANACSIGA, SANCADA, HAWLGACMEEDKA IYO BEERAHA EE JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA.

**Xafiiska ganacsiyeedka Soomaaliyeed wuxuu leeyahay taariikh dheer kacaankii 1969kii ee caweysnaa hortiis waxa maamuli jiray ganacsato Soomaaliyeed, hase yeeshee mudadaa ka dib wuxuu noqday rasmi waxaana looga dhiga Agaasime guud Jaalle Cabdilqaadir Maxamed Maxamuud. Sannadkii 1971kii ayuu kacaanku u sameeyey xeer lagu maamulo. Waxaa uu qorayaa xeerkaasi in la**

**dhiirigeliyo dhaqdhaqaaqa ganacsi ee Soomaalida dhexdeeda iyo ganacsiga aynu la leenahay dalalka dibadda gaar ahaan dawladaha Carbeed ee aynun walaalaha nahay iyo dawladaha Afrikaanka ah ee ay inaga dhexeeyo xiriir ganacsi.**

Hawlaha ugu waaweyn ee Xafiiskaas waxa ka mid ah inuu abaabulo carwada Muqdisho ee dawliga ah oo ugu weyn Carwooyinka laga sameeyo Afrikada bari labadii sanana mar la sameeyo inta u dhexaysa 15 — 30ka Oktoober oo loo dabaaldegayo curashada kacaanka. Carwooyinkaas oo kale waxa la sameeyey 13 goor mar walbana waxa bata dalalka Carabta iyo Afrikaanka ka soo qayb galaya, sanadkana waxa ka qayb galaya dawladaha Suuriya, Ciraaq, Jamhuuriyadda Carabta Yaman, iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Yaman. Shaki la'aan carwadaasi waxay xoojinaysaa xiriirka ganacsiga ee Carabta.

Hawlaha waaweyn ee Xafiiskaasi waxa ka mid ah inuu abaabulo carwooyinka waaweyn ee dunida ee Soomaaliya ka qayb galayso taasoo aan jiri jirin kacaanka hortiis. Waxaynu ka qayb galay carwooyinkii dawliga ahaa ee lagu qabtay magaalooyinka Qaahira, Binsheekh, Baqdaad iyo Tiribuli, waxa kaloo aynu sanadkan ka qayb galaynaa markii ugu horraysay Carwada dawliga ah ee magaalada Aljeris. Arrintaasi waxay ku tusinaysaa siyaasadda kacaanku jideeyey ee ku saabsan inaan wax la qabsanno walaalaheena Carbeed taasoo dhalisay inay ku biirnay Jaamacadda Carabta bishii Febraayo 1974kii.

Xafiiskaasi hawlo kale ayuu qabtaa oo ay ka mid yihiin xoojinta xiriirka ganacsi ee Soomaaliya iyo dalalka dibadda isagoo la yeelanaya xiriir wanaagsan Xafiisyada caalamiga ah ee noocaas ah. Innagoo xiriir joogto ah oo ganacsi la leh dalka talyaaniga ayuu xoogoobayaa xiriirkeenna ganacsi ee innaga dhexeeya Xafiiska Ganacsiga ee Milaano sidaas oo kale ayuu u adkaanayaa xiriirkeena iyo ka xafiiska Midowga Soofiyeedka iyo Jarmalka Dimuqraadiga. Waxa kaloo annu rajaynaynaa inuu xoogoobo xiriirka Xafiiskan iyo Xafiisyada dalalka Carbeed gaar ahaan iyadoo uu xafiisku ka qayb galay shirkii xafiisyada ganacsiga Carabta ee lagu qabtay Tuunis iyo kii sanadkan lagu qabtay Bayruut guulna aan ka soo hoynay, waxana wadi doonaa siyaasaddaas si loo xoojiyo wax wada qabsiga ganacsiga iyo dhaqaalaha ee dalalka Carbeed.



Xafiisku laamuu ku leeyahay Gobollada kuwaas oo ah magaalooyinka Hargeysa, Berbera oo ah dekadda ugu weyn ee laga dhoofiyo xoolaha kuwaasoo loo dirayo dawladaha Suuudi Carabiya, Kuweyt iyo dalalka Gacanka Carbeed Kismaayo oo iyana ah dekadda laga dhoofiyo Muuska Soomaaliyeed oo hadda dawladaha Carbeed gaar ahaan Kuweyt, Baxrayn iyo Suuriya ay xiisa gaar ah u hayaan, ammaantiisuna ay haatan gaartay Eeraan iyo Turkiya, waxaanannu ku tala jirnaa inay korodho lacagta inaga soo galaysa Muuska.

Inkasta oo dalka Soomaaliyeed ku socdo mabda'a Hantiwadaagga kaasoo leh hey'aad rasmi ah oo u gaar ah ganacsiga iyo dhaqaalaha, hase yeeshee hay'aadka laftoodu xubin ayey ka yihiin Xafiiska sida ganacsatada kale ee Soomaaliyeed oo tiradoodu kor u dhaaftay 1500 magaalada Muqdisho oo kaliya ay xubno uga yihiin.

Shaki kuma jiro in wixii Soomaaliya ay dibadda u dhoofinaysaaba ay u baahan yihiin markhaati, kaasoo ka iman kara Xafiiska ganacsiga Soomaaliyeed. Marka uu qof ganacsatada Soomaaliyeed ka mid ihi doonayo inuu la ganacsado dawlad kale waxa loo baahan yahay in la baro dawladdaas, hawshaana waxa leh Xafiiska isagoo ka qaadaya lacag aan badnayn.

Xafiiskaasi lacagaha soo gala way kala gedisan yihiin, shirkadaha waaweyn, Bangiyada iyo hay'adaha Waaweyn eey hantidoodu ka badan tahay 300.000 oo shilin waxay bixiyaan 500 oo shilin sannadkiiba, halka uu qofka ganacsatada caadiga ahi ka bixiyo 20 shilin. Sidaa darteed lama socdo waxa soo galaya Xafiiska qaanuunkiisa iyo korosiimada sanadkii laga qaado shirkadaha waaweyn, Bangiyada iyo Hay'adaha.

Xafiisku wuxuu wax ka qabtaa is-afgaranwaaga ganacsiyeed isagoo kuwa gudaha u cuskada caadooyin, maxaa yeelay uddiga arrimahaas u qaybsan waa cusub tahay welina looma samaynin qaanuun ay ku shaqeeyaan. Kuwa dibaddase waxa loo saaraa waaya arag aqoon u leh silcadda uu soo iibsa-

day qofkaa ganacsatada ahi oo ka geddisan tii u doonayey markay u timaaddo, wuu soo eegaa kolkaa wuxuu ka soo qoraa ama ka keenaa warbixin, warbixintaas oo uu la socda ra'yiga Xafiiska ayaa loo diraa Xafiiska ganacsiga ee dalkaas. Hase yeeshee hadda waxaa la keenay xeerarka guud ee ku saabsan kala bixinta is-afgaran waagaas oo kale gudahana waxa laga dejinayaa mid Soomaaliya, kolka laysku darana waxa laga soo saarayaa qaanuun cusub.

Xafiisku sida ka muuqata magaciisaba wuxuu isku taxalujiyaa arrimaha sancada xiriir wanaagsanna wuxuu la leeyahay Wasaaradda Warshadaha oo muhim ah hawsheeduna tahay dhiirigelinta sancada iyo habaynta Warshadaha iyadoo ku shaqaynaysa barnaamij gaar ah weliba waxay ku dadaalaysaa sancadaha fudud ee ay ka mid yihiin saabuunta, shaanboo, iyo alaabta dhulka lagu safeeyo. Ganacsatada Soomaaliyeed hore ayey ugu diri jireen waxyaalaha beeraha ka soo baxa iyo xoolaha hase yeeshee hantidooda waxay geliyaan mashaariic maaco ah iyagoo ka haysta dhiirigelin Wasaaradaha oo ku dadaalaysa sanca gacmeedka sida qoridda looxyada, caagagga, iyo hagaajinta Hargaha, kuwaasoo lagu jeclaystay carwooyinka faraha badnaa ee ay Soomaaliya ka qayb gashay.

Dhinaca beeraha xiriirka wanaagsan ayaa ka dhexeeya Xafiiska iyo Wasaaradda Beeraha, xafiiskuna wuxuu aad ugu dadaalaa iskaashatooyinka gaar ahaan Shirkadaha Iskaashiga oo ku batay dalkeenna intii kacaanku dhashayba, oo qayb weyn ka qaadata horumarinta beeraha iyo kaalmaynta beeralayda aan heli karaynin makiinado iyo khibrad ay ku hagaajiyaan Beerahooda. Xafiisku wuxuu isku taxalujiyaa markaasi sidii uu ku soo heli lahaa saylado laga soo qaato alaabta beeraha kadibna waxa loo qaybiyaa Shirkadaha, waxa kale oo ay isku hawlaan sidii uu saylado ugu dooni lahaa waxyaabaa Beeraha Soomaaliyeed ka soo baxa.

Xiriirka Xafiiska iyo Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed aad buu isna u wanaagsan yahay waxaanay iska kaashadaan sidii wax looga qaban lahaa dhibaatooyinka dhaqaalaha gaar ahaan sidii lacag loo amaahin lahaa ganacsatada Soomaaliyeed sidii ay u dhisan lahaayeen Shirkad wada jir ah oo shisheeye la wadaago, qaanuunka Shirkadaha la



wadaagaana wuxuu qorayaa in hantida Shirkadaha 51 % ay Soomaalidu leedahay. Qaanuunkaas waxaan lagu dhaqayn maalqabeenada Carbeed oo iyagu gaashan kara hantidooda dalka, Soomaaliyana waxa ay ka hodan tahay xoolaha, dhulka beera qodatinka ah iyo dadka hawsha qabanaya. Haddii markaa maalqabeenadaasi hantidooda gashadaa waxa hubanti ah inuu dhalanayo iskab dhaqaale Carbeed.

«Al-Masaarif»

**Jaalle Siyaad oo la hadlaya Mustafaa Al-jundi**

Marka uu ka hadlayo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre arrimaha dalkiisa wuu maaxdaa, kolkaas si ballaadhan ayuu u faahfaahiyaa arrimahaas isagoo sheegayo sida ay runtu tahay oo xamaasadaysan, sidaas ayaa dhacday markii uu Madaxweynuhu la hadlayey muddo afar saacadood ah wakiilla ka socday Wargeyska Al-Masaarif oo ka soo baxa magaalada Bayruut, intii aanu bilaabmin shirkii Madaxda Carbeed ee danbe.

Hadalkaa Madaxweynuhu waxa lagu timaami karaa dood ee muu ahayn hadal shir saxafiyeed. Madaxweynuhu wuxuu ka hadlay xiriirka Soomaaliyeed iyo Carabta, arrimaha Soomaalida kacaanka hortii iyo dabadii, hodantinimada dabiiciga ah ee ay la ciirayso Soomaaliya, waxaanu ugu baaqday dalalka Carabta inay kasoo qayb galaan sidii loo munaafacaadsan lahaa khayraadkaa.

Jaalle Siyaad wuxuu ka hadlay waxa dalkiisu ka qabo qadiyahada Carabta, waxaanu caddeeyey ujeeddooyinka kacaanka iyo abuuritaanka qofka Soomaaliyeed ee cusub.

**Annagu waannu naqaannaa Carabta iyaguse nama yaqaaniin:**

Madaxweynaha Soomaaliya wuxuu yiri: «Ma jirin xiriir naga dhexeeya annaga iyo Carabta waqtigii hore, waa laga yaabaa inay taasi ka dhalatay kala fogida degaanka, waxaana

jirta in markii gumeysigu yimid dalkayaga uu ku dadaalay inuu naga fogeeyo dunida Carabta, sidaas awgeed baanay Carabtu aqoon ugu lahayn Soomaalida, Soomaaliduse way yaqiineen wadannada Carabta, maxaa yeelay way u cilmi doonan jireen, ama u shaqa tegi jireen waanay la ganacsan jireen.

Xirirkayaga ganacsigu wuxuu u badnaa Yamaniyiinta kuwa badan oo iyaga ka mid ihina waxay ku nool yihiin dalkayaga waxana loola dhaqmaa sida Soomaalida.

Hase yeeshee namay barin walaalahayaga Yamanta ahi Carabta kale oo nagamay gaarsiin fikrad toosan. Waxaa imaatinkiinna Soomaaliya uu bilaw u yahay xiriir annaga iyo dunida Carabta dhex mara waaannu ku faraxsanahay maxaa yeelay waxaad arkaysaan dadka Soomaaliyeed iyo dalka, kolkaasaa ummadda Carbeed ka siinaysaan fikrad qumman, waxannu ku kalsoonahay inaa iskaya baridoontaan idinkoo isticmaalaya saxaafadda iyo qalabka faafinta.

**Soomaaliyada Cusub**

Isagoo ka hadlaya arrimaha Soomaalida wuxuu yiri Madaxweynhu: «Ciidamadayadu kamay iman dabaqadaha saree waxay ka tirsan yihiin dadweynaha markii la abuurayna waxa laga soo ururiyey gobollada, mar haddii aanay mushahaarada ay qaadanayaan badnayna si yar ayey dabaqadaha sare uga soo qayb galeen carruurtoodu, manay jeclayn gelitaanka Milateriga waxaanay u badnaayeen dabaqadaha hooseeya iyo dhallintii xammaasaddu wadday.

Anigu waxan ka mid ahaa nimankii sameeyey Milatariga Soomaaliyeed, waxayna daafacayaan xoriyadda wadanka shacbiga iyo danta guud, mar haddii loo abuuray ciidamada lama huraan ayey ahayd waafaqsanaanta tababaradiisa iyo hanuunistiisa siyaasadeedba middaas, inkastoo hantigoosad xukumayey dalka, waxanu ku magacaabi jirnay «Dhisidda Maskaxda» inkastoo ay ka balaarnayd. Siyaasiyiinta markaa dalka xukumayey may lahayn falsafad siyaasi ah oo cad manay jirin runtii hab siyaasi ah dalka, maxaa yeelay waxa lagu xukumi jiray siyaasad qabyaalad ku dhisan, taasoo dhalisey tafaraaruq iyo jaha wareer, qas sidil iyo wax la mid ah.



Annaguna waxaanu ka fogayn jirnay ciidamada siyaasadda, waxaa caddayd inaan mugdi ku jirnay hase yeeshee askarta waanu ka fogaynay waxyaalahaas foosha xun, waxaanu xojin jirnay wadaniyadooda si aanay u saamaynin arrimahaasi isla markaas umaanaan ogalaan jirin in lagu cadibo ciidamada dadka ama loo isticmaalo kadeedka dadka, markii arrintii meel cidhiidhyoon gashay ayaannu ka aamusi kari weynay, markii hore waa la talinay mas'uuliyiintii mana jirin Xisbi siyaasi ah oo leh awood iyo garasho uu wax ku bedelo. Kacaanku wuu ogaa dhibaatooyinka ka hor imanaya. Waxa jiray qas, qabyaalad iyo gumaysiga cusub, qoomiyadda Soomaaliyeedna liciif bay ahayd, gaar ahaan dadka deggan magaalooyinka oo dantooduun daba roorayey, sidaa darteed ayuu ogaa kacaanku inaanu ogolayn Isticmaarka caalamiga ahi kacaan bedela dhibaatada ka taagan dalka oo ka hor taga siyaasaddiisa ku saabsan Soomaaliya.

Waxa kale oo uu ogaa kacaanku inay ko hor imanayaan dhibaatooyinka, jahliga, cudurka, saboolinimada, harraadka kulligoodbana waa naga hor yimaaddeen waanad la socotaan. Hase yeeshee waanu fulinay xalkii aanu ugu tala galay inaanu ku abuurnay dadweynaha kalsooni horumarinta mafaahiimta insaaniga ah la dagaalanka qaybyaaladda, dhaqan gelinta dimuqraadiyadda, soo celinta xoolihii la dhacay, joojinta laaluushka iyo in la helo waxyaalaha aasaaska dhaqaalaha u ah, waxbarashada, caafimaadka iyo wixii la mid ah.

Run ahaantii shantii sanadood ee ina soo dhaaftay waxaa guulihii u waaweynaa laga gaaray dhinacaas waxannu ku dadaalay dhismaha meelaha caamka ah jidadka, dekadaha, dugsiyada, cusbataalada, waxannu dhiirigelinay wax soo saaridda waxaanu u qaybinay si cadaalad ah iyo lacag jaban, waxaannu ku iibsanay waxay soo saarayeen dadku qiimo dhiirigelin ah dadweynaha waxaanu ku siinay macaash la'aan. Kacaanku wuxuu ku dadaalayey horumarinta waxaanu dhiirigelinay beeralayda annagoo kaga iibsanayna waxay soo saaraan lacag badan, waxaa la abuuray mashaariicda cuntada degdegga ah, dhiirigelinay Iskaashatooyinka beeraleyda ah u fidinay amaah, alaabta barwaaqaynta beeraha iyo qalabka kale ee beeraha.

Dhinaca xoolaha waxa lagu dadaalay in la helo meelihii xooluhu daaqi lahaayeen dawadoodii, biyahooda iyo wixii la mid ah.

Xagga khayraadka dabiiciga ah waxa loo abuuray Wasaarad hawsheedu tahay inay u diyaariso Soomaalida hawlaha sahamiska dhulka gudihiisa, sahamiska Macdanta iyadoo la kaashanaysa Shirkadaha shisheeyaha, waxaana laga gaaray natiijooyin ah inuu ku jiro dhulka macaadinta Yuraaniyom. Naxaas, Rasaas, Sink, Dhagaxa qaaliga ah, Garaaneet, Qistiir iyo dhagax baruureed iyo weliba batrool.

**Kaalinta Hantida Carabta ee Horumarinta Soomaaliya**

Isagoo ka jawabaya Madaxweynuhu su'aal Wargeysku u jeediyey wuxuu yiri:

— Dawladaha Carbeed door weyn oo ku saabsan bulshada dhaqaalaha iyo siyaasadda ayey ka ciyaari karaan Afrika.
— Dan guud ahaaneed ayaa ku jirta gelinta hantida Carabta dalka Soomaalida.

— Waxa la gudboon Carabta inay waaya aragnimo xoog leh u yeeshaan dhaqaalaha iyo siyaasadaba

— Waxaanu rumaysannayhay iskaashiga Carabta iyo Yurub ee ku dhisan sinnaanta.

In muddo ahba xiriir ayaanu la lahayn dalalka Carbeed ee xoolahooda dhigta Bangiyada shisheeyaha, kuwaasoo lagula dagaalamo danahooda, ujeeddadayaduna waxay ahayd inaanu ka dhaadhicino dhanta guud ahaan ee ka dhalanaysa inay hantidooda galiyaan dhulkayaga ama ay na amaahiyaan, si aanu annagu ugu shaqayno kadibna aanu ugu celino iyadoo macaash wadata.

Had iyo jeer xiriir ayaanu la yeelanaa dadka ka mas'uulka ah sanduuqyada Carbeed iyo Islmaaka ee horumarinta, nasiib darro way na warwareejiyeen ilaa ay hadda nala tahay inay amaahda ku bixiyaan shuruud aan la qaadan karin. Marar



badan ayaanu xiriir la yeelanay mu'asasaadkaas doco badan oo iskaashiyeedna waan tusaalaynay, waxaanu weydiisanay amaah aanu faa'iidadeeda ku bixinno 9 %, amaahdaas waxanu ku soo iibsan lahayn alaabta barwaaqaynta iyo qalabka beeraha, waxa kale oo aannu ku talinay in la sameeyo Shirkado Iskaashi oo lagu sameeyo lacag ka dhaxaysa Soomaaliya iyo Carabta, inaanu siino dhul ay hantidooda galiyaan, arrimahaasoo dhamina weli waa laga fiirsanayaa.

Inkastoo arrimahaasi jiraan ma diidanin in dalalka Carbeed qaarkood na kaalmeeyaan, sida dawlada Sucuudiga, Abuudabay iyo Suuriya. Ciraaqna waxay ku ballan qaadday inay dhisto meel lagu sifeeyo batroolka si aannu u hello batroolkii aannu uga baahnayn gudaha, haddii wax dheeraadaana aannu u iib geyno dawladaha aannu deriska nahay.

**Hal ku dhagga Kacaanku waa Iskaa wax-u-qabso**

Madaxweynaha Soomaaliyeed wuxuu yiri: «Hal ku dhagga kacaanku waa iskaa wa u qabso waxana nala gudboon inaan hello macallimiin iyo dugsiyo nagu filan, sannadka soo socdana waxanu ka kaaftoomaynaa macallimiinta shisheeyaha ee wax ka dhiga dugsiyada Dhexe, hadda waxa nala jooga 15 macallin ku dhawaad wax ka dhiga Jaamicadaha iyo Masaari wax ka dhiga dugsiyada sare.

Dhinaca arrimaha dadweynaha waxaanu ku talo jirnaa inaanu abuuro Xisbi dadweyne waxanu samaynay Xafiis siyaasi ah oo raacsan golaha kacaanka wakiilana wuxuu ku leeyahay magaalooyinka iyo tuulooyinka, xafiiskaas oo kale waxa laga furay Wasaaradaha oo idil iyo meeshii shaqo ka socoto oo dhan. Waxa la gudboon wakiiladaas inay faafiyaan garashada siyaasadeed taasoo adkaysay xiriirka u dhexeeya xafiiska iyo ururada dhallinta iyo dumarka, habkaas ayaan u gaarnay dabaqaadka shacbiga oo idil, kacaanka hortiisna asxaabtii jirtay waxay abuuri jireen shacbiga ooy kala eryaan taasoo dhalisay in la necbaado Xisbiyadaas sidaa darteed lama huraan bay ahayd in la abuuro fikrad kacaaneed si looga hor tago dadka aan rumaynayn hanuuninta siyaasadeed.

**Shacbiga Soomaaliyeed wuxuu rumaysan yahay inuu asalkiisu Carab yahay xiriirka aannu la leenahay dalalka Carbeedna aad buu u xooggan yahay qotadiisuna way dheertahay.**

**Biiritaanka Soomaaliya ee Jaamacadda Carabtana waa arrin guud.**

Madaxweynaha oo ka hadlaya mawqifka Soomaaliyeed ee Qadiyada Carbeed wuxuu yiri: «Carabta waxa la gudboon inay aad ula socdaan oo tixgeliyaan arrimaha dhaqaalaha iyo siyaasadda, waxaana lama huraan ah inay wada jir ku shaqeeyaan oo ay ka reebtoonaadaan is af garan waaga, waxannu rumaysanahay in dawlad waliba oo Carbeedba tixgeliso ta kale arrimaheeda gudahana aan la faragelin iyo ururadeeda ijtimaaciga ah.

Yurub waxay doonaysaa inay hagaajiso xiriirka ay la leedahay Carabta, annaguna waxanu taageeraynaa iskaashiga Carabta iyo Yurub oo ku dhisan sinnaan. Sida ay Yurub u-gu baahan tahay alaabta ceedhiin ee Carbeed ayey Carabtuna ugu baahantahay waaya aragnimada iyo tiknoolajiyada Yurub.

Waxa kaloo aannu rumaysanahay baahida loo qabo iskaashiga Carabta iyo Afrikaanka iyo taageeridda qadiyadahooda waxa la oran karaa dawladaha Carbeed kaalin weyn ayey ka ciyaari karaan arrimaha bulshada dhaqaalaha siyaasadda ee Afrika gaar ahaan kuwa soo koraya.

Shacbiga Soomaaliyeed wuxuu rumaysan yahay in asalkiisu taariikhiga ah uu Carab yahay xiriirka aan Carabta la leenahay waa mid xoog leh oo qoto dheer hadana sii adkaaday, sidaa darteed arrimaha siyaasadda dhaqaalaha iyo taariikhdu waxay caddeynayaan sida shacbiga Soomaaliyeed cad ugu leeyahay ummadda Carabta.

Biiritaanka Soomaalida ee Jaamacadda Carabtanu waxay tahay arrin guud, maxaa yeelay dhibaatooyin ka badan ee



Carabtu waa dhibaatooyinka Soomaalida awoodna waxay u leeyihiin inay ilaaliyaan nafahooda iyo dalkooda, waxaanu quuldaraynaynaa inay midoobaan Falastiiniyiintu maxaa yeelay go'aan laga gaari maayo xallinta dhibaatooyinka hadaanu ta falastiin horta la dhammayn Carabtuna waa inay halkaa ka dulaan.

**Soomaaliya way ka haqab tiri kartaa cuntada Carabta.**

Agagaarka magaalada Kismaayo oo ku taalla dhinaca xeebta koonfurta Soomaaliyeed ayey carruurtu ku heesayeen:

— Carabaanu ka soo jeednaa ilaa Xaawo iyo Aadan.

— Waannu ku faanaynaa Carabnimadayada iyo Islaamnimadayada

— Naftayada waanu u huraynaa.

Heestaas oo kale ayey qaadayeen caruurta Soomaaliyeed waxay muujinaysaa in Soomaaliya oo ku biirtay dhawaan Jaamacadda Carabta aanay ahay Carabnimadu wax u cusub, wararka qaarkoodna waxa ay ku nuuxnuuxsanayaan in Shacbiga Soomaaliyeed uu ahaa dadkii ugu horreeyey ee rumeeyey Islaamka waqtigii Cusmaan bin Cafaan.

Waa laga yaabaa in saddexdii toddobaad ee aannu joognay Soomaaliya aanay ku filayn inaan wax walba ogaanno, hase yeeshee waxay naga siisay fikrad hodantinimada balaadhan ee dalkaasi ka leeyahay dhinaca beeraha iyo Xoolaha **iyaga oon maanta ka cabsi qabin in ay waayaan waxay cunaan.** Dadka ku hadlaya iskabka dhaqaalaha dalalka Carabta waxa ay ogyihiin in haddii dalka Soomaaliya munaafacaadsado khayraadkiisa dabiiciga ah oo dhan uu ka haqabtirayo cuntada iyo xoolaha ummadda Carabtu ay u baahan tahay. Soomaaliduna waa u baahan tahay walaaleheeda Carbeed sida uu leeyahay Wasiirka Maaliyadda dalka Soomaaliyana waxay leeyihiin Milyaar Doolar si loo fuliyo qorshaha horumarinta ay doonayaan, muddo gaabanna ay ku siin karaan dalalka Carabta cunta ay u baahan yihiin.

Iyadoo ay tahay hantida dalka Soomaaliyeed la galinayaa

mid loogu adeegayo qowmiyadda iyo danaha guud ee Carbeed, adduunkuna uu maanta ka walaacsan yahay cunta xumida ayey Soomaaliya fursad u tahay dalalka Carabta si ay isku filaasho uga helaan xagga beeraha iyo xoolaha. Soomaaliyana way xallin kartaa dhibaatada sonkorta ka haysata Carabta iyo dunidaba, maxaa yeelay waxay samayn kartaa Soomaalidu warshado Sonkorta lagu sameeyo oo waaweyn oo ka dhigaysa Kuubada labaad ee soo saaridda sonkor fara badan. Degmada Jilib oo keliya waxa laga abuuri karaa 24.000 oo Hiktaar oo soo saaraysa sonkor qiimaheedu ka yar yahay in badan ta hadda la kala gato dunida Carabtana waxay ka baahi tiraysaa sonkortaas oo aan cabsi laga qabin.

Dadka ha hadlaya iskabka dhaqaalaha Carabta waxay ogyihiin in dalka Soomaaliya uu karayo haddii uu manaafacaadsado khayraadkiisa oo idil inuu ka saaro dalalka Carabta waxyaabaha beeraha kasoo baxa iyo xoolaha nool, sida ay Soomaaliya ay ugu baahan tahay walaalaheeda Carbeed ayey Carabtuna ugu baahantahay Soomaalida, dalka Soomaaliya wuxuu u baahan yahay si uu horumar u sameeyo lacag dhan milyaardi kadibna wuxuu siin karaa dalalka Carbeed cunto.

Marka laga hadlayo arrimaha hodantinimada ku saabsan ee xoolaha Soomaaliya waxay noqonaysaa mid lala yaabo markaad ogaatid in ay hadda dalka jiraan laba warshadood oo hilibka qasacadeeya, hase yeeshee maalqabeenka Carabtu waxay dhisi karaan warshado waaweyn oo hilibka qasacadeeya, kaasoo loo diri lahaa dalalka Carabta.

Dhinaca kalluunka haddii aynu eegno Soomaaliya waxay xallin kartaa dhibaatada ka haysata dalalka Carabta dhinacaas, waxaynu oran karnaa in dalka Soomaaliya oo dhererka xeebtiisu gaarayo 300.000 oo km, uu ka qayb gali karo dhismaha warshado waaweyn oo Carbeed laguna qasacadeeyo kalluunka.

Soomaaliya oo haysata 8 malyuun oo hektar oo beero qodad ah waxay u baahan tahay hanti la dhigto dalkaa meel weyn oo laga soo saaro cuntada beeraha oo kala duwan marka laga faa'iidaysto biyaha labada webi ee Shabeelle iyo Jubba oo loo sameeyo biyo xidheenno iyo mashruucyo waraabin oo waaweyn, kuwaasoo suura gelinaya inay bataan waxyaalaha laga soo saarayo dhulka beeraha.



Arrimahaas ayaa ugu waaweynaa kuwii aannu ka soo indha-indhaynay xagga dhaqaalaha oo si gaar ah annaga noo danaynaya kol haddaanu ka soconno Wargeys dhaqaale, hase yeeshee waxa jirta arrin kale oo muddadii saddexda bilood ahayd ee aanu socdaalka ku tagnay Soomaaliya na soo jiitay.

Waxa caddaan ah in shacbiga Soomaaliyeed oo idil uu hadda marayo marxalad kala guur ah oo taariikhi ah isagoo xamaasadaysan mayalkana uu u hayo hoggaan waddani ah oo kacaan ah oo ku dadaalaya horumarinta dalka muddo gaaban, taasoo ay gaareen guulo waaweyn oo siinaya tarjubadda Soomaalida ee cusub astaamo gaar ahaaneed.

Dhinaca abaabulka iyo isku dubbarididda Soomaaliyeed waa mid la yaab leh, magaalada xarunta ah ee Muqdisho waxa jira 14 urur oo ku kala firirsan 14ka degmo ee ay magaaladu ka kooban tahay, mid walba waxa uu ka mas'uul yahay inuu ka haqab tiro waxyaabaha ay degmadu u baahan tahay, taasoo ku dhisan iskaashi iyo wada shaqayn sidii nolosha dadka kor loogu soo qaadi lahaa. Soomaaliya hadda waxa ka socda olole cidhibtirayo aqoondarrida iyo baridda wax akhriska iyo wax qoridda dadka oo run ahaantii ah tajrubad aad u wanaagasan.

Xukuumaddu way joojisay duruustii dugsiyada sare ee magaalooyinka waaweyn, ardaydiina waxa lagu amray in ay u baxaan miyiga si ay u soo baraan xaasaska beeraleyda iyo dadka reer guuraaga ah ee ku nool meelahaas afka Soomaaliga, kaddib markii la qoray iyadoo awal lagu hadli jirey oo keliya.

Lama ilaawi karo arrintii aannu ku soo aragnay meel buuraley ah oo dalka Soomaaliya ka mid ah, halkaasoo goor habeennimo ah ay isugu yimaaddeen rag, dumar iyo carruur si ay u bartaan casharo af Soomaali ah oo ay gabari u dhi-

gaysay, taasoo ka timid magaalada si ay wax u barto walaa-laheed, ayna ka muuqanaysay farxadi, maxaa yeelay waxay ka qayb galaysaa la dagaallanka jahliga.

Haweeneyda Soomaaliyeed waxa ay ku leedahay muj-tamaca Soomaaliyeed kaalin muuqata iyadoo ka shaqaysa waxbarashada, warshadaha, beeraha, raacida xoolaha, urur-rada dadweynaha iyo ijtimaaciga ka qaadata kaalin weyn.

Madaxweynaha Soomaaliya wuxuu yiri: «Dalkani dib u noqon maayo, dhulkana waxanu ku beeraynaa awooddayada gaarka ah, waxaanuna sugaynaa oo aanu caddeynaynaa in-aanu hore u soconayno mustaqbalka, waxaana nala gudboon inaanu si hagar la'aan ah u shaqayno».

Run ahaantii hawlkarnimada waa arrimaha uu ku wa-reeraayo qofka Soomaaliya ku taga booqasho, bogagga soo socdana waxanu kaga hadli doonnaa guulihii laga gaaray iyo kuwa la tiigsanayo.

**5 malyuun oo dhulka beera qabatin ah ayaa sugaya hantigelin Carbeed.**

**Wasiirka Maaliyadda, Maxamed Yuusuf Weyrax oo uga warramaya Wargeyska Al-masaariif Hantigelinta dalka Soomaaliya.**

**Malyuun Doolaar ayaa ku filan horumarinta guud, taas oo u adeegaysa iskabka dhaqaalaha Carabta.**

Wasiirka Maaliyadda Soomaaliyeed wuxuu leeyahay ma-gacii la oran jirey Soomaaliya inay tahay xabaasha kaalmada shisheeyaha gaf ayuu ahaa, dadka qaarkii ayaa siyaasad ahaan ugaga faa'iideystay shacbiga Soomaaliyeed, isagoo ka hadlaya arrimaha dhaqaalaha Wasiirku wuxuu yiri:

«Dal kastaa wuu marayaa heerarkii ay soo martay Soo-maaliya, kaddib markii ay heshay madaxbannaanida siyaa-sadda iyadoo ka baaba'a xagga dhaqaalaha, maxaa yeelay gumeystayaashu waxay ogaayeen inaanay ku raagayn dalkaas sidaas darteed kamay dhisin warshado iyo mashaariicda kale ee loo baahnaa, waxaanu kaga tegey adeegayaal u qabbaana.



Adeegayaashaas xukunka dalka qabsaday, may lahayn qorshe dhaqaaleed oo lagu dhiso dalka, amarka waxay ka qaadan jireen dibedda. Kaalmada ay na siiyaan dalalka hore u maray waxay ahayd xoogaa haruur ah iyo lacag aan bad-nayn, taasna lama soo gaarsiin jirin dadweynaha ee iyaguun baa dhexda ka qaybsan jirey iyo hawlwadeennada la qaraa-ban jirey. Boqolkiiba siddeetan (80%) ayaa sidaas ku bixi jiray iyagoo wax ka siin jirey khubaradii shisheeye ee dalka joogay, sidaas ayuu ku soo baxay magacu, waxaana looga jeeday in lagu dumiyo niyadda dadka Soomaalida, laguna til-maamo ma shaqaystayaal dhulkooduna sabool yahay.

Markii aanu bilawnay qorshaha ee aanu furnay buugag-gii hore, waxanu ogaannay in boqollaal malyuun ay siiyeen dawladaha Maraykanka, Jarmalka iyo Talyaanigu, Soomaa-liya aanay soo gaarin dadka, hase yeeshee ay jid kale martay. Taas waxa inoo caddeynaysa markii Maraykanku goostay kaalmadii uu siin jirey Soomaaliya, 1970kii, maanaan daree-min dhibaatooyin, taasaana ku tusinaysa inaanay na soo gaari jirin kaalmadaasi.

**Horumarinta Dhaqaalaha Dalka Soomaaliyeed.**

Wasiirku wuxuu is baal dhigay arrimihii dhaqaalaha ee Kacaanka hortiis iyo hadda, waxaanu yiri: «Sannadkii 1965-kii waxa soo geli jirey dawladda laba boqol iyo laba iyo tod-dobaatan malyuun oo shilin (272 malyuun shilin), hase yee-shee 1974kii wuxuu gaaray (729 malyuun shilin). Lacagtay dawladdu kharajgaraysay isla sannadkaas waxay ahayd mal-yuun shilin, tiradaasina waxay kuu caddeynaysaa horumarka la sameeyey, waxaanuna ka baxnay dhibaatadii xagga miisaa-niyadda oo 1970kii ka hor laga kabi jirey dibedda. Kacaanka durbadiiba waxanu go'aan ku gaarnay in laga shaqeeyo ho-rumarinta Miisaaniyadda.

Soomaaliya waa dal hanti la gashan karo, dalalka Car-beedna waxay u baahan yihiin waxyaalaha laga soo saaro beeraha, xoolaha iyo kalluunka.

**Xeerkayagu wuu dhiirrigelinayaa, waanu habaynaynaa hantigelinta qidaaca khaaska ah.**

Waxanu bilawnay sahmis dhulka ah oo ku saabsan dhulka uu maro webiga Jubba si aanu u beerro sarreenka, tubaakada, bariiska iyo cudbiga, tobanka sannadood ee foodda inagu soo haya waxay noqon doontaa Soomaaliya dal hore uga mara xagga beeraha, hase yeeshee taasi waxay u baahan tahay xoolo, annaguna waxanu qiimaynaynaa iskabka dhaqaaleed ee dalalka Carabta, maxaa yeelay Soomaaliya waxay ka mid tahay dalalka Carabta, haddii adduunka Carabta ee dheeraadka ah la geliyo mashaariicda horumarinta dalka Soomaaliya ka socota, taasi waxay xaqiijinaysaa faa'iido ay helaan labada dhinacba.

Dawladdu hadda waxay kicinaysaa dadka sidii looga faa'iideysan lahaa khayraadka waddaniga ah, waxaanay dhisaysaa biyo xireenno.

**Dhibaatooyin ka hor imaan-mayaan hantigelinta Carbeed**

Wasiirku wuxuu sheegay in ay dalal Carbeed ka fulinayaan mashaariic horumarin ah dalka, hase yeeshee ay ka yar tahay mashaariicda dalku uga baahan yahay xagga beeraha iyo warshadaha ee kala geddisan.

Intaas wuxuu ku daray in Sanduuqa Horumarinta ee Kuweyt uu meel «Koronto» ka dhisaayo magaaladan Muqdisho, taasoo waxtar u yeelan doonta dhismaha warshadaha loo baahan yahay, waxaa kaloo uu sanduuqu caawinayaa horumarinta Warshadda Caagga ee Kismaayo, waxa kaloo iyana kaalmooyin na siiya dawladaha Sucuudi Caraabiya, Isutagga Imaaraadka Carabta iyo Ciraaq oo naga kaalmaynaysaa dhisma meel Batroolka lagu sifeeyo.

Dawladda Liibiyana waxaanu wada wadnaa mashaariic wadajir ah oo xagga gaadiidka, gegida dayuuradaha ee Kismaayana wax bay ka dhisaysaa.

Mashaariicdaa Carbeed shaki la'aan waxtar bay u leedahay horumarka dhaqaalaha Soomaaliyeed, hase yeeshee kabi mayso waxyaabaha badan ee aan uga baahan nahay.



Soomaaliya waxay u baahan tahay lacag aan ka yarayn hal Bilyan oo Doolaar, lacagtaas oo lagu kharaj garayn karo muddo ka yar 5 sano, waxay dhalin lahayd horumar dhab ah oo ay ka faa'iidaystaan Carabta iyo Soomaalida xoojiyana iskabka dhaqaalaha Carabta.

Aad ayaanu ugu faraxnay go'aankii Shirka Madaxweynayaasha Carabta ee ku saabsanaa iskaashiga dhaqaalaha ee Afirkaanka iyo Carabta in la xoojiyo, maxaa yeelay dalalkaasi waa la gashan karaa hantida.

Arrinta ku saabsan qidaaca khaaska ah wuxuu sheegay Wasiirku inay qawaaniintu habaynayso hantigelinta qidaacaas dhiirrigelinaysana ka qayb galka mashruucaas.

Mashruuc weyn oo ku saabsan beerida Cudbiga ayaa jira Balcad oo uu maro webiga Shabeelle, waxaana ka qayb galaya ganacsato Carab ah iyo kuwo Soomaaliyeed, mashruucyadaas oo kale waanu soo dhaweynaynaa sharciguna wuu ka dhaafayaa wixii cashuur ah, macaashka dibedda ayaa loo diran karaa.

Xiriirka Carabta iyo Soomaalidu aad buu u fiican yahay, hase yeeshee aqoonta laga haysto dibedda aad bay u yar tahay, sababtoo ah qalabka warfaafinta oo aan run ka sheegin, mustaqbalkase waxaan rajaynaynaa in ay isbeddalaan.

## GAADIIDKA

**Wasiirka Gaadiidka, Jaalle Gaashaanle Sare Muuse Rabiile oo ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka.**

**Jidad badan iyo Horumarinta Isgaarsiinta.**

Jaalle Rabiile wuxuu sheegay in dalku horumar ka gaaray xagga Isgaarsiinta muddadan danbe, maxaa yeelay isgaarsiintu waa halbawlaha nolosha dalka, lama huraanna waxa ah in lagu dadaalo marka la dejinayo qorshaha horumarinta guud. Isgaarsiintu aad bay u xumayd Kacaanka hortii, mana jirin qalabka lagu wada hadlaa, boosuhuna aad bay u liiteen, jidadka boor ayaa ka kacayey, lamana mari kari jirin, haddii roob da'o, jiilaalkiina gobollada qaar baa go'doon ku dhici jirey.

Sidaa darteed xukuumadda kacaanku 1971kii ayey u sameysay Wasaarad gaar ah, waxaana loogu tala galay barnaamijyo hore loogu marinayo oo la fuliyey. Waxa ugu weynaa mashruuca isgaarsiinta oo la bilaabay 1971kii Sayladda Reer Yurubna bixisay kharajkiisa oo lagu qiyaasay 41.25 malyuun Sh. So.

Jidadka qudhooda aad baa loogu dadaalay.

Magaalada Muqdisho haddii aynu soo qaadanno waxay ahayd cidhiidhi aan habaysnayn, xukuumadduna tallaabooyin ayey ka qaadday lagu hagaajinayo jidadka, waxana la sameeyey kuwo laysku waydaaran karo oo laba dhinac ah, jidad cusub ayaa laga saaray meelo laga dumiyey guryo si looga baxo dhibaatada xagga jidadka, waxay noqotay magaalo nadiif ah oo jidad waaweyni dhex marayaan.

Jidad kale ayaa iyaguna jira oo ku xiraya xarunta gobollada, gaar ahaan waxa la sameeyey jid weyn oo isku xira Xamar iyo Gobolka Jubbada Sare, waxa iyana jira jidad isku xiraya Xamar, Marka iyo Jubbada Hoose. Jidadkaasina waxay waxtar u yeelanayaan horumarinta dhaqaalaha gudaha ee dalka.

Waxa kale oo iyana laga dhisayaa magaaladan Muqdisho dekad dawli ah, magaalada Kismaayana waxa laga furay garoon ay fariistaan diyaaradaha dheereeya, mid kalana waxa la qorshaynayaa in laga dhiso magaalada Muqdisho, garoomadaas oo kale ayaa ku yaalla magaalooyinka Burco, Berbera, Hargeysa iyo Baydhaba waana la hagaajinayaa. Guud ahaan waxa la oran karaa dawladdu aad bay wax uga qabatay isgaarsiinta, sida meelaha kale.

## XOOLAHA NOOL

Xoolaha nool waxay ka mid yihiin meelaha ugu weyn dhaqaalaha dalka Soomaaliya 70% ayaa ku nool dadka lacagta dibeddana waxa ka soo gasha 65%, sidaa darteed ayaa aad loogu dadaalaa dhinacaas marka la dejinayo barnaamijka horumarinta. Qorshaha shanta sanana waxa loogu tala galay lacag dhan 162 malyuun oo shilin, hase yeeshee qidaaca



khaaska ah oo hadda gacanta aad loogu hayo ugu horreynta xoolaha ayaa loogu tala galay inuu lacag badan ku bixiyo horumarintiisa.

Qidaaca caamka ihise wuxuu fulinayaa 12 mashruuc oo ku saabsan wax soo saarku iyo sayladaynta iyo 18 mashruuc oo ku saabsan caafimaadka xoolaha.

## BEERAHA

Istiraatijiyada guud ee horumarinta Beeraha qorshaha shanta sano ee cusub waxay u dhisan tahay sida soo socota:

1. In isku fillaansho laga gaaro gallayda, masaggada, sisinta, khuradda, faakihaadka sannadka 1978ka.
2. Muddadaas waxa la kordhin doonaa soo saarka waxyaalaha beddalaya bariiska iyo sarrenka.
3. Waxa lagu dadaali doonaa dhismaha Iskaashatooyin beeralay ah oo lagu baahiyo dalka, fulinta mashruuca cuntada degdegga ah iyo beero dawladdu leedahay oo cusub.
4. Waxa la xoojin doonaa ilaalinta bulshada ee dhinaca wax soo saarka iyo qaybinta.
5. In la habeeyo oo laysku xiro waxyaalaha ganacsiga iyo barnaamijka wax soo saaridda beeraha iyo sancada.
6. Waxa la dhiirrigelinayaa mashaariicda beeraha iyo xoolaha nool ee miyiga.
7. Ku dadaalka baarista beeraha, siyaadaha iyo hay'adaha ku shaqa leh meelaha amaahda iyo siinta kaalmada lacagta iyo farsamada.
8. Manaafacaadsiga, waraabinta intii ay suuroobaysaba, si loo badiyo wax soo saarida, gaar ahaan kuwa aynu kaga kaaftoomayno waxa dibedda laga keeno, badinnana waxaynu dhoofinno.

....Si loo gaaro ujeeddooyinkaas waxa loogu tala galay hanti gelin qiimaheedu yahay 1245 milyan shilin, taasoo u dhiganta 30% lacagta qorshaha shanta sano.

## Kaymaha iyo Daaqa

Jidadka hadda ee isticmaalka dhulka Soomaalida halis weyn ayuu gelinayaa aayaha dalka, sababtoo ah isagoo wax-yeellaynaya dhirta iyo daaqa, taasi waxay dhalisay in gobolka Woqooyiga Soomaaliya uu hadda iska noqday lama-degaan oo kale isagoo waagii hore ahaa meel baad leh, xooluhuna ka buuxaan. Arrinta ugu weyn ee kacaanku ka qabtay waxa weeyaan isagoo ogaaday dhibaatada ka taagan maamulka dhirta iyo qiimaha barnaamijka soo noolaynta kaymaha iyo si wadajir ah inay arrintaa wax uga qabtaan xukuumadaha gobollada, Dawladda Hoose iyo shacbi-weynuhu. Ilaalinta ugaadhana waxa laga dhigay mas'uuliyad weyn oo dabada ka haysa sidii loogu ilaalin lahaa dhaqanka qaranka mustaqbalka soo socda. Barnaamijka horumarintu wuxuu xoojinayaa guulaha laga gaaray ilaalinta meelaha daaqa iyo in lagu celiyo dhulka sidiisii hore ee doogga iyo wax soo saarka.

Waxa la dhammaystiri doonaa muddada, qorsha rugo baadhitaan iyo tababarro xoojinta ilaalinta maamulka iyo horumarinta kaymaha iyo ugaarta, waxaa la fulin doonaa mashaariic ku saabsan ciidda iyo biyaha iyo arrimo kale oo ku saabsan hagaajinta kaymaha.

## Qorshaha Shanta sano iyo Kalluumaysiga.

Soomaaliya waxay leedahay xeeb dhererkeedu yahay 2800 oo km, kana bilaabma gacanka Carbeed xagga Woqooyiga kuna dhammaada diillinta adduunka barta koonfurteeda, xeebtaasi waxa ka buuxa kalluun noocyo badan, waxana lagu qaddaraa kalluunka laga soo bixi karo Soomaaliya sannadkiiba 7.5 milyan tan oo hada in yar laga manaafacaadsado, sababtoo ah iyadoo aanay jirin arrimaha farsmada ee kalluumaysiga casriga.

Dhibaatooyinka ugu waaweyn ee dhinaca kalluumaysiga Soomaaliya lagala kulmayo waxay yihiin:

1. Doonyaha ganacsiga iyo kalluumaysiga iyo dadkii wadi lahaa, si loo manaafacaadsado hodantinimada, oo yar.



2. Qasacadaynta oo dib u dhacsan, iyo iyadoo aanay jirin meeshii lagu qallajin lahaa kalluunka inta aan gudaha lagu cunin ama la dhoofin.
3. Sayladeyntiisa oo dhibaato lagala kulmayo, sababtoo ah jidadka meelaha xeebaha iyo dalka gudihiisa oo xun.
4. Xeebahaas oo aan u samaysnayn sidii looga dhisi lahaa dekado ay ku soo xirtaan maraakiibta iyo iyadoo ay ku yar yihiin waxyaabaha ay u baahan yihiin dadka kalluumaysatada ahi sida biyaha oo kale.

....Waxa ka mid ah ujeeddooyinka qorshaha shanta sano in la kordhiyo hawlaha kalluumaysiga, in la hagaajiyo xaaladda dhaqaalaha kallumaysatada iyo in la kordhiyo ahmiyadda dadku u leeyahay cunista kalluunka.

## Horumarinta Biyaha

Ujeeddooyinka qotada dheer ee horumarinta biyaha dalka Soomaaliya waxa weeye in la helo biyo ku filan dadka in hore loo mariyo hodantinimada beeraha, xoolaha nool iyo sancada, taasoo loogu tala galay kharaj aan badnayn. Qorshuhuna wuxuu qorayaa in la xoojiyo Wakaaladda Horumarinta Biyaha, iyadoo la siinayo qalab ku filan iyo shaqaale farsamo-yaqaan ah, shaqaalahana waa la tababari doonaa, magaala walbana waxaa loo samayn doonaa hab ay iskaga fillaato xagga biyaha.

# MACDANTA

Xukuumaddu waxay waddaa iyadoo u xil saartay arrintaas, baadhitaanka batroolka, taasoo ay fulinayaan Shirkadaha loo oggolaaday hawshaas, ujeeddada qorshuna waxa weeye in la wado hawlaha sahaminta iyo qodidda batroolka iyo macdanta dalka ka socota.

Istiraajitiyadu waxa kale oo ay tahay in loo beddelo mawaadka mashruucaad ganacsi ah. Waxa dib loogu noqon oo la qiimayn doonaa meelaha macdanta lagu yaqaan, waxyaabaha faraha badan ee Woqooyi laga helayna waa la ganacsi gelin, birta ceeriinna fiiro ayaa loogu noqon.

## KORONTADA

Ujeeddada qorshaha shanta sano waxay tahay in loo dhiso korontada Hay'ad guud oo iskeed u taagan oo Korantada dadka ku gaarsiisa qiima yar. qorshadu markay dhamaanayso waxa kordhi doona awoodda Korantada oo iminka ah 19.800 oo Kiiloowaat, waxanu noqon doonaa 500.600 Kiiloowaat, qorshaha waxay qoraysaa in la hagaajiyo Korontada guud ahaan, iyadoo la mamaynayo Warshado guurguura, lana hubeeyo kuwa ma dhaqaaqdada ah.

## SANCADA

Warshad yar oo sonkorta lagu sameeyo ayey ka dhaxashay Soomaaliya gumeysigii, mana jirin wax kale oo la sheegi karo.

Gobanimadii ka dib guul la sheegi karo lagama gaarin arrintaasi, warshadaha la sameeyeyna waxay ku koobnaayeen waxyaalaha la cuno oo 95 % noocaas ahaa, waxana lagu samayn jiray waxyaalaha dalka gudihiisa sida xoolaha, beeraha iyo kalluunka.

Warshadaha waaweyni sida caadadu tahay waxa maamula dawladda, xukuumaduna tallaabooyin ayey ka qaadday sidii loo xoojin lahaa sancada dalka loona warshadayn lahaa.

Go'aankii lagula wareegay warshadda Sonkorta iyo tadharka wuxuu ahaa mid dhaxalgal ah oo lagu balaadhinayo qidaaca caamka ah. Warshado ayaa loo dhisay Caagga, Sigaarka iyo Taraqa si isku fillaansho looga gaaro labadaa silcadood. Waxa kaloo la dhisay Wershadaha shiididda Galeyda iyo Mesagada oo laga dhisay magaalooyinka Hargeysa, Kismaayo iyo Muqdisho mid walibana wuxuu soo saarayaa sannadkii 2400 oo tan, waxa kaloo la dhisay warshad lagu qasacadeyo khudradaha iyo fawaakihda awooddeeduna tahay 4000 oo tan sanadkii, dibna waxa looga shaqaysiiyey Warshaddii qasacadaynta kalluunka. Waxa la abuuray Iskaashatooyin oo ku shuqul leh sancadaha gacanta si loo kordhiyo Wax soo saariidda iyo nolosha shaqaalaha. Warshad Sibirka ahna waxa laga sameeyey magaalada Berbera.



Ujeeddada qorshuhu waxa weeye dhinaca sancada in aad looga faa'iidaysto khayraadka Xoolaha, Kalluunka iyo Beeraha, biyaha dhulka ku aasan oo lagaga kaaftoomi karo waxyaabaha dibadda laga keeno, iyo in la kordhiyo alaabta warshadaha ee dibadda aan u dirayno.

Horumarinta Warshadaynta waxa door weyn ka ciyaara qidaaca caamka ah, inkastoo laga faa'iidaysan karo kan khaaska ahna. Dawladdu kaalmo farsamo ayey siin doontaa qidaaca khaaska ah, waxa la ogolaan doonaa hanti gelinta shisheeyaha iyo shirkadaha iyo in lacag shisheeye la geliyo horumarinta shaqada, markay taasi muuqato inay waxtar u leedahay horumarin degdeg ah ee dhaqaalaha iyo bulshada, waxaana la tixgelin doonaa ururinta iyo qaybinta meelaha laga samaynayo warshadahaas cusub si horumar wacan looga gaadho arrintaas.

## GAADIIDKA IYO ISGAARSIINTA

Kharajka ku baxay Gaadiidka iyo Isgaarsiinta saddexdii sano ee la soo dhaafay wuxuu dhan yahay 190 Malyuun oo Shilin.

## WAXBARASHADA, TABABBARADA IYO HIDDAHA

Dawladdu waxa ay fulisay Ololihii la dagaalanka jahliga si wax weyn looga bedelo arrimaha dalka lamana qaadan karo jahligu siduu ugu faafay dalka Soomaalida oo aan aad u weynayn, muddo sannad ah waxa ku guulaystay Ololahaas 400.000 oo ruux.

Ujeeddada qorshaha shanta sano waxa weeye in la badiyo dadka loo qaadanaayo heerarka tacliinta ee kala geddisan, dimuqraadiyad laga xaqiijiyo Waxbarashada, Waxbarashada farsamada oo culays la saaro, Jaamicadda waddaniga oo hore loo mariyo, si loo helo hawl wadeen aqoon sare leh, kuliyaad cusub oo loo dhiso, dawada, in jineeriyadda iyo xoolaha, nidaamka tacliinta dadweynaha oo la faafiyo wax baridda haweenka, dhaqdhaqaaqa dhallinyarada iyo tababbarada farsamada oo loo dhiso machad, aqoon hawleedda shaqaalaha oo kor loo soo qaado, qoridda afka Soomaaliga

oo la xoojiyo. Kharajka loogu tala galayna wuxuu yahay 191 Malyuun oo shilin.

## CAAFIMAADKA

Sida ay qorshadu tahay waxa weeye in kor loo soo qaado cuntada dadweynaha, kaasoo loogu tala galay barnaamij kor u dhigidda aqoonta Caafimaadka, shaqaalaha Caafimaadka oo tababar heer sare ah la siiyo.

Waxa kale oo ku jirta in dadka deggan magaalooyinka iyo miyiga la gaarsiiyo hawlaha daryeelka Caafimaadka iyo in loo suura geliyo in dadka ku nool miyiga inay helaan dawooyinka iyo waxyaabaha Caafimadkoodu u baahan yahay.

Kicinta baraarujinta Caafimaadku hore umay jirin, waxaanu hadda ka koobnaan doonaa barnaamijyo waxtar leh, **kulliyadda dawada ee Jaamacaddu waxay soo saari doontaa** Dhakhtarro ku filan dalka, waxa kaloo xukuumaddu dhistay dugsi tababar shaqaalaha Caafimaadka ah mid Hargeysa ka dhisanina waa jiraa hase yeeshee mid saddexaadna waa la samayn doonaa.

## BARNAAMIJKA GURYAHA

Dhismaha guryaha gaar ahaan dalalka soo koraya qiima weyn ayuu u leeyahay wuxuu waxtar u leeyahay horumarinta alaabta dhismahana muftaax ayey u tahay fulinta barnaamijyada dhismaha guryaha dadweynaha.

Si looga hor tago dhibaatada guryaha, waxa ay tahay ujeeddad qorshaha in magaalooinka laga dhiso guro dawladduna fara geliso, miyigana ay dawladdu gacan ku siiso sidii guryo looga dhisi lahaa, horumarinta alaabta dhismaha, iyo in qorshe sugan loogu tala galo dhinaca dhismaha, dawladduna waxay dhisi doontaa shanta sano ee soo socda 13650 waxaana loo qaybin doonaa magaalooyinka waaweyn ee dadku ku badanayo. Meelaha dibadaha ahna waxa laga dhisi doonaa 7136 guri, qidaaca khaaska ahana gacan baa lagu siin sidii ay uga qayb geli lahaayeen dhismaha guryaha.



## WARFAAFINTA:

Qalabka Warfaafintu ha noqdo Idaacadaha ama Jaa'idka way fahmeen kaalintooda intooda intii Kacaanku curtay, taasoo ku saabsan horumarinta dalka kaalin weyn ayey ka ciyaareen qalabkaasi Ololayaashii Horumarinta Reer Miyiga, xoraynta dumarka, kor u qaadidda aqoonta dadweynaha Qorshaha santa sanana waxa la xoojin doonaa qalabka warfaafinta waxana la balaarinayaa hawlihiisa. Waxa la dhisayaa Idaacado cusub iyo meelaha hadalka looga qabto Raadhiyowyada si looga faa'iidaysta awoodda kordhaysa ee Idaacadaha, waxa lagu tala jiraa in dalka laga dhiso Raadiyaha layska arko kaasoo qiimo weyn u leh la dagaallanka aqoon darrida, fulinta barnaamijka waxbarashada, dadkoo la baro waxyaabaha dunida ka dhacaya, dawladduna waxay ka dhisi doontaa magaalada Xamar Raadiye layska arko oo dalka intiisa kale wararka looga tabiyo.

## DALXIISKA

Soomaaliya waxay ka mid tahay dalalka laga helo ugaar ku nool dabeecadda inkastoo ay ku nool yihiin ugaarta noocaas ahi gobollada Koonfureed, hase yeeshee gobollada kale qudhooda waxa laga helaa ugaadhaa daawashada ku wanaagsan.

Qiimaha dalxiisku u leeyahay horumarinta dhaqaalaha daraadeed ayaa loo abuuray Wasaarad u gaar si ay hore ugu mariso dalxiiska dalka mustaqbalka, iyadoo la tixgelinayo awoodda dhaqaale, dhibaatooyinka ugu waaweyn ee arrintaas ku saabsani waxay tahay hudheello la'aan iyo xagga gaadiidka iyo isgaarsiinta hase yeeshee waxa lagu kharaj garaynayaa 12.5 Malyuun shilin dhismaha hudheelada, meelo lagu nasto, tuulooyin dalxiis ah iyo waxyaalo la mid ah.

## SOOMAALIA WAA DAL LEH MUSTAQBAL WACAN.

Booqashadii aanu ku tagnay dalka Soomaaliya waxay noo suura gelisay inaanu soo aragno guulaha waaweyn ee laga dhaqan geliyey dalka Soomaaliya gaar ahaan arrinta loo

yaqaan Iskaa wax u qabso oo ujeeddadeedu tahay dhuux muruqaaga oo haw hanqal taagin kaalmada shisheeya.

**Warshadda Hilibka**

Intii aannu booqashada ku joognay dalka, Kismaayo oo ah meelaha warshadaha leh waxanu daawannay Warshadda Hilibka oo uu nooga sheekeeyey Injineerka weyn ee halkaa jooga wuxuu noo sheegay in Warshaddaa la bilaabay 1963kii waxaanay dhammaatay 1968kii, iyadoo lagu dhisay kaalmada Midowga Soofiyeeti, waxa ku baxay 37 malyuun oo shilin waxaanay bilawday wax soo saaridda 1969kii, awooddeeduna waxa weeye 250-300 oo neef in lagu qalo. Waxa ka shaqeeya warshaddaas 550 qof 180 ka mid ihi ay dumar yihiin, warshaddu waxay soo saarto waxa loo qaybiyaa saddex nooc oo loo diro Midowga Soofiyeeti iyo dalalka Carabta.

**Warshadda Samaynta Caagga iyo Waraaqaha.**

Warshaddaa waxa la dhisay 1971kii, wax soo saaridda waxa la bilaabay 1972kii. Soomaaliya waxa weeye dawladda shanaad ee dunida ee soo saarta alaabta laga sameeyo Warqadda iyo Caagga, baaritaan dalka Iswidhan lagu sameeyeyna wuxuu caddeeyey in alaabtaasi tahay ta ugu wanaagsan, warshadda waxa ka shaqeeya 240 qof, awooddeeda wax soo saaridduna waxay gaaraysaa 11 malyuun ee kiishka caagga ah oo lagu guro Muuska iyo Fawaakiihda la dirayo. Warshaddaasi waxay ku shaqaysaa alaab toos isu wadda, lacagta ku baxdayna waxay dhammayd 20 malyuun oo shilin oo lacagta adag ah, faa'iidooyinkeeda waxa ka mid ah iyadoo laga helaayo waaya-aragnimo shaqaalaha Soomaaliyeed shaqo ka helayaan. Dhismaha warshada waxa ka qayb galay Wakaaladda Muuska, Shirkad Talyaani ah iyo Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed.

**Ururinta Muuska**

Intii aanu Kismaayo joognay waxanu daawannay meesha muuska lagu ururiyo marka la dhoofinayo, waxaanu ka mid yahay waxyaalaha lacagta soo geliya dalka. Rugtaa waxa laga dhoofin karaa 30.000 oo xirmo bishiiba.



Dalka Soomaaliyeed waxa ku yaalla 88 meelood oo lagu ururiyo muuska. Iyadoo aannu intaa ka gaarayno waxyaalihii aannu ku soo aragnay Soomaaliya muddadii aannu booqashada ku joognay ayaa la oran karaa dalkaa Carbeed ee Afrikaanka ah, waa dal mustaqbalkiisu wacan yahay, Carabtana u haya kayd cunto iyo alaabta ceedhiin ee kala geddisan. Dalkiisana hadda wuxuu ku dhisayaa Iskaa Wax u Qabso iyo hantidiisa kooban, waxaanu ka sugayaa walaalihiisa Carbeed sidii ay gacan ugu siin lahaayeen dhismaha dalkiisa iyo in la dhaqan geliyo iskabka dhaqaalaha Carbeed, waana mabda'a mas'uuliyiinta Soomaaliyeed doonayaan in uu dhaboobo, waxaanay jecel yihiin in kaalmada Carbeed wax lagaga qabto dalka iyadoo taasi dabada ku hayso xiriirka kalgacaltooyo ee taariikhiga ah ee ka dhexeeya Soomaaliya iyo Carabta.

## JAALLE SIYAAD OO KA JAWAABAYA SU'AALAHA WARGEYSKA ROOS-AL-YUUSUF OO KA SOO BAXA DALKA MASAARIDA

Halkan waxaannu idiinku soo gudbinaynaa xog-wareysi uu la yeeshay Qoraha Wargeyska Roos-Al-Yuusuf oo maalin kastoo Isniin ah ka soo baxa magaalada Qaahira Sayid Maxamed Cawda, Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre, markii uu booqashada ku yimid dalkeenna dabayaaqadii 1975kii, oo lagu nashiray cadadkii labadii bishii Febraayo 1976ka.

**Su'aal:** — Qofna dafiri maayo qiimaha ay Soomaaliya u leedahay dalka Masar xagga Militariga iyo dhaqaalaha, sidaa darteed ayaa ra'yul caamka masaaridu xaq uu u leeyahay inuu isweydiiyo maxaa ka qabtaan islaamka?

**Jawaab:** Kumay habboonayn ra'yul caamka masaarida inuu jawaabta su'aashaa wax dhibaato ah kala kulmo. Shacbiga Soomaaliyeed boqolkiiba muslin weeye. Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu ka dhashay oo uu daacad u yahay Kacaankii 23kii Juulay, 1952kii waanay fahamtay casharradii

kacaankaasi. Waxna way ku kordhisay. isagoo toobiyaha haysta..... Tallaabo loo qaaday siyaasadda xaggeeda miyaanay ahayn?..... Su'aashuse waxay tahay: Maxay u doorteen?.... Dadka Soomaaliyeed waa dad waaqici oo had iyo jeerba run a ku dheer. Sidaa darteed ayay shay walba ugu magac daraan waxa uu yahay. Annagana nama hor oollin jid kaloo aannu marnaa... Mar haddaannu hantiwadaagga doorannayna waa inuu noqdaa cilmi. Na lama gudboona mana haboona inaannu dooranno hantiwadaag dhalanteed ah... Hantiwadaaggu sidiisaba waa cilmiga isbeddelka bulshada iyo fasiraaddiisaba.. Tilmaan kaloo la siin karaana ma iirto... Haddiiba uu yahay hantiwadaaggu Maarkisiyadda maxaynnu uga dhuumaalaysanaynaa? Maxaynnu toos ugu qaadan weyney? Dugsiyada iyo tajrubadaha hantiwadaagga ee waaweyni ee la sugay inay run yihiin waa Maarkisiyada. Maxaynu wax uga baran weyney? oo aynu u dhambalan weyney? Si kastaba arrintu ha ahaatee laba jid ayaa nala gudboonaa inaannu mid uun qaadanno, taasoo ay nala wadaagaan dalalka adduunka ee aan horumar weyn gaadhin weli. Jidka hantigoosadka ah iyo tubta hantiwadaagga ah.

Jidka hore haddii aan soo qaadanno waxaanu la dhutinaynaa dhibaatadii naga soo gaadhay saboolnimada argagaxa leh ee aanu ku jirnay iyo dib u dhaca maanta aannu la taahaynaa waxay salka ku hayaan habkaasi. Muxuu yahay Gumeysigu? Miyaanu ahayn hantigoosadkoo qoqobtay intuu durugsaday dalal kale addoonsaday? Wuxuu habka hantigoosadka ku dhisay hodantinnimada iyo barwaaqada dhiiggayaga, ka dadyawga Aasiya iyo Afrikaanka nala mid ah.

Habkaasi wuxuu kadeeday shaqaalaha reer galbeedka waxaanu dhiig miirtay dadyowga reer bariga adduunkana wuxuu ka abuuray dhaqaale koboccsan oo aan isu dheelli tirnayn.

Waa nidaamkii u horseeday dunida halganadii dabaqadeed kuwii wadaniga ahaa iyo dagaaladii dunida ee laysku hoobtay, welina wuxuu ku dhagsan yahay waxyaalihii uu ku soo dhaqmi jiray... oo ah dhiig miirad.

Mararka qaarkood hantigoosigu waxa weeye macnihiisu dhiig miirad u adeegaya oo kaliya shisheeyaha... Hantigoosadka cusubina wuxuu u adeegayaa isla shisheeyahaas iyo kuwa yar oo wadaniyiin isku sheegaya lana qadhaabaya shisheeyahaa Hantigoosadka ah.

Dadweynaha faraha badanina wuxuu ku noolyahay sabool iyo gaajo taasoo weli haysata, waana wixii aanu ku soo noolayn muddadii sagaalka sano ee aannu xagga siyaasadda ka madaxbanaanayn... Sideebaannu hadaba u dooranaa ama ugu dhaqannaa habkaas. . . ?

Annagu waxanu nahay mujtamac aad u dambeeya, Jimciyadda quruumaha ka dhexaysaana waxay nagu tirisaa dadka ugu horreeya 25ka dawladood ee ugu saboolsan adduunka. Lama huraan weeye markaas... inaanu ka rarno shacbigayaga marxallada uu ku nool yahay oo ah... ta ka horraysa dhul goosiga mana suura galayso inuu muddo kale ku jiro waayaha maanta haysta. Lama huraan waxa weeye inaan dalkayaga u horseedno sidii looga saari lahaa gaajada oo loo gaarsiin lahaa nolol wanaagsan.

Sidaa darteed, ayey lama huraan u tahay inaanu gacanta ku dhigno hodantinimadayada inaanu isu geyno hantida aannu haysano iyo awoodayada, inaanu qorshayno waxaanu soo saarayno iyo waxaanu u baahanahay, inay xisaabsanaato tallaabo kasta oonu qaadayno. Taas weeye taanu ku magacaabayno Hantiwadaagga cilmiga ah.

Doorashadayaduna ma aha wax iska yimid oo aan daba ku hayn siyaad qoto dheer.

Waxaa jiri jiray dalkayaga Asxaab Hay'aad iyo dad magac weyn oo ku baaqi jiray Hantiwadaag, hase yeeshee waxay ku baaqi jireen Hantiwadaagyo fara badan, Hantiwadaag Soomaaliya, Hantiwadaag islaam, Hantiwadaag Africaan, iyo Hantiwadaag Carbeed, mid uun bay necbaayeen oo aan lagu kari jirin dhamidoodbana may soo hoyn wax guul ah, maxaa yeelay Hantiwadaaggu wuxuu ahaa gaashaan ay ku ugaarsanayaan oo ay ku qarinayaan danahooda qabyaaladeed, xisbi-

nimo iyo kuwa gaar ah ee muu ahayn mid loogu adeegaayo dadka.

Qaaradda Afrika waxaanu ku aragnay dalal ku dhawaaqaya Hantiwadaagga hase yeeshee ma jiro wax dhaqan gelin ihi, ee waxay ku qarinayaan dabeecadda Hantigoosadka ah iyo dhiigmiiradka ay ku hayaan dadkooda kuwa yar ee xukumayaa.

Sidaa darteed ayey tahay doorashadayada hantiwadaagga cilmiga ah inaan caddeyno waxaannu doonayno... Hantiwadaagga laftiisana u soo celino qiimihiisa iyo kalsoonida dadku ku qabo, sidaasaana dhacday maxaa yeelay bulshada Soomaaliyeed si weyn ayey u taageertay markii aan doorannay Hantiwadaagga.

Waxaanu rabnaa inaan khiyaamayn dadkayaga oo aanaan ku dhaqin hal ku dhagyo aan meel surnayn iyo inay noqoto doorashadayadu jid cilmi ah oo kacaan ah oo aanu kaga hortagno dhibaatada iyo waayaha na haysta.

Hantiwadaagga cilmiga ah waxanu uga jeednaa annagu in la tirtiro in qofqof ku dul noolaada, waxa kaloy tahay in la abuuro mujtamac aan isku dul noolayn isna kadeedayn, waa jidka kaliya ee mujtamac la addoonsanayo iskaga goyn karo sisiladaha addoonsiga abuurina kara mujtamaca bani aadaminimo leh.

Haddii Hantiwadaagga asalkiisu Yurub ka soo jeedo ifkana u soo baxay bartamihii qarnigii aynu soo dhaafnay waxa caadi ah inuu na soo gaaro, maxaa yeelay waa hab caalami ah bani'aadmigoo dhammina wuxuu u halgamayaa ujeeddooyin isku mid ah, kuwaasoo ah sinnaan iyo cadaalad, hase yeeshee hantiwadaaggu wuxuu soo maray isbeddello fara badan iyo dhaqan galin annaguna waxanu ka bilaabaynaa halkii ay soo gaarsiiyeen, waxaannu ugu adeegaynaa sidii aanu u soo saari lahayn dhibaatada mujtamacayaga u gaarka ah, waxaanuna u guuraynaa heer sare.

Waa laga yaabaa inaan mujtamacayagu lahayn dabaqaad, sida maarkisiyadu u taqaanno. hase yeeshee waxa jira dadweyne tira badan oo kadeedan lana dulmo kuwaasoo ah raacatada, beeralayda, kalluumaysatada, shaqaalaha hoose iyo askarta. Dhinaca kale waxa jira dad yar oo dhiig miirad ah iyo kuwo danaystayaal ah oo u adeegaya shisheeyaha. Kaas weeye dagaalka ka taagan mujtamaca Soomaalida, dawlad kastaana waxay dhaqan galinaysaa Hantiwadaagga iyadoo tixgelinaysa duruufta gaar ahaaneed, annaguna waxanu u aragnaa Hantiwadaagga inaanu ahayn Tiyooriyad iska yimid ee waa wax isbeddelaaya, siday isu beddelayso nolosha aadamigu. Ma aha tababarro ku saabsan fikradda iyo idiloojiyada oo kaliya, waxa weeye dadaal meel mar ah oo u dhalinayo shacbiga shaqaalaha si xal loogu helo dhibaatooyinka uu tabanaayo. Waxa weeye salka ka dhalanaaya wax qabashada. waxaanay ka dhalanaysaa run ahaan mar haddii dadka kalaba ay ku dhaqan geliyeen Hantiwdaagga duruuftooda gaar ahaaneed, annaguna sidaasaan samaynaynaa weliba annagoo wax ku kordhinayna.

Marka aan ka hadlayo duruuftayada gaar ahaaneed ma aha dhaqaalaha iyo bulshonimada oo keli ah ee waxan si aad ah maskaxda ugu hayaa hiddahayaga ruuxiga, dhaqanka iyo ka qawmiga ahba.

## DOOD MASJID

Hase yeeshee hiddaha aan ka soo hadlay wuxuu dabada ku hayaa Islaamka, kolkaa miyeey iska hor imanayaan Maarkisiyada?

Soomaalidu waa dad Carbeed oo muslimiin ah waxaanay ogyihiin inay Carabnimadu tahay qoomiyad islaamkana loo soo dejiyey in dadku ku noolaado cadaalad iyo sinnaan taariikhdayaduna waa mid ku dhisan halgan dheer si aanu u ilaashano shakhsiyadayada, qoomiyadayada iyo diintayada. Dadka Soomaaliyeed waa muslim Eebbaheenna aad bay u rumaysan yihiin, marar badana difaac badan ayey u galeen iyagoo u dagaalamaya diinta iyo dalka kana hortagaayey weeraradii lagu soo qaadi jiray.

Hantiwadaaggu ma aha risaalad samada laga keenay sida Islamka ee waa hab kala hagaaya xiriirka u dhexeeya ummad-

da isagoo adeegsanaya qalab wax soo saaridda si loogu wada intifaaco.

Sidaa darteed majiro wax iska hor imaad ihi oo ka dhex dhalanaaya habkaas aanu ku hagaajinayno ama ku qorshaynayno hantida iyo khayraadka wadaniga ah iyo Islaamka. Ilaahayn wuxuu abuuray bani aadanka waxaanu ku mannaystay caqli, si uu u kala sooco waxa xun iyo waxa san.

Hantiwadaagga cilmiga ah waxanu u dooranay isagoo ah jidka habboon ee annu ku xorayn karro qofka Soomaaliyeed ee muslimka ah nolol wanaagsanna ku gaarsiin karro qof kasta oo Soomaali ah, si uu wax u cuno, u cabbo, u shaqaysto, u barto wax, u barto axkaamta diintiisa gutana waajibaadka ka saaran.

Hase yeeshee waxa oogsaday kooxo dibusocod ah oo doonaya inay dhibaato ka dhex dhaliyaan Hantiwadaagga iyo Islaamka. maxaa yeelay hantiwadaaggu waxanu la socon danahooda gaar ahaaneed, sidaa aawadeed waa inay la dagaalamaan oo ay ku hagoogaan dhiigmiirad-nimadooda maro dhawrsoon, kamanay xalaal mirin inay bedelan hadalka Ilaahay diintana been ka sheegaan.

## Diinta Islaamka iyo Hantiwadaagguba waxay ilaalinayaan Danaha Dadka

Halkaasuu ka bilaabmay dagaalka lagu soo dhuumanayo diintu. Run ahaantii diinta oo lagu shaqaystaa waxay noqotay hubka gumaysiga dibu socodkuna waa waxyaalaha ugu waaweyn ee uu ku qaraabanayo, waxaynay iska dhigayaan gumaystayaashi kuwii ilaalinayey diinta... Waa ayo cadawga ay la dagaalamayaan kuwaasi.... waxa weeye kuwa doonaya in laga saaro dadyowga cadaalad darada uu ilaahay xaaraameeyey, diintuna ku soo degtay, si looga kor yeelo dadyowga.

Kolkii hore waxaanu is lahayn waa wax dibusocodka maleegaya oo iska dami doona, hase yeeshee waxaan ka war hellay markii aanu ogaanay inay tahay wax xeel dheer oo gudaha iyo dibadda isku xiraysa ka go'ayna, markaasaa aniga oo



noolaa muslinimo kuna dhiman doonaa laygu tilmaamay gaal Ilaahay ka go'ay dhiiggaygu uu u xalaal yahay muslimiinta .... Soomaaliya oo ku caana inay tahay qalcad Islaamka ee Afrikada bari, ka galay Islaamka xaggeeda kuna fiday Afrika, lagu tilmaamay inay noqotay saldhig shuuciyadeed.

iyadoo la tukanayo salaadda ciidda weyn sanadkan ayaan is dhex taagay masjidka, halkaasoo ay joogeen culimada iyo duqaytida diinta u waaweyn, danjirayaasha dalalka Carabta iyo muslimiin fara badan oo tukanaysay, kolkaasaan iri: «Shaki kuma jiro inay qaarkiin rumaysan yihiin in Islamka iyo Hantiwadaagga cilmigu ay iska hor imanayaan, haddana waxaynu ku jirnaa gurigii Ilaahay oo ay tahay arrinta qura ee lagu kala baxaa aqoonta iyo cabsida, waxaanan idinla hadlayaa anigoo qof caadiya ah... oo aqoon raadis ah.. kolkaa waxan ka codsanayaa in haddii uu jiro ruux garanaya iska horimaadka uu i tusiyo aayad quraan ah ama xadiis caddaynaya waxan innagu xeerani waa kutubtii diinta'e... Masjidna waa ku jirnaa dad badanina waa ina dhagaysanayaaye... waxan idinka codsanayaa in arrintaa laytusaa.

Waxay yiraahdeen kuwii hadlay ma jiro iska hor imaad, mar haddii hantiwadaaggu yahay in la helo caddaalad, sinnaan, xuquuqda iyo xorriyaadka oo dadka loo oggolaado... Kuwaasina waaba arrimaha ugu waaweyn ee ku baaqayo Islaamku. Kolkaasaan iri «Maxaa haddaba qaar u rumaysanayaan dicaayadda ay faafinayaan gumeystayaasha iyo sahyuuniyaddu, kuwaas aan khayr la rabin Islaamka iyo muslimiinta toonna.»

Waxay ahaayeen kuwa wax gumeystaa weligoodba kuwa faafiya in Islaamka laftiisu sabab u yahay dib u dhaca muslimiinta uu Islaamku sal u yahay shisheeye nacaybka, reer magaalnimo nacaybka, in laba naagood la guursado, taasoo ay uga jeedeen inay sii haystaan dalka si ay nooga saaraan diinta. Wadaadadii ku faafay dalka iyo Afrikada Muslinka abba waxay ku abuurayeen muslimiinta fikradda noocaas ah, waxay dhaliili jireen islaamka waxaanay ka dhaadhicin jireen Islaamka inaanay horumar gaarayn inta ay diintaa haystaan.

Markii ay xoroobeen, dalalkoodii xoreeyeen isku dayeen

inay beddelaan noloshooda oo gaaraan ilbaxnimo iyo nolol casri ah ayey caroodeen gumeystayaashu oo ay yiraahdeen muslimiintu waa kuwa lumiyey Islaamkii, waxaanay iska dhigeen kuwa u soo jeeda diinta iyo caqiidada Islaamka.

Waxaan iri kuwaasi doonimaayaan inuu bani'aadanka Islaamku xoroobo ama uu jiro Islaam saxiix ahi mana doonayaan inuu islaamku gaaro ilbaxnimada iyo nolosha casriga ah, dhamidoodna way ugu waafaqeen ra'yigaasi.

Arrinta diintu way ka geddisan tahay agtayada markaloo eego reer galbeedka waana laga yaabaa inay Hantiwadaagga iyo Diintu iska horyimaadaan sida ay qabaan reer galbeedku, hase yeeshee annagu taa ma hayno.

Waxaanu dhaqan gelinaynaa Hantiwadaagga si waafaqsan duruuftayada gaarka ah cilmigana waa ka fiirsanaynaa annagoo qaadanayna wixii naga anfacaya, diintana waxa loo soo dejiyey inay u adeegto bani'aadanka, hantiwadaagguna wuxuu u adeegayaa dadka lagu tumanayo xuquuqdooda..

Yurub haddii aan dib ugu noqono bartamihii qarnigii aynu soo dhaafnay markii hantiwadaaggu soo if baxay diinta iyo culimaa'udiinku waxay gacanta ugu jireen dadka xukunka iyo hantida haysta waxaanay ugu adeegi jireen diinta dhiigmiiradka iyo gumeysiga, wadadaadaasina waxay ahaayeen qalab lagu adeegto shurugna waxay la ahaayeen kuwii shaqaalaha iyo masaakiinta kadeedayey, sidaa darteed ayey ugu kaceen abwaanadii Hantiwadaagga iyo dadweynihii shaqaalaha ahaaba.

Anigu waan la doodaa had iyo jeer culimaa'u diinka iyo mashaa'iikhda, waxaanan u qaybiyaa dhawr nooc... Waxa jira koox la lumiyey, sababtoo ah iyagoon aqoon xoog leh u lahayn diinta iyo siyaasadda toona, kuwaas waanu la doodnaa, maxaa yeelay waa daacad, waxaanuna isku daynaa inaanu hanuunino. Waxa jira iyaku kuwo wadaad xumayaal ah gambaysta cumaamado waaweyn oo cadcad. Waxay la qaraaban jireen ama u adeegi jireen gumeystaha, waxaanay wax la cuni jireen dibusocodkii ku xigay.



Maalin maalmaha ka mid ah markii uu soo noqday Talyaanigu ayaan qabtay Masjidka si aan u soo tukado Jimcaha, kolkaasuu Sheekhii istaagay oo yiri Talyaaniga Ilaahay ayaa soo celiyey haddii aanu rabina ma soo laabteen, kolkaasuu soo daliiliyey aayad Quraanka ka mid ah uu ku amrayo dadka in la adeeco xukaamta.

Kaddib waxaanu ogaanay in la siiyey guri iyo lacag uu inan yarna guursaday, waxaanu u adeegi jiray iyaga ilaa ay ka laabtaan, mise haddana waxaabuu noqday culimadii cahdigii waddaniga ahaa, oo wuxuu amrayaa dad in loo hoggaansamo Ilaahay, Rasuulkiisa iyo Madaxdayada.

Markii aan ku dhawaaqay hantiwadaagga ayuu naga soo hor jeestay, kolkaas baan u yeerayoo aan xusuusiyey taariikhdiisii dheereyd kolkaasuu kurbooday oo u codsaday in loo dambi dhaafo waxaanu sheegay inuu tegayo tuuladiisii si uu halkaa ugu go'doomo bilo ka dib ayuu warsaday inuu ila shiro kolkaasuu ii yimid waxaanu caddeeyey inaan wax iska hor imaad ihi jirin diinta iyo hantiwadaagga, uu codsaday in loo oggolaado inuu arrintaa dadka ku wacdiyo, hase yeeshee waxaan u sheegay inuu iskaga noqdo tuuladiisii.

Waxa jirta koox saddexaad oo ah iyagu culimada runta ah, waanay badan yihiin, halgankii waddaniga ahaana kaalin wanaagsan ayey ka soo qaateen, Hantiwadaaggana way nala dhisayaan, sutidana waxay u hayaan dadka qarbudaadda wada xilkana way nala wadaagayaan.

Miyey tahay muslinimadu inaanu ahaano shacbi dadka kale gacmaha hoos dhigta isagoo dhulkayagu khayraakaa ceegaago?

Miyey tahay muslinimo inuu qofka muslinka ahi walaalkiisa muslinka ah dhiigmiirto ama ku dul noolaado?

Arrimahaas ma way diintu banaynaysaa...?

Anigu waxaan rumaysanahay inuu ahaa «Nabi Maxamed» naxariisi dushiisa ha ahaatee Hantiwadaagyada kan ugu wanaagsan uguna weyn, maxaa yeelay wuxuu dhaqan geliyey

kacaan diini ah oo siyaasi ah oo beddelay taariikhda iyo nolosha bani'aadanka.

Waxa kaloo aan rumaysanahay inuu «Sayid Cumar Bin Khadaab» uu yahay tiirarka waaweyn ee Hantiwadaagga, maxaa yeelay wuxuu ku dhaqay muslimiinta caddaalad, waxaanu u noqday muslimiinta tusaale wacan oo lagu daydo.

Markii hore ee aan dadka Soomaaliyeed kala hadli jiray arrimahaas qaarkood baa xanshashiqi jiray oo oran jiray waxaasi waa isyeel-yeel iyo diiq isku qaris... Anna waxaan ugu jawaabi jiray meelaha ha ka dhuxdhuxlaynina ee soo bareera, haddii aad aqoon u leedihiin diinta iyo hantiwadaagga kumaydaan dhirrateen arrimahaas.

U soo guurin mayno Hantiwadaagga sidii wax iska diyaar ah soona dhanbalanmayno dhaqan gelin dal kale.. ee waxaan u hirgelinaynaa sida waafaqsan duruuftayada gaarka ah, waxaanu ku dadaalaynaa dhismaha mujtamacayaga ilaalinta hiddahayaga iyo dhaqankayaga, iyo dheefsiga khayraadkayaga dabiiciga ah.

Dafirimayno inay jiraan dalkayaga Hantiwadaagyahanno jar iska xoor ah waxayna yiraahdeen mar haddii aannu doorranay hantiwadaagga cilmiga ah waa inaan si buuxda u dhaqan gelinaa, ha noqoto dhinaca falsafadda, siyaasadda ama dhaqaalaha, Hantiwadaagga Maarkisiyaduna Eebbe ma rumaysna diintana way diidaysaa.. Kol haddii aynu rumaynay Hantiwadaagga kolkaa waa inaan si dhan u rumaynaa.. macna kuma jiro inaynu bar qaadno barna iska dhaafno... dadkii ayey dhexgaleen kolkaasay arrintaa ka dhaadhiciyeen.. iyagoo leh Jaalle Liinin wuxuu sameeyey sidaa iyo sidaa Kacaankii Oktoobar kaddib. Jaalle Maaw sidaa iyo sidaa ayuu u galay dib u socodka iyo wixii la mid ah.

Waxaan ku iri dadkaa: «kuwaasi aqoon uma laha aasaaska taariikhiga ee tacliintii abwaanadii Hantiwadaagga ee Waaweynaa, waxaanay ku hadaaqayaan waxaan la socon waqtiga iyo waxaan lagaga dhaqmi karin Soomaaliya. Mu'asasiinta Hantiwadaagga kamay soo hor jeedin in qofku diintiisa haysto, ee waxay ka soo horjeedeen dibusocodkii dadka maskaxda ka xadayey ee dib u dhigayey dadka horukaciisa kuwaas oo



aan badnayn waxaanna ku iri: «halis baad tihiin» idinkaa nagaga daran dibusocodka Hantiwadaagga ayaa halis u tihiin Soomaaliya ayaa halis ku tihiin... waxaad noo haggaaminaysaan haadaan.

Maxaannu u gaaloobaynaa een Ilaahay u dafiraynaa?

Waa maxay faa'iidada ku jirta inaanu ku baaqno gaalnimo?

Maxaa uga shaqayn weydeen dhibaatooyinka haysta dadka Muqdisho daadsan sidii xal loogu heli lahaa?

Markii ay waantoobi waayeen xabsigaan ku gurnay iyagoo ay ka mid ahaayeen Wasiirro.

Dadka Soomaalidu boqolkiiba boqol waa muslin (100%) wadaadadii baadariyada ahaa ee boqolka sannadood ku jirayna way ka saari kari waayeen diintoodii.

Annaguna markii aannu dhisnay machadka lagu barto Hantiwadaagga si loo abuuro hoggaan horusocod ah, waxaanu ka samaynay masjid marka laga aadamana ay u salaad tagaan dadka wax ku barta machadka waxaana jirta mashaa'iikh wax ku soo baratay oo ka aflaxday machadkaas.. waxaanay faafiyaan Hantiwadaagga iyagoo u xamaasadaysan.... midka kaliyihina wuxuu u dhigmaa horin. Dalal Afrikaan ihina qaarkood ayey na weydiisteen.. kolkaanu u dirnayna hawshoodii guul bay ka keeneen.

Uma oggolin qofna inuu dadka waswaas ka geliyo caqiidada waxanu doonaynaa inaanu beddello mujtamaca, inaanu xoorayno bani'aadanka, mana doonayno wax fadqalalo sameeya..., waa laga yaabaa labaatan sano ka dib markaanu dabargoyno jahliga, saboolnimada, cudurka oo aanu gaarno heerka dhaqaale iyo bulshanimo inaan u oggolaano inay dadku ka doodaan waxay doonayaan... haddase doonimayno inay isku hor keenaan hantiwadaagga iyo diinta.

**Ma ku warsan karaa haddaba maxaa isaga hor timaadeen Culimada diinta xeerka qoyska, maxaase toban ka mid ah loo dilay?**

Isagoo xamaasadaysan markiiba wuxuu yiri Madaxweynuhu: Kuwaasi may ahayn culimaa'udiin, loomana dilin inay ahaayeen sidaas Xeerka Qoyskana sabab kumay lahayn.

Maxkamaddoodii waxa ka caddaatay in siddeed ka mid ihi aanay garanayn wax akhriska iyo wax qoridda... mid ka mid ah ayaanu niri akhri Aayad Quraan ah waanu dhaqaajin waayey... mid kalana waxaanu weyddiisanay inuu weysaysto waxaanu ku bilaabay mayridda adinka bidix... midna Soomaaliba ma ahayn.

Laba wadaad ayaa ku jiray inta kalana waxay ahaayeen kuwa kharbudaad samaynaya oo lagu adeeganayo, waxa noo caddaatay inay jirto kharbudaad ballaaran oo ka taxan dibedda iyo gudaha iyadoo lala sameeyey xiriir hay'ado iyo ururro layskuna dayey in lagu soo dhuunto ciidammada qalabka sida oo laysku diro, waxa jiray dhaqdhaqaaq la doonayo in lagu afgambiyo nidaamka iyadoo lagu soo gabanayo diinta... ka bilaabma Masjidka dabeedna suuqa u baxa, halkaasna guuldarro ka dhacdo.

Sidaa darteed ayaanu ka qaadnay arrintaa tallaabo adag si aanu qofna uga baayac-mushtarayn diinta ama ugu dheeldheelin. Dibusocodka Kacaanka ka soo horjeedaana qoorta u taagin.

Xeerka Qoysku wuxuu ahaa marmarsiiyo, qodob kastoo ka mid ahna waa laga doodi karayey... in la saaro ama la beddelo, sababna umuu ahayn in lagu dhawaaqo gaalnimada kacaanka iyo dawladda lana xalaashado dhiigga hoggaamiyaheeda, dadkana loo soo saaro debadda si la noo dhagaxeeyo. Mu'aamaradaasi waxay ahayd mid lagu abuurayo qas iyo fidno iyo dhiig daadis iyadoo huwan magaca diinta... kana raalli noqon mayno.

Sidaasaa buuqa loo sameeyey, ujeeddaduna waxay ahayd in la xumeeyo sumcadda aanu ku leenahay Carabta iyo Muslimiinta, kuwa sameeyeyna qayb bay ku lahaayeen mu'aamaraddaa markii ay bilaabmaysay, waanu soo saari kari lahayn, hase yeeshee waa ka aamusnay anagoo tixgelinayna arrimo kale.



Arrintu siday u dhacday waxa weeye iyadoo ay na soo guda gashay munaasabaddii loogu dabbaaldegayey sannadkii dumarka adduunka, waxaanu damacnay inaanu muunayno haweenayda Soomaaliyeed aanu u soo celino xuquuqdeeda. Haweenayda Soomaaliyeed udub dhexaad ayey u ahayd halgankayagihii hore iyo kanba. Haddii aanay ka qaybgalinna ma xorowdeen Soomaaliya, taallooyinka ugu qiimaha badan ee magaalada Muqdisho waxa ka mid ah mid loo dhisay gabar ku geeriyootay bannaanbaxyadii iyo dagaalkii lagu qaaday Talyaaniga.

Mujtamacayagoo doortay Hantiwadaagga Cilmiga ah ma suuroobayso inaanu haweenayda siin xuquuqdeeda oo dhan ma aan la simin iyada iyo ninka. Qoysku waxa weeyaan unugga mujtamaca. Qoyska Hantiwadaagga ahina waa aasaaska mujtamaca Hantiwadaagga... Qoyskaasoo kalana kama dhalan karo waxaan ahayn laba geesood oo siman xagga xorriyadda iyo sinnaanta kuna dhisan kalgacayl iyo istixgelin.

Arrimahaasi waa kuwa markiiba la fahmi karaayo, Islaamka ayaa ku baaqay markii ugu horraysay... isaga ayaana qoray inuu guurku ku dhisnaado raallinimada iyo waafaqaadda haweenayda, lamana khasbi karo. Islaamka ayaa u oggolaaday haweenayda muslinka ah xuquuqdeeda iyo awooddeeda qaanuuniga ah iyo waxyaalaha kale ee ay xaqa u leedahay.... Hase yeeshee lama dhaqan gelin jirin taa, culimaduna way ka aamusi jirtay... Ninku wuxuu guursan jiray tirada intuu doono oo dumar ah intuu doono oo carruur ahna wuu dhalin jiray, tii uu doonana uu furi jiray isagoo aan mas'uuliyad iska saarin arrintaas.

Maalin baan arkay nin eryaya gabartiisii oo u dhashay sideed carruur ah iyadii iyo carruurtiiba markii uu furay wuu dagaalay oo wuxuu yiri: «Orodoo tag Maxakamadda haddaad wax ka soo helaysid.

Waxaan ogaaday inuu yahay nin xun, wuxuu qaadan jiray mushar aan ku fillayn ruux dumar ah oo keliya, hase yeeshee afar ayuu qabay iyagaa shaqaynayey oo masruufi jiray.

Haweenayda Soomaaliyeed waxay qabtay xaqdarro ka badan tii dadweynaha Soomaaliyeed, taasoo uu ninku sabab u ahaa waxay nala noqotay in xoraynta mujtamaca ay noqoto madaxbannaani dhaqaale inay haweenaydu ula sinnaato ninka xuquuqda iyo waajibaadka iyo in la baabi'iyo dhibaatooyinkii xagga ijtimaaciga ku haystay haweenayda iyo qoyska.

**Waxaanu laynay dibusocodyo aan ahayn culimaa'udiin**

Waxaanu samaynay guddi soo diyaarisa xeerka qoyska oy ka qayb galeen qaanuun yaqaanno, culimada diinta, dumar iyo dhallinyaro, si uu u noqdo waxa ay soo diyaarinayaan wax bulshada u faa'iideeya gundhigna u noqdo qoyska Soomaaliyeed ee cusub.

Markii la soo diyaariyey xeerkaas ayaa loo diray hay'adaha iyo ururrada oo dhan si ay talo uga soo bixiyaan markii taasi dhammaatayna waa la faafiyey... Qodobka ugu horreeya ee xeerkaasi wuxuu leeyahay «Waxa lagu dhaqan gelin doonaa xeerkaas arrimaha uu ka hadlayo oo idil, haddiise aanay noqon arrintu mid ku timid xeerkaas oo ka baxsan, waxa lala tiigsan doonaa xeerka Madhabta Shaaficiga... kaddibna Mabaadii'da guud ahaaneed ee shareecada Islaamka iyo caddaaladda ijtimaaciga ah.» Qodobka hore ee xeerku kaas ayuu ahaa, waxaana jiray qodob ku saabsan sinnaanta xagga dhaxalka oo buuqa intiisa badan sameeyey, hase yeeshee si loo fahmo qodobkaas lama huraan waxa ah in la fahmo xaaladda u gaarka ah Soomaaliya.

Qofna lama socdo inay haweenayda dalka Soomaaliya aan waxba laga siin jirin dhaxalka, xuquuqdeedana wax looga oggolayn, ama qaanuun ha ku qornaato ama yaanay ku qornaanin. Haddii uu nin dhinto oo u gabar ka tago keliya waxba may dhaxlayn... dhaxalkana waxa qaadan jiray qabiilladiisa.

Hadduu dhinto oo u ka tago wiilal iyo gabdhana wiilasha baa qaybsan jiray dhaxalka, waxaana dhici jirtay in gabdho badan markay waxba ka waayeen dhaxalkii meheradna aanay aqoon ay ka leexdeen hilinkii wanaagsanaa.

Sheeko caan ah ayaa jirta oo ku saabsan inan uu dhalay nin qaaddi ku ahaan jiray sharciga xoolihii aabbaheed ka tagayna ay qaadatay qabiiladiisii, kolkaasay Jabuuti u dhooftay oo ay noqotay hablaha balweeya ee caanka ah, waxaana la oran jiray «Faaduma Bint Qaaddi». Culimada diintu kamay hadal markaas caddaalad darradaas iyo xaqdarradaa lagula dhaqmayey haweenayda.

Waxay nala noqotay annaga inaan markaa toosino arrintaas iyadoo aan cidna la dhibayn iyo iyadoo ay jirto inaan la dhaqan gelin xukunno badan oo ku yaalla diinta sida in la gooyo gacanta tuugga, dhagaxna lagu dilo qofka sinaysta, markaasaanu go'nay in loo sinnaado dhaxalka. Tirarka Islaamka ee aasaasiga ah iyo shuruuddisa shanta ah ee la yaqaano cidi ma fara gelin wixii ka soo harayna muslimiintu dadaal bay ka muujin karaan iyagoo u siman, inay asiibaan ama gafaanna way dhici kartaa.

Arrintu si kastaba ha ahaatee soo bax xeerkii waxaanan ku iri arartiisa markii qaraarkaasi yimid waxa dunida ka taagnaa mashaakil fara badan oo xagga ijtimaaciga ah sida: addoonsiga iyo hablaha oo nolosha lagu aaso. Islaamkuna isagoo ahaa diin kacaan rumaysan sinnaanta iyo caddaaladda ayuu si degdeg oo kacaannimo ah dhibaatooyinka qaar u xalilay iyadoo la isticmaalayo xoog, kuwa kalena si tartiib ah ayaa loo xaliyey oo ku xiran heerka garashada iyo horumarka, annaguna waxaannu keennay dawo iyo xal aad u horreeya Islaamka gudihiisa oo ku saabsan xuquuqda qoyska iyo haweenka.

Ma jirin cid noola doodday si qaanuun ah oo noo sheegtay in qodobbada Xeerku aanay waafaqsanayn Islaamka, waxaase dhacday in maalin Jimce ah, khudbadaha Masaajidada dad ka tumeen durbaan haliseed iyo buuq dagaal.

**Xoraynta Mujtamacu waa inuu ka bilaabmaa xoraynta Haweenka.**

Mid ka mid ah ayaa ka kacay Masaajidka ugu weyn oo ku dhawaaqay: «Madaxweyne Siyaad aqoon uma laha aqoon-

ta Diinta Islaamka, Quraankana muu akhriyin halkaana waxaan ka caddeynayaa inuu yahay gaal dhiiggiisu banaan yahay». Iimuu qaadan ruux dadaalaya oo ku gafay dadaalkiisii, waxaase uu igu tilmaamay gaal dhiiggiisu bannaan yahay.

Qaarkoodna waxay sheegeen inaan ku dhawaaqay in 50% aayadaha quraanka la nasakhay oo aanay jirin, dabeedna waxay abaabuleen bannaanbaxyo ay u soo baxeen dad muslimiin ihi oo ku dhawaaqayey «Gaalnimada iyo gaaladu ha dhaceen». Kaddibna waxa dhacday in la kiciyey hay'adaha iyo ururrada ciidammadana la dhex galay... Kolka waxa muuqata arrintu inaanay ku saabsanayn Xeerka Qoyska ee loo jeeday Kacaanka iyo nidaamkiisa... waanu qabqabanay kuligood waanay qirteen dambiyadoodii, kuwa ka mid ihi mushahar bay ka qaadan jireen dawlado shisheeye ah, kuwa kalana waxay ahaayeen dabadhilifyo xarfaan ah.

Dadkii waxaa waday Maxkamad baa la soo joojiyey waana la laayey, iyagoo aan ahayn culimaa'udiin ee ahaa kuwa ka soo hor jeeda Kacaanka.

Waxaanu ka xumaanay in walaalahayga Carbeed maqleen hadalladii kuwii beenta abuurayey oo aanay gunda u degin runtu siday tahay inkastoo aanu weydiisanay inay yimaaddaan oo ay indhahooda ku arkaan, hase yeeshee waxay maqlayaan kuwa Carabta kala dilaaya doonayana inay weligood ku daba xirnaadaan kuna jiraan dibudhac, sidaas ayey ku bilaabmatay dicaayadda lagu hayo Soomaalida Carbeed ee muslimiinta ah.

### Tusaalooyinkii Madaxweynaha

Waxa lagu dhawaaqay inay tahay badweynta Hindiya meel nabadeed waxaana lama huraan ah inay sidaa ahaato, anaguna waxaanu weyddiisanaynaa dawladaha waaweyn inaanay ka samaysan saldhigyo nooc ay yihiinba, lana baabi'iyo saldhigyada hadda jira.

Khudbaddii Jaalle Siyaad ka jeediyey furitaankii shirkii 11aad ee Madaxda Afrikaanka laguna qabtay Magaalada Muqdisho 12kii Juun 1974kii.



## WARGEYSKA " AL-QABAS „

**Soomaaliya waa dal dabeecad wanaagsan, Ugaandh badan maxaa yeelay waa mamnuuc in la laayo**

Soomaaliya waa dal hodan ku ah xoolaha nool iyo ugaarta, xooluhuna waa laf dhabarta dhaqaalihiisa, ugaadha lafteedu waxay noqon doontaa mustaqbalka hodantinimo dhaqaale oo mihiim ah waxa jooga dhulkaas kumanyaal maroodi, libaaxyo, shabeello, garuuno, daayeerro, geri salamadhle, gorayo iyo jaadad fara badan oo shimbiro ah.

Inkastoo ugaartaasi ay Soomaaliya joogto asal ahaan, hase yeeshee waxay ka soo guurtay hadda kaymaha Itoobiya iyo Kiinya halkaasoo lagu ugaarsanayo. Waxaanay soo magan gashay kaymaha Soomaaliya oo ay reeban tahay in la laayo, halkaasoo nabadgalyo ay ku nooshahay oo ay ku tarmayso. Sidaa darteed ayaadan la yaabayn markaad dhex maraysо beeraha Muuska iyo dhulka kale ee u dhexeeya Kismaayo iyo Jamaame haddii aad aragtid boqollaal daayeer oo daaqaya, iyadoon cidina waxyeellayn maxaa yeelay iyagaba cidi waxyeeli mayso. Waxa agtaada aan kaba cararayn gorayada, geriga, dameer dibadeedka iyo ugaadh kale oo fara badan, waanay kuu soo dhawaanaysaa.

Marka aad isha la sii raacdaba waxad arkaysaa hirar doog ah, beero ubax biyaha, togga, cadceed saafi ah iyo shuux. Dabeecaddu way u roonaatay Soomaaliya.

Saddex todobaad ayaanu joognay Soomaaliya maskaxdayadana waxa ka baxay sheekooyinkii aanu dugsiyada ka baran jirnay oo ku saabsanaa dhulkaas, inkastoo muddadaasi gaabnayd, hase yeeshee waxay naga saartay mugdigii aanu kaga jirnay dhulka Soomaaliya, «Geeska Afrika».

Soomaaliya waxa loo aqoon jiray geeska Afrika, maxaa yeelay waxay ku taallaa woqooyiga Afrikada bari oo ah meel istiraatijiya ah. Woqooyiga waxaa ka xiga badda cas iyo gacanka Cadmeed, barina Badweynta Hindiya, galbeedna Soomaaliyada Itoobiya haysato, koonfurna Kiinya.

1800 ayuu qaybiyey gumaysigu dalka Soomaaliya iyadoo ay u shuraakowday gumaysiga Ingiriiska, Talyaaniga, Faransiiska iyo Xabashidu oo midda garooc qaatay. Shirkii lixaad ee Afrikaanka laguna qabtay magaalada Maansheestar 1945kii ayaa ugu baaqay in dalalka Afrikaanka ah ee la gumaysto inay gacanta ku dhigaan arrimahooda, madaxbanaani ay gaarto Afrika.

1960kii bishii Juun ayaa gobolka woqooyi helay xorriyaddiisii, bishii Luuliyana waxa isku darsamay qaybtaas iyo qaybtii koonfureed oo u Talyaanigu gumaysan jiray oo iyana madaxbannaanaatay.

## Meel ay isugu yimaaddaan dhaqammada adduunka

Sababtoo ah Soomaaliya oo ku taalla meel istiraatiji ah ayaa waxa ku kulma dhaqanada adduunka dhinaca bariga oo u ka kulaalo badweynta Hindiya waxa jira dhaqanka Hindiya iyo ka bariga fog, xagga woqooyina dhaqanka jasiiradda Carabta iyo Eeraan, Koonfur galbeedna waxa ka xiga dhaqankii Masaaridii hore.

Soomaaliya waxay ku dhawdahay jasiirada Carabta waxayna wadaagaan caqiida Islaamka sidaa darteed kuma guulaysan gumaysigu inuu xumeeyo xiriirka ka dhexeeya Soomaaliya iyo dunida Carabta.

Bishii Febraayo 14dii 1974 ayey Soomaaliya noqotay xubintii 20aad ee Jaamacadda Carabta. Dadka Soomaalida tiradooda waxa lgu qiyaasay saddex Malyuun oo rumaysan diinta Islaamka, taasoo macnaheedu yahay in 100% ay muslimiin yihiin.

Afka Carabiga si fiican bay u fahmaan maxaa yeelay Quraanka ayey ka akhriyaan, hase yeeshee aad uguma hadli karaan waxaanay u baahan yihiin muddo dhawr sanadood ah sidii ay aad ugu hadli lahaayeen.

Dhaqaalaha dalka Soomaaliya wuxuu ku tiirsan yahay oo laf dhabar u ah Xoolaha nool iyo Muuska, xeebta Soomaalida dhererkeedu waxa weeye 2500 oo Km oo hodan ka ah xagga kalluunka. Inkastoo ay balaaran tahay hodantinimada Soomaaliya, hase yeeshee waxay u baahan tahay hantigelin run ahaantii waa dalalka soo koraya, haddiise la mufaacaadsado hodatinimadiisa waxay noqon lahayd dawlad hodan ah oo muddo 10 sanadood dhexdood ka haqab tira dalalka Carabta cuntada iyo xoolaha nool.



Geedkii u horreeyey ee Muuska ahaa waxa lagu abuuray dalka Soomaaliya sanadkii 1930kii waxaana keenay Talyaaniga, markii dalkaasi helay gobanimadiisana wuxuu ku ballan qaaday Talyaanigu inuu gato Muuska badankiisa.

## Adduunku wuxuu kaalmaynayaa Horumarinta Soomaaliya

Midowga Soofiyeeti wuxuu dhisay dekadda Berbara 1968kii, Maraykankuna wuxuu sameeyey furdadda Kismaayo ee cusub, dawladda shiinaha dadkuna waxay waddaa jid dhererkiisu yahay 2500 oo Km iskuna xidha Woqooyiga iyo Koonfurta dalka.

Dakadda cusub ee Muqdisho oo la furi doono horraanta sanadka 1977ka waxa ku baxaysa lacag dhan 27 Malyuun oo Doolar, waxaana wax ka bixinaya Bangiga dhismaha dawliga ah iyo Bangiga horumarinta Yurub.

Barnaamijka Iskaa wax u qabso waa mid aad u qiima badan guula lagala kulmay marka la eego mashaariicda horumarinta ee laga hirgeliyey Soomaaliya. Barnaamijka waxa lagu hirgeliyey mashaariic waaweyn oo fara badan oo uu ka mid yahay mashruuca bacaad celinta, kuwa dhaqaale iyo kuwa badan oo la soo koobi karayn. Qof wal oo Soomaaliyeed wuxuu maalintii tabaruc u shaqeeyaa siddeed saacadood.

— Go'aanka qoridda Afka Soomaaligu wuxuu soo baxay 1972kii, asxaabtii berigii hore waddanka xukumi jirtayna way ku fashishay inay go'aan ka gaarto qoraalkiisa.

— Barashada Afka Carabiga khasab ayey ku tahay marxaladaha Waxbarashada oo idil.

— Dhulka Soomaalida wuxuu leeyahay beera qabatin aad u balaaran waxana ka bixi kara waxyaaba kala gadisan.

— Sancada dalka waxa siyaasadeedu tahay isku fillaasho iyo dhismaha dhaqaalaha dalka oo ka dhalanaya alaabta warshadaha oo qaar dibadda loo diro.

— Rugaha dhallinta Kacaanku waa hab cusub oo u soo saaray golaha kacaanku waxana weeye agoonta iyo dhallinta suuqa daadsan oo lagu ururiyo guryo si fiican u dhisan, nolol wanaagsan loogu habeeyey, laguna baro tacliinta guud iyo ta farsamadaba.

— Xabsiyada waa laga badalay habkii hore waxaana lagu toosiyaa dadka danbiyada gala, halkaasoo la geeyo dhul kayn iyo beero leh oo qurux badan oo ay ka shaqeeyaan beerahaas mushaharna la siiyo, farsamana ka bartaan marka ay ka baxaanna waxa lasiiyaa shaqooyinka ay doonayaan.

— Shaqadu waa joogto iyadoo ay u siman yihiin ragga iyo dumarku, markay dhamaystaanna waxay tagaan meel ay ku nastaan, waa dad shaqa badan Soomaalidu, jecelna maaweelo iyo waxyaabaha lagu nasto.

— Caadooyinka Soomaalida waxa ugu wanaagsan iyagoo ah dad deggan oo an xaruuri ahayn, sida dadyowga kale ee dhulka kulul, waa deeqsiyiin sida Carabta kale, naftiisana u han weyn oo ka door bidaya gaajada inuu ruux gacanta hoos dhigo.

— Caadooyinka ugu xun ee xagga bulshada waxa weeye cunidda qaadka oo maal badani kaga baxayo, waqti lumis ah oo nolosha qoyskana halis gelinaya.

**Jabhadda Xoraynta N.F.D. Waxa qoray Cabdilqaadir Cawil Ku jira Jabhadda loona yaqaan «Xaaji Soodaani»**

Maxaad ka taqaannaa qaybta Soomaaliyeed ee la boobay (NFD)?. Maxaad ka taqaanaa dhaqdhaqaaqa gobanimadoonka aannu kula dagaalamayno gumaysiga?

Dadka Soomaaliya wuxuu ku soo duulay gumeysigu dabayaaqadii qarnigii 19aad waxanu googooyey ummaddaas isku midka ah (NFD) markaas waxay ahayd dhulkii qaybta ku raacay gumaysiga Ingiriiska.

Markii shacbiga Soomaaliyeed uu halgan dagaal ku qaaday gumaysigaa Ingiriiska ayaa afti laga qaaday, dadka reer (NFD) 1962kii ilaalana waxa ahaa guddi ka kooban Nayjeeriya iyo Kanada. Gabagabadiina waxay ahayd in 87 % dadkii ka qayb galay aftidaas ay doorteen inay ku biiraan dalkooda hooyo ee Soomaaliya. Hase yeeshee Ingiriisku sida ay tahay caadada gumeysigu wuu iska dhaga tiray aftidaas waxay ku dhammaatay (NFD) wuxuu ku daray dalka Kiinya. Dadka shacbiga Soomaaliyeed ee NFD umay hoggaansamin middaas waanay ka dhiidhiyeen waxaanay u halgamayaan sidii ay u xoroobi lahaayeen una raaci lahaayeen dalkooda hooyo.

Jabhadda xoraynta (NFD) waxay u dagaalamaysaa arrintaas, waxayna weyddiisanaysaa dadyowga oo idil iyo dhaqdhaqaaqyada caalamiga ah in la taageero halganka dadka Soomaaliyeed ee reer NFD.

Jabhadda xoraynta (NFD) ee Soomaaliyeed waxay taageeraysaa halganka xaqa ah ee dadka reera Falastiin ay ku soo dhacsanayaan xaqooda la boobay waxa kaloy taageeraysaa halganka dhaqdhaqaaqyada Afrika, Aasiya, iyo Laatiin Ameerika. Gumaysigu nooc kastuu yahay Yurub ha u noqdo, Afrikana ha ka noqdo ama Eeshiya, waa gumeysi waana lama huraan in la tumaa.

**Sidii ay wax uga dhaceen (NFD)**

1890kii:- Jarmalku wuxuu ka kacay (WIITO) iyo xeebta ku dhagsan ilaa iyo Kismaayo, waxay ka hadhay dhulka woqooyiga (Taana) ay doonaysay Ingiriiskuna wuxuu ka hadhay (HILIGOOLAANDO) oo Jarmalku qaatay.

1898 — 1891:- Shirkadda Ingiriiska ee Afrikada bari waxay xil iska saartay (Jubba Laand) oo idil heshiisna waxay la saxiixatay Soomaalida deggan dhulka loo yaqaanno (NFD).

1895:- Dhibaatooyinkii xagga maamulka iyo siyaasadda ee lagala kulmay dadka Soomaaliyeed waxay ku khasabtay shirkaddaa inay ka noqoto xuquuqdii (Jubba Laand) ay ku lahayd.

1895:- Xukuumaddii Ingiriiska ayaa maamushay (Jabba

Laand). Waxaanay ku dhawaaqday inay hoos imanayso mandiiqadaas.

1895: — 1912:- Maamulka isticmaarka Ingiriiska duulimaadyo ayuu ku sameeyey Soomaalidii deganayd Gobolka Jubba Laanda, si ay u soo gacan geliso.

1891kii:- Xukuumadaha Ingiriiska iyo Talyaaniga oo kala saxiixday Burutakool ku saabsan siday u qaybsanayaan xukunka dhulka u dhexeeya webiga Jubba iyo webiga buluugga ah.

1896.- Dawladda Ingiriisku heshiis ilaalineed ayey la gashay mandiqadda Ogaadeeniya.

1897kii:- Itoobiya iyo Ingiriiska oo kala saxiixday heshiis ku saabsan soohdinta woqooyi ee bariga Afrika

1904kii Waxa u muuqday Seer TASHAARLAS ALIYOOT oo ahaa xaakinkii ugu horreeyey Afrika geesteeda bari haddii laysu ururin lahaa gobollada Soomaaliyeed oo xukuumad laga dhigi lahaa aad bay u fiicnaan lahayd, maxaa yeelay way ka gaddisan yihiin xagga asalka, arrimahooda dhaqaalaha iyo dabeecadda meelaha kale, nasiib darrase tiradoodu ma badna taasoo dhalisay inaan maamul gooniya loo samayn, dalalka kale ee Soomaaliyeed oo ay dhinaca isku hayaanna ma gumaysato dawladda Ingiriisku.

1905tii:- Heshiis dhex maray dawladaha Ingiriiska iyo Talyaaniga oo uu Ingiriisku Xeebta Banaadir kaga gaday Talyaaniga 144.000 oo liire.

1910kii Waxa laga dhisay gobolka woqooyi (NFD) dhulkii loo yiqiinay (Taana Laandada Waqooyi). Waxaana la xoojiyey xukunka Ingiriiska ee gobolkaa iyadoo la qaaday tallaabooyin ka soo horjeeda.

B. Iyadoo la joojiyey weeraradii isdaba joogga ahaa ee Askarta Xabashida.

T. Iyadoo xad loo yeelay qabaa'ilkii Soomaalida ee daganaa dhulkaas inay u gudbaan dhinaca galbeed.

1912kii:- Dawladda Ingiriisku waxay qabsatay Wajeer iyo bartamaha dhulka (NFD) ee Soomaaliyeed.

1914:- Waxa lagu dhawaaqay soohdin maamul rasmi ah oo kala qaybisa Jubba Laand iyo Mandiqadda xuduudka woqooyiga (NFD).

1915kii:- Ingiriiska oo ku ballan qaaday in si qarsoodi ah dhulka Jubba Laand u siiyo Talyaaniga.

1916 — 1917kii:- Ingiriisku wuxuu ka baxay Wajeer iyo dhulka Woqooyi Galbeed, sababtoo ah Soomaalidii oon degganayn oo guurguurta.

1919kii:- Dawladda Ingiriisku waxay qabsatay Wajeer iyo Mooyaale.

1924kii.- Dawladda Ingiriisku waxay magaalada Landhan kula saxiixatay Talyaaniga heshiis ay u dhaaftay Talyaaniga dhul lagu qadaray 33.000 oo mayl oo isku soo wareeg ah kana tirsan carada Laand.

1926kii:- Xuduudda dawladda Kiinya ee cusub waxay dhalisay in dib loogu noqdo soohdinta ku saabsan carrooyinka Tanalaan, mandaqada xuduudka Waqooyi in lagu daro Tarkaana iyo Saamyoora mandiqadaas iyo maamul buuxa oo dhukaas iyadoo loo bixiyey gobolka Woqooyi. Dhulkuu ku fadhiyaana ay tahay 100.000 Mayl oo isku soo wareeg ah.

1934kii: Gobolka waxa loo dejiyey qaanuun gaar ah waxaana go'doon laga geliyey inuu xiriir la sameeyo adduunka dibadda, xataa bartamaha labaad ee Kiinyana ku dhahoo....

Qaanuunku wuxuu koobayaa xoriyadda socodka qof kasta oo soo galaya ama ka baxaya gobolkaas.

1955kii:- Shacbiga deggan mandiqaddaa xuduudka waqooyi way diideen inay ka qayb galaan golahii tashriiciga ee kiinya, haddii aan qof wakiil ka noqon mandiqaddaas.

1960kii:- Waxa la fasaxay dhaqdhaqaaq siyaasadda ee mandiqadaas.

1960kii:- Soomaalida ku nool mandiqaddaasi waxay sameeyeen... «Xisbiga Dadka ee Horusocodka ah» ee dhulka Woqooyiga. Ujeedadiisuna ay ahayd inay Soomaali ku bii-

raan oo ka go'aan Kiinya.

Febraayo 1962kii:- Waxa bilawday shirkii Distoorka Kiinya oo dib loogu baarayey distoorka dalkaas, waxaana ka qayb galay wafdi ka kooban saddex madaxda axsaabta siyaasiga ee ka go'aysa Kiinya. Dawladda Ingiriisku waxay ku dhawaaqday in la bixinayo guddi qaadda afti dadweyne inta aanu fulin distoorka Kiinya.

1962kii:-Asxaabta siyaasiga ah ee mandiqadaa xuduudka woqooyiga waxay guddiga u direen Arji wada jir ah ooy ku weyddiisteen:-

1. Inay ka go'aan Kiinya
2. In loo sameeyo baarlamaan.
3. Inay helaan Madaxbanaani, kuna darsamaan Soomaaliya.

Diisamber 1962kii:- Guddigii (NFD) ayaa soo saartay warbixinteedii waxaanay ku sheegtay in dadka caradaas ku nooli ay doonayaan inay ka goostaan Kiiniya ooy ku biiraan Soomaaliya, boqolkiiba todoba iyo siddeetan (87%) ayaa caynkaa u cadeeyey.

1962kii:- Guddiga soohdimaha gobollada Kiinya wuxuu ku taliyey in la qaybiyo mandiqada xuduudka woqooyi oo laga dhigo gobol gooni ah iyadoon dhan ka ahayn kala go'a.

Janaayo 1963kii:- Xukuumadda Soomaalida ayaa arji u dirtay dawladda Ingiriiska oo ay kutalinayso in laysugu yimaado shir lagaga wada hadlo sidii mandiqadaasi u soo go'i lahayd inta aanay dhammaan bishaasi.

Jannaayo 1963:- Dawladda Soomaaliyeed waxay ka dacwootay in beddalaadda soohdinta (NFD) ay ka soo horjeeddo ballantii shirkii distooriga ahaa ee ku saabsanaa inaan waxba laga beddelin inta guddigu ka keenayo warbixin.

Febraayo 1963:- Xukuumadda Ingiriisku waxay u caddeysay Soomaaliya inay kala tashanayso (NFD) arrinteeda, intaanu soo bixin distoorka madaxbannaanida dawladda Kiinya.



Maarso 1963:- Wasiirka mustacmaraadka ee Ingiriisku wuxuu sheegay in (NFD) ay noqonayso gobol toddobaad oo raacsan Kiiniya.

14kii Maarso 1963kii:- Soomaaliya xiriirkii diblomaasiga waxay u goysay Ingiriiska.

Juulay 1963kii: Madaxdii Gobolka NFD waxay u duuleen magaalada Ladhan si ay u arkaan Wasiirka gumeysiga oo loo soo saaro go'aan ku saabsan dhulkooda taasoo la sheegay in loo yeelayo intaanay Kiinya xoroobin.

Agoosto 1963kii:- Wafdigii Ingiriiska ahaa ee shirka Rooma oo wakiillo Kiiniya ah ka tirsanaayeen in xannaano gaar ahaaneed la siiyo dadka deggan gobolka Woqooyi bari, xukuumadda Kiinyana way oggolaanaysaa in ay dawladda Soomaaliyeed la socoto Soomaali kastoo deggan Kiinya arrintiisa, hase yeeshee waa la diiday hindise wafdiga Soomaaliyeed lahaa in la dhiso maamul Soomaaliya iyo Kiiniya wadaagaan ama raacsan Ummadaha Midoobey.

Oktoobaa 1963kii:- Wuxuu ku ballanqaaday Kinyaata inaanu waxba ka baddalaynin xeer goboleedka Kiiniyada madaxa bannaan.

Diisembar 1963kii:- Kiiniya waxay ku soo rogtay xaalad degdeg ah mandiqada NFD.

Febraayo 1964kii: Wuxuu codsaday golaha wariirrada (CMA) in wada hadallo dhexmaraan labada dhinac.

Oktoobar 1964kii: Mashruucii lagu beddeli lahaa distoorka Kiinya oo jeeniga ku dhuftay kii u dejisnaa gobollada Kiinya ka dhigay dal Xisbi qudhi xukumo.

Noofembar 1964kii: Farriin uu u diray Ra'iisal Wasaaradda Soomaaliya Kinyaata uu ku taliyey shir lagaga wada hadlo dhibaatada ka taagan dhulkaa.

Abriil 1965kii: Farriin ashtako ay Soomaalidu dirtay oo ku saabsan dadka Soomaaliyeed ee lagu laynayo laguna xirxirayo (NFD). Aan laga soo jawaabin.

# " BAYRUUT AL-MASAA,,

**Kaalay ila eeg dalka bilicda, quruxda san**

.....Waxaan u dhawaaday daaqadda dayuuradda si aan uga bogto kaymaha iyo dhulka quruxda badan ee dayuuraddu muddo dul maraysay, hase yeeshee ma dhicin taasi, duuliyuhuna wuxuu noo sheegay inaanu dul marayno kobaha Kismaayo, run ahaantii waxay ahayd meel qurux badan oo aad ii jiidatay, kaddib waxan eegay Xoghayaha dawladda xagga Dalxiiska, Jaamac Rabiile oo nala fadhiyey oo yiri isagoo qoslaaya «Waxa ka muuqda wajigaaga inaad aad ula dhacday waxyaalaha indhahaagu arkayaan dadkii kaa soo horreeyeyna sidaas oo kale ayey ahaayeen».

Laga yaabaa maskaxdaada inay ku jirto in kaymahaa balladhani ay yihiin meel Dalxiis iyo dabeecad qurux badan.... kolkaasaan iri waxabad akhrisanaysaa waxa uurkayga ku wareegaya.... wuxuu iigu jawaabay dhulka guudka aad ka arkaysid ha degdegin, waxaad aad ula dhici doontaa markaad is dhex taagto oo aad daawato ugaadha faraha badan ee ku nool ee kala geddisan.

Intaas wuxuu raaciyey in dayuuraddu in yar kaddib fariisan doonto uuna jecel yahay in sheeko ku saabsan dalxiiska ay dhex marto marka uu ku noqdo xafiiskiisa.... waxyaalahaa quruxda badan uu arkayaana waxay ka mid yihiin waxyaala fara badan oo ku habboon dalkiiska.

Markii aan soo daawaday meelaha dalxiiska ee taariikhiga ah, xeebaha iyo kaymaha ayaan kula kulmay xafiiskiisa magaalada Muqdiho, kolkaasuu i weydiiyey maxaad soo aragtay... Jawaabtaydu waxay noqotay... waxan soo arkay meel naddii la ila arko ay u dalxiis iman lahaayeen boqollaal ruux oo Carabta iyo dibadda ka socda.... waxaana jirta meela badan oo ku habboon dalxiis haddii laga shaqeeyo.

Jaalle Rabiile wuxuu yiri... Run ahaantii waa la halmaansanaa dalxiiska intii Kacaanka ka horreysay, hase yeeshee waa lagu dadaalay intii kacaanku curtayba, waana jirtaa in dalalka lacag adagi ka soo gasho dalxiiska, kacaanku Wakaalad ayuu u dhisay horumarinta dalxiiska, waxaanay dejisay qorshe wax lagaga qabanayo oo gaaban... Ta hore ilaa 1970-kii... Ta labaadna 1971-1973kii. Waxyaala badan ayaa qabsoomay oy ka mid yihiin Jubba dhismahiisa oo 15 milyan ku baxeen... Huteello kale iyo tuulooyin dalxiisna waa la sameeyey.



Waxaad kaloo tilmaantay inay jiraan meelo u baahan lacag iyo dadaal oo ku habboon dalxiiska... Run ahaantii inta awooddayadu annagu waa dadaallay, hase yeeshee waxaa meesha ku jirta hadday walaalaha Carbeed ee hodanka ahi ka soo qayb gali lahaayeen hantigelinta dalxiiska oo aad loogu soo dhoweyn lahaa dalkayaga. Wuxuu aad uga hadlay waxyaalaha dalxiiska ee dalka ku badan: kaymaha, ugaarta, shimbiraha, dabeecadda wanaagsan iyo wixii la mid ah.

Waxa uu caddeeyey in wax laga qabtay hagaajinta jidadka, meelaha laga ugaarsado qudheeda oo la habeeyo, in laga ilaaliyo dabar goynta, waxa kaloo uu ka hadlay Jaamac Rabiile in badda qudheeda dalxiis loo tegi karo, ha noqoto xagga dabbaasha, kalluumaysiga, iyadoo xeebta Soomaalidu aad u dheer tahay.

**Shirkadda Soomaaliya & Liibiya ee Horumarinta Beeraha**

Iskaashiga Carabta iyo Soomaaliya waxa ugu horreeyey Shirkaddaas Horumarinta Beeraha oo ka dhaxeysa Soomaaliya iyo Liibiya oo hawsheedu tahay hagaajinta iyo beeridda dhulka, lacagteeduna waxay ka dhexeysaa labada dal ee walaalaha ah, waxa kaloo iyana jirta Shirkad Gaadiidka Badda ah oo labadaa dal ka dhaxaysa.

Shirkadda hore waxa la abuuray 1974kii, lacagta lagu asaasayna waa 100 Malyuun oo shilin, waxaanay beertaa 4000 oo Hegtaar, oo u qaybsan sida soo socota:

30,100 hektaar waxa laga waraabiyaa biyaha webiga shabeelle halkaasoo ay matoorro xoog lihi uga soo qaadaan biyaha. Shirkadda iyo shaqaaluhuba aad bay ugu dadaaleen sidii loo hirgelin lahaa mashruucaas, waxyaabaha lagu beeray ee waaweyn waxaa ka mid ah Cudbiga, Bariiska iyo Lawska.

900 oo hektaar waxa loogu tala galay laba mashruuc oo qiima leh... ka hore waxa loogu tala galay toban kun (10.000-20.000) oo neef. Ka labaadna xannaanada digaagga, soo saaridda hilibka iyo ukunta. Marxaladda hore waxa lagu samayn doonaa 10.000 oo digaag ah. Marxaladda labaadna 30.000. Shirkaddu markaa 25.000 oo beed ah ayey maalin walba soo saari doontaa.

Intii uu joogay wakiilka ama weriyaha Wargeysku dalka Soomaaliya booqday Shirkaddaas, waxaanu la kulmay madaxda shirkadda oo u sheegay in ujeeddooyinka shirkaddu ay tahay in la ballaadhiyo dhulka la beerayo oo 1000 hektaar lagu dari doono Muuska, 3000 oo hektaarna tijaabooyin wanaagsan lagu sameeyey. Waxa uu waraystay weyiruhu faa'iidada ay shirkadu u leedahay labada dal. Wuxuuna sheegay in laga samayn doono ama laga soo saari doono cudbiga, lawska iyo gabbaldayaha, sisinta, bariiska, taasoo labada dalba faa'iido u leh.

**Soomaaliya way u jilib dhigaysaa dhibaato kasta**

Dadka Soomaaliyeed ee geesiyiinta ahi u habran maayaan dhibaato kasta oo ka hor timaadda, kacaankooduna wuxuu baray in dhib kasta lagaga hor tago geesinnimo, kalsooñina lagaga gudbo... Aniguna waxan ku soo arkay indhahayga sidii ay qosol ugu dhaafeen oo ugaga gudbeen dhibaatadii abaaraha mana jiraan wax is hor taagi karayaa.

Waxa ii caddaatay in kalsoonida uu u qabo kacaankiisa ay tahay asaaska geesinimadiisa iyo sida uu uga hor tegaayo dhibaatooyinka oo idil, taas ayaa u asal ah inaanay saamaynin dhibaatooyinkii faraha badnaa ee u soo maray carruurtiisii waxyeellaysay, xoolihiisii, lafahiisii, dhaqaalihiisii iyo wixii hantidiisa ahaa, wuxuu ku kalsoon yahay inuu aayihiisa dambe meelaysan yahay, sababtoo ah Kacaanka Hantiwadaagga ah ee dalkiisa ka talinaaya, kaasoo markiiba ugu tala galay meelo lagu xannaaneeyo isaga iyo carruurtiisa iyo dadkii ku tabaaloobay.

Kacaanka Soomaaliyeed muu dareensiin dadkiisa in ay dawladda dhibaato ku hayaan iyo culays ee waxay tustay in waxa loo qabanayo ay yihiin waajib, kacaankuna isaga u dhashay, shakina kuma jiro in xiriirka wanaagsan ee kacaanka iyo dadweynihiisii abaaroobay uu ka muuqanaayo sidii dadweynaha ku jira xeryuhu ugu soo qamaameen Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, Jaalle Siyaad markii uu booqashada ku marayey meelahaas, halkaas oy ku soo dhoweeyeen sacab, mashxarad iyo qalbi furan, carruurtuna ay tirinayeen heeso waddani ah oo ammaanaya guulaha Kacaanka... Haddii anan goob joog ahaynna maan rumeysteen arrimihii halkaa ka dhacay.

Waxa igula la yaab badnayd xerada gargaarka Eyl markii ay ka codsadeen Jaalle Siyaad dhallintii halkaa joogtay ay kuwooda xoogga lihi badda galaan si ay kalluun u soo qabtaan, iyagoo ahaa dad raacato ah oo aan aqoon hawlahaas. Madaxweynuhu wuxuu amar ku siiyey mas'uuliyiintii xerada gargaarka in degdeg loogu suura geliyo dhallintaas si ay uga manaafacaadsadaan badda... Iyadoo Soomaaliya ka hodana kalluunka.

Xeryaha kalana dadku sidaasay diyaar ugu yihiin in ay waxbartaan. Rag iyo dumarba waxay heegan u yihiin in ay ilaawaan dhaawicii gaaray ay gacanna ku siiyaan dawladda sidii ay mustaqbalkooda u dhisi lahaayeen.

Waxa ay muujiyeen dadkaasi inay noqdaan kuwa wax soo saara, si ay isugu fillaadaan. Madaxweynaha Golaha Sare markiiba wuxuu la shiray Xildhibaannadii Golaha Kacaanka iyo Xoghayayaasha ee la socday, waxaanay ku heshiiyeen in dadkaasi hawlo la siiyo.

Iyadoo la tixgelinayo qof waliba waxa uu jecel yahay ama waayo arag ku yahay, guddi ayaa la bixiyey u soo qaybisay dadka sida soo socota:

1. Iskaashatooyin u qaybsan kulluumeyiga iyo sayladayntiisa.
2. Iskaashatooyinka samaynta waxyaalaha dalka gudihiisa laga soo saaro.
3. Iskaashatooyin bixinta jidadka iyo samayntooda.

...Si dhakhso ah ayey ugu dhaqaaqeen fulintii hawlahoo-la, hase yeeshee waxa soo baxday mushkiladda dadka da'da ah, kuwa buka iyo carruurta sidii la oran lahaa. Hase yeeshee waxa lagu daayey in iyaga hawla caynkaasa loo dirin.

Wadajirka dadweynaha iyo dawladda kacaanka Soomaaliyeed ayey ku dhaafeen dhibaato kasta oo ka hor imanaysa.

**Isku fillaanshaha dhaqaalaha Carbeed...**
**Soomaaliya ayaa ku rumayn karta Milyaard Doolaar oo Carabtu siiyaan.**

Dhaqaalaha Soomaaliya wuxuu marayaa marxalad taariikhi ah oo halis ah. Iyada oo kacaanka Soomaaliyeed ka xoreeyey intii ka dambaysay 1969kii gumeysigii daldalanayey khayraadkiisa iyo dibusocodkii ku xiray 9kii sano uu dalka siyaasad xorriyadda haystay, hase yeeshee maanta wuxuu marayaa heer aanu fulin karin barnaamijka horumarinta. Sababtu waxa weeye isagoon hayn hantidii ku fillayd fulinta mashruucyadaas.

Soomaaliya way garanaysaa halka uu yaallo xalliga runta ah ee arrintaas, hase yeeshee dhinaca kale weli lama wadaagin middaas. Siyaasadda dhaqaalaha ee dalka Soomaaliya waxay ku dhisan tahay iskabka dhaqaale ee Soomaalida iyo dalalka Carabta. Run ahaantii hodantinimada dabiiciga ah ee Soomaaliya ayaa lagaga bixi karaa dhibaatada dhaqaalaha Carabta ay ugu weyn tahay cunna yaridu.

Nasiib darrose khayraadkaas lagama faa'iidaysanayo, sababtoo ah sidii loogu heli lahaa hanti, taasoo ay Soomaaliya u aragto inay Carabtu xallin karto. Laba maalmood ka hor Shirkii Madaxda Carabta ee dambe ayuu Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, Jaalle Siyaad uu la shiray qorayaasha Carabta qaarkood, waxaanu yiri «In muddo ahba xiriir ayaannu la lahayn dalalka Carabta ee lacagta haysta, nasiib darrose dhigta Bankiyada shisheeyaha oo ugu isticmaala lacagtaa sidii Carabta loogu dili lahaa. Ujeeddadayadu waxay ahayd in aan ka dhaadhicinno in lacagtaa la geliyo dalka Soomaalida taasoo labada qolaba ka faa'iidaysanayaan ama lana amaahiyo aanna soo celinno iyada iyo macaashkeedaba.»

«Xiriir joogto ah ayaanu la leennahay hawlwadeennada sanduuqyada horumadinta Carabta iyo Islaamka, nasiib darrose way na warwareejiyeen. Inkastoo taasi jirto haddana ma dafirsanin in Soomaaliya kaalmo ka hesho dalalka Carabta qaarkood.»

Shaki kuma jiro in dalalka Carbeed iyo Soomaaliya ay isu aahan yihiin, Soomaaliyana ay ka haqab tiri karto cuntada iyo waxyaalaha ka soo baxa xoolaha nool. Wasiirka Maaliyadda Soomaaliyana wuxuu leeyahay haddii dalalka Carbeed milyaard Doolaar Soomaaliya siin lahaayeen si habboon ayaa loo fulin lahaa qorshaha horumarinta dalka, muddo gaabanna waxa dalalka Carabta aanu ka haqab tiri lahayn waxyaalaha ay cunta iyo xoolaha uga baahan yihiin. Mustaqbalka Sonkorta qudheedu dalka Soomaaliya aad buu u wanaagsan yahay Degmada Jilibna waxa laga beeri karaa 24.000 oo hektar oo lacag yar ku baxdo... intaasi wuxuu ku daray in inkasta oo xukuumaddu samaynayso laba warshadood oo hilibka qasacadeeya iyadoo laba horana jireen, hase yeeshee masaaniicda noocaas ah dalku wuu qaadi karaa, waxana lagaga bixi karaa dhibaatada ka haysata Carabta hilibka, sidii loo dhisi lahaana waxay ku xiran tahay dalalka Carabtu in ay gacan ka geystaan.

Inkastoo ay jiraan ururro iyo dalal Carbeed oo kaalmo aan ka hello, haddana uma dhiganto hal ku dhegga ah iskab dhaqaale oo dhex mara dalalka Carabta.

Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu aad ugu dadaalay sidii wax looga qaban lahaa dhibaatooyinka ka taagan dhinaca dhaqaalaha, lagana tiro magacii xumaa ee gumeysigu ka faafiyey kacaanka hortiis.

**Tallaabaa lagu dhaqaaqay markaas ku saabsan qorshaha horumarinta dhaqaalaha iyadoo la tixgelinayo arrimaha hoos ku soo socda:**

1. **In si buuxda looga faa'iideysto wax soo saaridda iyo khadamaadka laguna dadaalo horumarin joogto ah.**

2. **In la abuuro shuruud suura gelisa in dadka caddaalad xumo loogu qaybin wixii ka soo baxaya dalka, taasoo**

markii hore ku dhici jirey jeebka daba dhilifka iyo danaystayaasha.

3. In aan xukunka iyo talada meel qura laysugu keenin ee horumarinta dhaqaaluhu ku baahdo gobollada iyo degmooyinka.

4. Iyadoo laga dhuxul qaadanayo qawaaniinta Hantiwadaagga ayaa la xoreeyey qalabkii wax soo saaridda, laga dhigayna kuwa u adeega danaha dadweynaha. Dadweynahaasoo hadda ka qayb galay go'aannada ku lug leh hantigelinta, wax soo saaridda, shaqo siinta iyo qaybinta dakhliga.

5. In la ururiyo aadna looga faa'iideysto awoodda dalka oo ay ku jirto shaqadu, sidaa darteed ayuu noqday Iskaa wax u qabso, hub lagu dadajin karo horumarinta dalka lagana kaaftoomi karo sugidda kaalmo dibadeed, iyo in la abuuro Iskaashatooyin sida loogu baahan yahay, kuwaasoo laga abuuray beeraha, xoolaha, kalluumaysiga iyo meelaha kale ee dhaqaalaha laga kabayo.

7. Kororsiimo joogto ah oo ku saabsan miisaaniyadda guud ee dalka, taasoo suura gelinaysa hirgelinta barnaamijyada loogu tala galay kana xoraynaysa dawladda khasnadeeda gacan ku hayn shisheeye.

1969kii lacagta miisaaniyadda dawladda soo galaysay kamay badnayn 272 malyuun oo shilin, hase yeeshee aad ayey u korodhay oo waxay noqotay 1974kii 729 malyuun oo shilin, isla sannadkaa dawladdu waxay kharaj garaysay malyuun shilin, taasi waxay dhalisay in la kabo miisaaniyaddii dawladda dhibaatadii ka taagnayd oo 1970kii ka hor dibadda laga buuxin jirey. Hase yeeshee albaabkaasi hadda waa awdmay. Asalka guud ahaaneed ee ay ka duulayso siyaasadda dhaqaalaha Soomaaliyeed waa kaa. Run ahaantii haddii aan sidaa la yeelin kacaanka barakaysani khayraadka dalka gacanta kumuu dhigi kareen si loogaga faa'iideysto horumarinta dhaqaalaha waddaniga ah, kaddibna dadweynaha ballaaran loogu adeego.... waana ballaaran tahay hodantinimada Soomaaliya.

Xoolaha noolina waa lafdhabarta dhaqaalaha Soomaaliyeed 70% ayaa ku nool, lacagta adagna dalka waxay soo



geliyaan 65%. Hase yeeshee qidaaca khaaska ah ayaa maamulkiisa gacanta ku haya, ka caamka ahina wuxuu ku dadaalaa sidii siyaasadda dhaqaalaha dalka ay ugu adeegi lahayd. Mar haddii arrimaha dhaqaalaha laga hadlayo waxa lagama maarmaan ah inaan wax ka taataabanno meel ka mid ah halbawlaha dhaqaalaha, kuwaasoo ah bangiyada.

Kacaanka hortiis, bangiyada shisheeyaha ayaa iska maamulan jirey maaliyada dalka iyagoon cidna cabsi ka qabin. Dalka waxaa markaa ka furnaa laba Bangi oo ay dawladda Talyaanigu lahayd. Bangi di Rooma iyo Bangi di Naaboli, mid Ingiriisku leeyahay oo ah National aand Girindilis iyo Bangi Masaaridu leedahay oo Boor Saciid la oran jirey.

Bangiyada Talyaaniga iyo Ingiriisku si aan loo adkaysan karin ayey gacanta ugu dhigeen lacagta dalka oo ay u cuna qabatayn jireen si xun. Ilaa laga gaaray 1970kii oo kacaanku ku xiray meelaha qiimaha leh ee dalka oo dhan oy Bangiyadu ugu horreeyeen qawaaniinta Hantiwadaagga Cilmiga ah. Ka dib markii xukuumada kacaanku ay baartay buugaggii waxaa caddaatay in bangiyadii Talyaaniga iyo Ingiriisku ay u samaysnaayeen si aan toosnayn, maxaa yeelay waxa ay ku adeegan jireen lacagta dadka Soomaaliyeed dhigtaan oo ay siin jireen ganacsato yar si ay ugu xoojiyaan xiriirka ganacsi ee ay la leeyihiin dalka Talyaaniga, weliba waxa caddaatay inaanay waxbaba isla hayn oy kicitaan ku jireen.

1970kii muddadaa ku siman Soomaaliya waxay ka fara xalatay bangiyadaa shisheeyaha oo muddo 40 sano ah ka shaqaysanayey dalka, waxa la dhisay 1930kii.

Dalka Soomaaliya hadda waxa jira laba bangi, ka ganacsiga Soomaaliyeed iyo Kaydinta iyo Amaahda Soomaaliyeed iyagaana wada hawlaha bangiyada ee dalka, laamana waxay ku leeyihiin magaalooyinka. Waxa jira iyaguna Bangiga Waddaniga ah ee Soomaaliyeed oo ah Bangiga Dhexe iyo Bangiga Horumarinta ee Soomaaliyeed oo bixiya amaahda muddada fog iyo muddada gaaban.

Bangiyada Soomaaliyeed sida meelaha kale ee dhaqaalaha Soomaalida waxay ku tala jiraan inay iskaashadaan Bangiyada Carabta, si ay u soo dhigaan lacagta adag ey u baahan yahay.

Kalmadda ugu dambeysay waxay tahay: Soomaaliya oo kacaankiisu xoojiyey dhaqaalihiisa gudaha una babac dhigay dhibaatooyinkii abaaraha oo aad wax u yeelleeyey xoolaha nool oo ah halbawlaha dhaqaalaha dalka waxay u baahan tahay kaalmada Carabta, muddadan dambana dalalka Carabta way la socdaan arrintaas kaddib markii la abuuray Shirkadda Carabta iyo Soomaalida dalal kaloo Carbeedna ay sheegeen inay mashaariic wadajir ah la samaynayaan Soomaaliya.

# "IQRA" WARGEYS SACUUDI AH

## DALKAYAGA KA HARIMAYNO

**Dood. . . Waxa isku soo dubbariday Maxamed Cabdi Sataar**

Qaaradda Afrika muddadan dambe waxa ka dhashay dhaqdhaqaaqyo gobannimo doon oo la dagaallamaya gumeysiga, taasoo xoojineysa halganka Carabtu kula jirto gumeysiga iyo sahyuuniyadda. Taasi waxay aad u caddaatay markii dalalka Afrikaanka badankoodu u gooyeen xiriirkii siyaasadeed dawladda sahyuuniyadda. Kaddib markii Carabtu ka guuleysteen Israa'iil, isla markaas dawlad ka mid ah dalalkaas (Soomaaliya) ayaa ku soo biirtay Jaamacadda Carabta.

Waxay ka qayb galaysaa kulannada iyo shirarka iyadoo ciyaaraysa kaalin aad u muuqata oo dabada ku haysa taariikhda iyo diinta oo ay isbarbar taageyso halganka Carabta, waxna ka dhisaysa midnimada dalalkaas. Sidaa darteed ayey Soomaaliya tahay dalalka Carabta Islaamka iyo kuwa dunida aanu xiriirka la yeelanay, si aan u xaqiijinna laba arrimood oo waaweyn.

1. **Inaanu si buuxda** u ogaano waxa madaxdaasi ka qabaan arrimaha Carabta, kuwa Islaamka iyo waayaha adduunka ka taagan.

2. Inaanu ka bixinno hawsha Jornaaliisimada gudaha oo aanu la socodsiinno akhristayaashayada waxa dunida ka dhacaya.



**Madaxweynaha GSK Jaalle Maxamed Siyaad Barre oo doodi dhex marayso Qore Maxamed Cabdi Sataar**

**Xiriirka Soomaaliya iyo waddamada Carabta waa mid taariikhi ah oo qoto dheer.**

— Marka hore waxaan jeclahay Madaxweyne inaan kuugu hambalyeeyo inkastay dambeyso biiritaankiina Jaamacadda Carabta, waxaanan ku weydiinayaa, faa'iidooyinka ay Soomaalidu ka helayso go'aankaas iyo doorka ay ka cayaarayso?.

— Waad ku mahadsan tahay hambalyadaas, run ahaantii biiritaanka Soomaaliya ee Jaamacadda Carabta waa tallaabo lagu saxayey wax taariikhi ah oo jiray. Haddii aynu daba gallo siyaasadda debedda ee Soomaaliya markii ay madaxbannaanaatay, ilaa ay xubin ka noqotay Jaamacadda Carabta waxaynu arkaynaa in ay siyaasaddaasi la socoay ta dalalka Carabta ee guud ahaaneed ee Jaamacaddu dejinayso, taasina waxay ku tusinays inuu jiray dareen ku saabsan midnimada iya isku xirnaanta Soomaalida iyo dunida Carabta.

Biiritaankuna waxa weeyaan tallaabo lagu habaynayo xiriirka u dhexeeya dalalka Carabta ee xagga dhaqanka, siyaasadda, dhaqaalaha iyo istiraatijiyadda oo salka ku haya taariikh dheer iyo in la isku dubbarido awoodooda si looga hor tago waayaha casriga aynu ku noolahay.

Laguma qiyaasi karo biiritaankayaga Jaamacadda Carabta wax ku lug leh faa'iido iyo wax waa, tallaabadaasi waxay ka tarjumeysaa waxyaabaha uu dareensan yahay shacbiga Soomaaliyeed, rumeysan yahayna. Waana u diyaar inay gudato waxyaalaha uu ku waajibinayo xiriirka qowmiga ihi, isagoon u aabe yeelayn ruux iyo maal toona, sida dalka Carbeedba ay ugu heegan yihiin ha kuba kala geddisnaadeene qadiyadda Carbeed ee 1aad oo ah ta Falastiin.

Kaalinta aad taabatay ma jiro door aannu baaraynaa waxaanu kula dhaqmaynaa dalalka Carabta oo idil gudaha Jaamacadda iyo dibadeedaba si dimuqraadiyad ah oo uu ku jiro kalgacayl iyo isu sama fal, si walaaltinimo ahna waxaanu ugala tashanaynaa danaha aan wadaagno. Doodda daacad

da ah iyo aaraada kala geddisan ayuu ku dhashaa go'aankuna.

. . Sidaa darteed ama sidaas aan soo tilmaamay ayey Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya u gudanaysaa waajibaadkeeda mustaqbalka arrinta ku saabsan is bahaysiga Carabta sidaanu horaba u samayn jirnay

## TAAGEERADA JABHADDA SHARCIGA AH

Dagaalkii ka taagnaa dalka Angoola wuu adkaaday waxa soo fara geliyey dalal aan Afrikaan ahayn Maraykanka Ruushka, Kuuba iyo Koonfur Afrika.

Angoolana waxay ku dhowdahay inay noqoto Fiyatnaamta cusub ee Afrika, maxay ka qabtaa Soomaaliya waxyaalaha ka socónaya Angoola?.

Sideebaasu u arkaa Madaxweynaha Soomaalidu in Angoola uga bixi karto dagaalka aan cidna wax u tarayn?

— Mushkiladda Angoola waxay ku soo kooban tahay, waxa jirta xarakad wadani ah oo loo yaqaanno dhaqdhaqaaqa dadka ee xoreynta Angoola oo la soo dagaallantay gumeysiga Bortuqiiska ilaa ay ku sandulaysay inuu ka baxo Angoola gobannimadeeda qaadato, waxaanu matalayaa shacbiga reer Angoola.

Mushkiladdu haddaba waxay tahay midabtakoorka Koonfur Afrika oo soo fara geliyey arrintaa kuna tumanaaya qarannimada dawlad Afrikaan ah oo madax banaan. Arrintu waa gardarro cad oo uu ku kacay midabtakoorkaas Afrikaanka ku kadeedaya Koonfurta Qaaradda haystana dalka Afrikaanka ee Naamiibiya. Waxa kaloo dhibaatadu tahay gumeysiga dibad ka imaadka ee ka taagan Roodiisiya, Koonfur Afrika iyo Naamiibiya. Siyaasaddaas oo markii hore Boortuqiiska laftiisu taageeri jiray.

Mawqifka Soomaaliya waxa weeye taageerada madaxbannaanida iyo qarannimada Angoola oo uu hoggaaminayo dhaqdhqaaqa dadka ee xoreynta Angoola, in la joojiya dagaalka, in laga daadgureeyo ciidammada Koonfur Afrika iyo dadka calooshood u shaqalstayaasha ah dalkaa Afrikaanka ah.



Jamhuuriyadda Angoola ee dadkana xubin bay ka tahay Ururka Midowga Afrika markii ay aqoonsadeen 24 dal sida uu qorayo xeerka Ururkaasi.

## U XAQLISKA GAASHAAN BUURTA REER BARIGA MAXAY TAHAY?

— Mudane Madaxweyne, waa maxay sababta Ruushku ugu dhawaanayo Afrikaanka goormaasu bilaabmay?

— Waxa lama huraan ah inaan tilmaamo in dalalka Afrikaanku la leeyihiin Midowga Soofiyeeti xiriir diblomaasi iyo **mid dhaqaaleed, inkastoo heerarkoodu kala geddisan yihiin.** Xiriirkaasna laguma tilmaami karo xikaayad. Maxaa yeelay wax isweydaarsiga dawladaha iyo heerkiisa wuxuu ku xiran yahay xeerarka qaanuunka dawliga ah oo laysla aqoonsan yahay.

Waxaana jira go'aan ka soo baxay Ururka Midowga Afrika oo ugu baaqaya dalalka Hantiwadaagga ah iyo kuwa siyaasadoodu dhexdhexaadka tahay inay taageeraan gobanni madoonka Afrikaanka, mar haddii dalalkaasi taageerayaan xoogagga ka soo hor jeeda gumeysiga midabtakoorka iyo sahyuuniyadda, waa wax caadi ah in la kaashado waxa ku saabsan arrintaas, ha loo soo mariyo kaalmadaas Ummadaha Midoobay ama si toos ah.

Dalalka Afrikaankuna iyagoo xubna ka ah Ururka (UMA) waa kuwa xor ah gobannimadoodana ku gaaray halgan dagaal, Afrikaanka weli ku jira gacanta gumeysigana toobiyahaas ayuu hayaa.

Sidaa darteed ayey dawladaha Afrikaanka ah ee xorta ah wax ula qabsanayaan dawlad kasta ama gaashaan buur kasta iyagoo qaran ah. Kolka ma oran karo dalalka Afrikaanka oo dhami xiriir wanaagsan bay la leeyihiin Midowga Soofiyeeti, mana jiraan wax dhibaato ah oo ka dhalan karta haddii dawladaha Afrikaanka qaarkood xiriir la yeeshaan Midowga Soofiyeeti.

## DHIBAATOOYINKA HOR TAAGAN MIDNIMADA AFRIKA.

— Is-afgaran waaga ka dhex taagan Madaxda Afrikaanka ah qaarkood miyaanu wax yeelaynayn midnimada Afrika iyo halgankeeda, Soomaaliduse maxay ka qabtaa, mudane Madaxweyne?.

1 Run haantii is-afgaran waagaasi wuu saamaynayaa midnimada Afrika mawqifkayaguna waxa weeye in lays afgarto oo la tirtiro waxa dhalinaya kala firirka, si ay Afrika uga baxdo gumeysiga iyo midabtakoorka.

## LA DAGAALANKA GUMEYSIGA

— Mudane Madaxweyne, ma garan karnaa kaalinta Soomaaliya ay ku leedahay guddiga gaashaan dhigga ee Ururka Midawga Afrika, kaalinta dalalka Carabta ee kalase maxay tahay?.

— Kaalinta Soomaaliya sida dalalka Carabta Afrikaanka ah iyo Afrikada kale ee guddiga gaashaandhigga (UMA). Waxa weeye inay ka qayb gasho intii kartideed ah inay ka qayb gasho sidii loo dabar goyn lahaa gumeysiga iyo midabtakoorka ka taagan Afrika, iyadoo la raacayo habka u yaallay Ururkaas (UMA).

— Warar laysla dhex marayo waxay leeyihiin inay Soomaaliya aad ugu dhawaanayso reer bariga arrintaa wax ma ka oranaysaa?.

— Xiriirka Soomaaliya iyo dawladaha Hantiwadaagga ah wuxuu ku dhisan yahay mabda'a tixgelinta qarannimada wadaniga ah inaan la fara gelin arrimaha gudaha ee dal kale iyo inuu u adeego danaha labada geesoodba.

... Waxaan jeclahay inaan sheego inaanu xiriir wanaagsan la leennahay dalal badan oo dunida ah dawladahaasina sida kuwa Hantiwadaagga ayey tixgeliyaan qarannimadayada iyo sharaftayada iyadoo la raacayo qaanuunka iyo hababka dawliga ah ee dalalka adduunku ku wada dhaqan yihiin. Annakana sida uu qorayo distuurkayagu waanu nabad gelinaynaa ciddii na nabad gelisa waanuna la coloobaynaa ciddii nala



colowda, mana oggolin gacan ku qabasho addoonnimo ha muuqato hase dahsoonaatee.

## ITOOBIYA WAXAY NAGA HAYSATAA DHUL

— Waxa muuqata mudane Madaxweyne, inuu daacdaacayo xiriirka idiin dhexeeya idinka iyo xukunka cusub ee ka dawladda Itoobiya, intii la riday Xayle Salaase, waa maxay asbaabta dhalisay welina jirta ee xumaynaysa xiriirkiinna?.

— Dhibaatada xiriirka annaga iyo Itoobiya waxa weeye Itoobiya oo haysata qayb ka mid ah dalka Soomaalida, kaasoo ay qabsatay markii la qaybsanayey Afrika, taageero iyo dhiirigelinna ka heshay gumeystayaasha, una diyaar ahayn hadda inay garawsato waqtiga lagu nool yahay, xeerka Ummadaha Midoobay, iyo xaqa uu dadku u leeyahay inuu ka taliyo aayahiisa. Taa weeye sababta xiisadaha ka taagan xiriirka labada dal.

In badan baannu isku daynay inaanu abuurro jawi suura geliya is-afgarad dhex mara Soomaalida iyo Xabashida waanuna wadi doonnaa, maxaa yeelay waxaanu rumeysan nahay in lagu dhameeyo isafgarad la'aanta dawladaha dhex maraya wada hadallo iyo jid dhallin kara in lagu dhameeyo nabadgelyo ku dhisan cadaalad iyo xaq.

Waxaanu rumaysan nahay jid nabadeed maxaa yeelay ma jeclin inuu xumaado xiriir laba dawladood oo Afrikaan ah.... Sidaanan u jeclayn inay is afgaran waayaan laba dawladood oo Carbeed. Annagoo ka duulayna mabda'aas ayaanu rumaysannahay in dhibaatadaa lagu dhammayn karo si nabad galyo ah, xukunka cusub ee Itoobiya waxaanu ka rajaynaynaa inuu fahmo middaas uu gacan nagu siiyo sidii jid sharciya dhibaatadaa loogu dhamayn lahaa.

## XIRIIRKA CARABTA IYO AFRIKA

— Muxuu ka qabaa Madaxweyn Siyaad xiriirka Carabta iyo Afrikaanka sideebaase la tahay in loo xoojin karo?

— Wuu xoogoobayaa xiriirka u dhexeeya Carabta iyo Afrikaanku, waxaana ku tusinaya taas isgarabsiga joogtada

ah ee u dhexeeya labada dhinac fagaarooyinka dawliga ah. ... Maxay kula tahay kaalmooyinkii dalalka Carabta ee Batroolka ay siiyeen dalalka Afrika, ee waxyeelladu ka soo gaar tay qiimaha Batroolka ee kor u kacay, sideebaase kororsiimadaas u saamaysay Afrika?.

— Kaalmooyinkii Carabtu siisay Afrika way yaraayeen dhibaatooyinka dhaqaalaha ee dalalka Afrikaanku waxay ka dhasheen Batroolka qiimihiisa oo kor u kacay inta badan, qaarkoodna waxay ka dhasheen dhibaatada dhaqaalaha dunida iyo qiimaha alaabta warshadaha oo cirka isku shareeray, xiriirka dhaqaalaha dunida ee aan isu dheelli tirayn iyo dhibaatooyinka ay dabeecaddu keenayso.

Waxaan qabaa inay dalalka Carabtu kordhiyaan kaalmada iyo amaahda muddada dheer ee ay siinayaan Afrikaanka iyadoo la tixgelinayo isgarbsiga labada dhinac iyo danaha dhaqaale.

— Waxa jira Urur ilaalinaya danaha dadyowga ay ka kooban yihiin sida saylladda Yurub oo kale miyaanay kula ahayn Madaxweyne inay la gudboon tahay Carabta iyo Afrikaanka inay samaystaan sayladdaas oo kale, dhinaca nabadgelyadana iska kaalmaystaan, haddii weerar dibadda kaga yimaaddo?

— Haa.... oo waxa la gudboon Carabta iyo Afrikaanka inay ku daydaan Ururrada dawliga ah ee xagga dhaqaalaha iyo siyaasadda ay samaystaan dalalka hore u maray si ay u ilaashadaan danahood gaarka ah.

Shir ay isugu yimaadaan Madaxda Carabta iyo Afrikaankuna waxtar bay u leedahay arrintaasi, Afrika waa la soo addoonsaday haddana gumaysi ayey kaga jirtaa dhaqaalaha iyo bulshada, sidaa darteed ayey lama huraan tahay in iskaashigeenna adduunka saddexaad uu noqdo mid xoog leh, waana lama huraan inay iskaashadaan Caraba iyo Afrikaanku.

**Xiriirka wanaagsan ee la doonayo inuu dhexmaro Carabta iyo Afrikaanku**

Waxa jira xoogag liciifinaaya xiriirka Caraba iyo Afri-



ya, sideebay u xoojin karaan dalakaasi xiriirka kobcaya, si ay joogto isu kaashadaan, Israa'iilna go'doon la geliyo, mudane Madaxweyne?.

— Sida ay nala ahay xiriirka Caraba iyo Afrikaanka wuxuu ku dhisan yahay in iskaashiga labadaa dhinac u danaynaya uu yahay mid istraatiiji ah isku danna ah xagga horumarin ta iyo himilooyinka si loo xoojiyo isgarabsigaas waa in la sameeyo xiriir dhaqaale oo iskabaaya si uu u adkaado iskaashigoodu weliba waa inay iska kaashadaan xagga dhaqanka, farsamada iyo warfaafinta oo waxtar u leh iskaashiga guud.

Israa'iil sidaa go'doon loo gelinayo waxay ku xiran tahay xoojinta midnimada Carabta iyadoo la isticmaalayo hubka Carabtu haysato oo idil, lacagta iyo Batroolka.

## IMBIRIYALIYADDA IYO GUMEYSIGA WAA KU LID MIDNIMADAYADA

— Mudane Madaxweyne, Israa'iil waxay isku dayday inay xoojiso xiriirka ay la leedahay Afrikaanka. iyadoo ka kaalmaysa xagga dhaqaalaha iyo Milatariga, si ay isu jeclaysiiso, sannadkii 73kii markii ay muujiyeen dalalka Carabta iyo Afrikaanku in midnimada lagu jebin karo sahyuuniyadda ka taagan halbawlaha Carabata, intee baa laga yaabaa inuu iskaashigaasi taxnaado. si uu ugu deego danaha labada geesood?.

— Run ahaantii isgarabsiga Afrikaanka iyo Carabtu kamuu dhalan dana maadi ah oo Afrikaanku ka helaan walaalahooda Carbeed ee wuxuu ka dhashay Afrikaanka oo ogaaday in Israa'iil wakiil ka tahay dhaqdhaqaaqa sahyuuniyadda gumeysiga ah ay ka mid tahay Koonfur Afrika iyo Roodiisiya. Xiriirkii dhaqaalaha, Tiknoolojiyada iyo Diblomaasiyadda ee u dhexeeyeyna waxa ku khasbay dalalkii gumeysan jiray. Sidaa darteed ayaa xiriirka Israa'iil ay u go'yeen uu ahaa mid dabada ku haya xornimo iyo garasho waxaanu ciriiri gelinayaa gumeysiga, xiriirka aynu la leenahay Afrikana waa inaanu ku dhisnayn wax kala iibsi ee uu yahay mid ka dhalatay danaha isku midka ah.

Waa inaynu ogaano inuu jiro nacab Imbiriyaali ah oo cusub ujeeddadiisuna tahay inuu kala firdhiyo Carabta iyo Afrikaanka si uu u gumeysto.

— Jaalle Madaxweyne, waa maxay kaalinta haweenayda Soomaaliyeed ee nolosha dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshada dalka, iyo ka qayb galka horumarinta wadanka?.

— Haweenayda Soomaaliyeed, sida ninka ayey isugu hawsha dhismaha iyo xoojinta nolosha siyaasadda, dhaqaalaha iyo ijtimaaciga iyadoo la siman yahay. Annaguna aad baanu ugu dadaalay sidii kor loogu qaadi lahaa karaamadooda, wax loo bari lahaa, shaqo loo sin lahaa, uga qayb gali lahayd wax soo saaridda si dalka hore loogu mariyo.

Kaalinta haweenayda Soomaaliyeed waxay ahayd mid aan saluug lahayn tan iyo waqtigii lala dagaalamayey gumaysiga. Waxay la soo halgami jirtay ragga dagaal iyo nabadba, waxaana xusid leh in inantii uu dhalay halyeygii Maxamed Cabdillaahi Xasan ee la dagaalamayey saddexda gumaysi muddo ka badan 20 sano ay soo ridday dayuuraddii Ingirriiska oo duqaynaysay markii ugu horraysay Afrika, taasoy ku soo ridday qalcad Taleex 1922kii, taasina waxa ku tusinaysaa sida ay haweenayda Soomaaliyeed ugu lamaanayd ninka iyadoo u adeegaya diintayada, dalkayaga iyo difaaca xorriyadayada.

— Su'aasha ugu dambaysa mudane Madaxweyne, xiriirka Sucuudiga iyo Soomaaliya iyo sidii loo xoojin lahaa?

— Xiriirka Sucuudiga iyo Soomaalida wuxuu ku dhisan yahay asaas taariikh iyo qowmiba ah oo qoto dheer, waxaana in hor yaalla jid balaaran oo aan iska kaashan karro sidii loo xoojin lahaa iskaashiga Islaamka, wax wada qabsiga qoomiga ah, difaaca diinteenna quman iyo danaheenna.

Waan ka tegay gurigii Madaxweynaha, waana kii u deganaan jiray intii aanu xukunka qaban qolkii uu igu soo dhaweeyna oo wali ka muuqdo, maxaa yeelay wuu jecel yahay inuu Soomaaliya ku arko qof Sucuudi ah, mudadii labada saacadood ee aanu wada sheekaysanaynay umuu hadlaya oo keliya sidii Madaxweyne dawladeed iyo nin siyaasi ah ee wuxuu ahaa hadal uu ku dheehan yahay kalgacayl iyo xiriirka Sucuudiga iyo Soomaaliya oo sii wanaagsanaada.



# WARGEYSKA " INJINIS NAYDAR "

## WARGEYSYADA ISWIDHAN IYO SOOMAALIA

Wuxuu qoray Wargeyska (Ijini-Naaytar) oo ka soo baxa dalkaa Iswidhan aadna loo akhristo, maqaal dheer oo ku saabsan Dalka Soomaaliya. Waxaana lagu nashriyey cadadyadii soo baxay 10-12kii Juun. Waxaana qoray Al-Master Baaseel Daafidson, oo aqoon u leh arrimaha Afrika lana tixgeliyo wuxuu qoro.

### Tajrubada Kacaanka ah.

Xeebta woqooyi bari ayey ku taallaa Soomaaliya, oo dhul balaaran ah xeebteeduna ay dheer tahay. Markaad dul marayso Soomaaliya waxay kuugu muuqanaysaa dhul kala fog daruurteedana biyo ku joogaan. Waa dhul qurux badan dadkeeduna aad u qurux badan yahay tiradoodu waa saddex Malyuun, waa dad isu han weyn Soomaalidu oo jecel xoriyadda waa gabayaal badan yihiin.

### Reer Guuraa:

Soomaaliya waa dal taariikhdiisu dabadheer tahay waana dad ilaaliya hiddahooda, taasoo aad ka garan karto reer guuraagooda oo weli ku nool hiddihii awoowyadood.

Dad yar ayaa ku nool magaalooyinka 5 — 7 % waxay ku nool yihiin dhulka beeraleyda ah ee u dhexeeya labada tog. Magaalooyinkooda Marka, Muqdisho, Baraawe, Saylac waxay ku tusinayaan ilbaxnimadii jiri jirtay iyo ganacsigii wacnaa intii aanu soo bixin Faasko De Gaama.

Dalka Soomaaliya waxa ka socda isbedal ijtimaaci ah oo laxaad leh waxaana la oran karaa kaddib muddo bilo markii aan ku wareegay in isbedalka ka socda aan laga helayn Afrika iyo adduunka saddexaad toona.

Dalkaasi gobanimadiisu wuxuu helay 1960kii isagoo ka kooban qaybtii uu gumaysan jiray Ingiriisku iyo tii Talyaaniga ee Koonfureed, hase yeeshee dadkii xukunka markaa qabtay may ahayn kuwa fulin karaya himiladii ummadda, waxay ahaayeen kuwa danaystayaal ah. inkastoo ay lahaayeen waxa-

nu raacaynaa habka hantigoosadka haddana taa waxba kama jirin.

Doorashadii baarlamankii beenbeenta ee 1968kii, waxa ka qayb galay 70 Xisbi oo ku loolamayey 130 kursi.

Bishii Oktoober 1969kii, ayaa saraakiil horusocod ah oo ka tirsan Ciidanka uu hoggaaminayo Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre ay la wareegeen xukunkii una dhiseen xukuumad isbedal ijtimaaci ah.

**Indheergarato.**

Run ahaantii may garanayn meel ay wax u dhaqaajiyaan, hase yeeshee waxay u diyaar ahaayeen faa'iidaysi. Tallaabadii u horraysay waxay ahayd inay dhallinyaro indheergarata ah u magacaabaan hawlaha xukuumadda iyo qorshaynta. Qaarkood waxay ku soo barteen Midawga Soofiyeeti, Maraykanka iyo Yurubta galbeed.. ta ay isku waafaqsanaayeen waxay ahayd in mar haddii uu habkii hantigoosiga ahaa gaarsiin waayey Soomaaliya wax isbedal ah oo xagga bulshada ah jidka kale ee lama huraanka ihi inuu yahay Hantiwadaagga.

Jaalle Siyaad iyo saaxiibadii waxa ay dhagaysteen nimankii dhallinta ahaa ee indheergaratada ahaa.. in sanooyinkii isticmaarka cusub uu dalka ka jiray ku dhaafay raadkiisii.

Soomaalidu way diideen magacyada Hantiwadaagga ee tirada badan, waxaanay ku dhawaaqeen 1971kii inuu barnaamijkoodu ku dhisnaan doono Hantiwadaagga cilmiga ah. Inkastoo ay dadka qaarkii leeyihiin waxay u xaglinayaan Midowga Sofiyeeti, hase yeeshee taasi ma aha mid dhacaysa. Run ahaantii kaalma badan bay ka heleen Midawga Soofeet intii ka dambaysay 1969kii, hase yeeshee waxay u guntan yihiin inay u halgamaan madaxbanaanidooda.

Si isbedal looga dhaliyo dalka waxay toleeyeen Bangiyadii iyo muasaasaadkii kale ee Hantigoosadka shisheeyuhu haystay.

**Dadweynaha Soomaaliyeed:**

Dadka Soomaaliyeed ma doonayaan dawlad raasamaalid ah, tolaynta lafteeduna waxay u arkaan Soomaalidu inaanay dhalin xukun biruqraadiya oo cusub. Waxanay yiraahdeen..

Lama huraan weeye in la abuuro hab dawlad cusub oo ay maamulkeeda ka qayb galaan dadweynuhu meel kasta ha joogeene. Tajrubadaasi waxay bilaamatay 1970kii guulla waa laga gaaray.

Ololayaashii isdaba joogga ahaa ee dalka laga hirgeliyey, waxay suuragaliyeen in la tirtiro fikradihii dib u socodka ahaa ee jiray dalka waqtigii gumaysiga iyo gumaysiga cusub, laba ujeeddaanay lahaayeen:

1. In dadka laga saaro fikradaha xunxun.
2. Inay ka qayb galaan ololayaashaas dadweynuhu.

Mudadii bisha ahayd ee dalka joogay waxan darsay saddex olole:

1. Kii golayaasha Degmooyinka (Dimuqraadiyeynta xukunka).
2. Ciribtirka aqoondarida.
3. Xoraynta Haweenka.

Waqtigii gumaysiga iyo gumaysiga cusub may jirjirin golayaashaa dadweynuhu, hase yeeshee maanta waxa xukuma miyi iyo magaalaba golayaashaa dadweynaha, haddaba waa la magacaabaa waqti dhawse waa la dooran doonaa.

Markii annu saacado la doodnay xubnaha gudiyadaas, waxa noo caddaatay in waxyaaba fara badan la tixgeliyo.

Magaalada Hargeysa oo ku taallaa gobolka Woqooyiga, waxanu aragnay guddi ka kooban 1200 oo qof oo rag iyo dumarba leh, maamulaya dad tiradoodu dhantahay 80.000 oo qof. Magaalada Kismaayo oo Koonfur ku taalla waxa maamulayey 1200 dadka la maamulayeyna 50.000 waxanu ogaanay inay magaalooyinka waaweyn oo dhami isaga mid yihiin xagga wakiilnimada.

Ololaha labaad wuxuu ahaa kii lagula dagaalamayey jahliga, si dad badan wax loo baro.

Tan iyo 1972kii, wax walba waxa lagu qori jiray afafka Talyaaniga iyo Ingiriisiga, luqada Carbigu waa ta labaad ee

rasmiga ah.

Af Soomaaligu ma qornayn hase yeeshee muddo saddex sano laga jooga ayey rumeeyeen indheergaratada Soomaalid inaan horumar la samayn karayn kacaankuna soconayn haddii aan la qorin afka Soomaaliga oo barashadiisu fududahay.

Hawlwadeenka dawladda muddo saddex bilood ah ayey qaateen tababarka barashada afka Soomaaliga.

1973kii dadweynuhu waxay ka qayb galeen ololihii la dagaalanka jahliga muddo bilo ah.

Baaqi Madaxweynaha ee ahaa (Hadaad taqaan bar....Hadaadan aqoonna baro) wuxuu noqday halkudheg wadni ah, hadana dadka Soomaaliyeed ay da'doodu ka weyntahay 8 sano aad bay u yaqaaniin wax akhriska iyo wax qoridda, xisaabaadkana waaba ka shaqaynayaan.

Kacaanku kagama harrin ololaha inuu wax baro dadka magaaladа oo kaliya ee 1974kii ayaa lagu duulay miyiga, si wax loo baro reer guuraaga iyo beeraleyda. Tallaabadaasi waxay ahayd mid weyn, sababtu waxa weeye reer guuraagu waxa weeye 70% Soomaalida. Dad badan oo miyiga dagani lamay lahayn xiriir dawladda hadda kahor. Dawladihii hore marka ay doonayaan inay cashuurta soo ururisadaan ayuun bay u bixi jireen raacatada, taasoo dhalisay inay ka fiigaan oo ay ka fogaadaan si aan loo soo gaarin.

MACALIMIINTA DUGSIYADA

Dawladda kacaanku umay dirin dadka reer guuraagga cashuur gurayaal iyo shaqaale dawladeed toona ee waxa loo diray macalimiin iyo ardaydooda markii la joojiyey duruusta muddo 8 bilood ah.

Kumanyaal dhallinyaro ah oo rag iyo dumarba leh oo reer miyi ah ayaa la baray wax akhriska iyo wax qoridda, ardayduna iyagoo ka tala qaadanaya macalimiintooda ayey ugu tageen dadkii reer guuraga ahaa meeshii ay deganaayeen. Guutadaasi waxa ay soo noqotay, anigoo jooga dalka Soomaaliya,



waxaanay aad ugu faraxsanaayeen waxyaalaha cusub ee ay soo barteen iyo waajibaadkooda ay soo guteen.

Markii ay u tageen reer miyiga waxay ka dhaadhiciyeen macallimiintu dadkii reer miyiga ahaa, in ardaydu ay yihiin carruurtooda, oo ay kaalmaynayaan.

Dadka reer miyiga ahi way u guuxeen arrintaas waxaanay kexeeyeen macalimiintii yaryarayd, markii danbana iyaga ayey talada ka qaadan jireen ay weyddiin jireen arrimo ku lug leh sida habboon ee aqal galku yahay.

Ujeeddada saddexaad ee Kacaanku waxay ahayd in laga xoreeyo ruuxa dumarka ah addoonsigii lagu hayey. Waxay isku dayeen in la dhaqan geliyo arrintaas, taasoo macnaheedu yahay in laga qayb galiyo dumarka hawlaha dalka oo dhan miyi iyo magaalaba.

Shirarka gaarka ah ee guddiyada haweenka, waxa lagaga wada hadlaa arrimaha danaha caamka ah dhallinyarada, abaabulka iyo kicinta siyaasadeed. Bishii Janaayo ee sannadkan, waxa gaashaanka lagu dhuftay caada horraysay, waxana la qaaday tallaabo labaad markii lagu dhawaaqay in haweenka la siman tahay ninka Gabar ka mid ah guddiga haweenka ee magaalada Hargeysana waxa ay sheegtay in arrintaas loo baahnaa waqti hore hase yeeshee go'aankaasi waa mid waxtar weyn leh.

Soomaalidu waxay doonayaan waxyaala cusub markii ay ogaadeen in hab baarlamaani ah oo taageeraya Hantigoosiga aanu faa'iido u soo sidin, hase yeeshee waxa loo baahan yahay inuu qofku garto muxuu yahay shayga cusubi, waxaanay leeyihiin... Waa isbeddal dimuqraadi ah.

Madaxweyno Siyaad iyo saaxiibadiisuna waxay rumaysan yihiin inuu yahay kaasi jidka keliya ee uu ugu soo hiranayo dadweynuhu, waxana ku waajib ah qof waloo Soomaaliyeed inuu ka qayb galo hawsha loogu jiro midnimada guud si loo gaaro horumar guud.

**Abaartii waxay dib u dhigtay meelo daaq oo lasameyn lahaa.**

Waa maxay asbaabaha abaarta ka kicinaya dalka Soomaalida? ... Waxa muuqata in sababaha u waaweyni ay ka dhalanayaan xagga cimilada iyo isbadalkeeda, taas waxa isku afgaradsan culimada iyo siyaasiyiinta Soomaaliyeed.

Dabeecadda ayaa wax laga saarayaa abaaraha, marka laga saaro tii 1972kii. Roobabkii caadiga ahaa may di'in muddo ku siman 1968kii.

Madaxweynaha oo ka hadlaya arrintaasna wuxuu yiri:- Waxa na haysta abaarro xun oo aan qofna ka sheekayn karin. Waxa jira mashruuc la doonayo in meelo daaqa laga sameeyo, hase yeeshee wax kala tuuray abaaraha.

Mandaqada ogaadeeniya iyadana dhibaato xoog leh ayey gaarsiiyeen abaaruhu halkaasoo 800.000 oo qofi gaaji u liitaan.

Markii abaartaasi ku habsatay dalka xukuumadda Kacaaku markiiba way u guntatay waxaana la sameeyey xeryihii gargaarka oo lagu ururiyey dadkii. waxa loo diray cunto, biyo dawo, gaadiid iyo wixii la mid ah.

Waxa ka marag kacaaya kartida iyo hagar la'aanta hawlihii gargaarka in aanu gaarin ddka dhintay xataa bishii Febraayo oo ay ugu xumayd abaartu 3000 oo ruux.

Arrinta kale ee layaabka lihi waxay ahayd taasoo ku tusinaysa hufnida hawlaha gargaarka, xeryaha gargaarka oo anekaynba meel la'isugu keenay dad quus ku jira oo abaari laysay, ee waxay ahaayeen meel uu isugu yimid dad ruuxiisa macnawiga ah sarrayso oo niyad weyn u haya nolosha iyo mustaqbalka isagoo ku jira duruuf adag.

Waxaan ku arkay meesha (Dabeera) oo ahayd meel dad xoog leh laysugu keenay oo ay ku yiilleen tobanaan fasalada waxbarashada, ay isugu imanayeen ardaydu si ay ugu bartaan duruusta, xataa meelaha banaanada ah.



Waxad oranaysaa gargaarkaa, mudada gaaban ihi maaha mid wax ku filan, lama huraan waxa ah in la bedalo dad fara badan oo racato ah oo loo suura geliyo in laga kexeeyo noloshii hore oo ladejiyo meelaha u dhexeeya labada webi ee Jubba iyo Shabeelle marka cirku da'o.

5— 7 % ayaa dadka Soomaalida ku nool beeraha, hase yeeshee waxa suurowda in tiradaas afar jibaarkeed ama shan jibaarkeed ay ku noolaadaan beeraha labada tog hareeraheeda, maxaa yeelay waxa jira dhul balaaran oo beera qabatin ah.

Wuxuu yiri nin taariikhda ku xeel dheeri «Waxaannu ku ab tirsannaa reer guuraa, hase yeeshee lama huraan ayey tahay in dad badan la dejiyo webiyada hareerahooda iyo xeebaha». Waa u hawl galaynaa arrintaas, waana suuroobi karaysaa, hase yeeshee waxan isla markaas u baahanyahay kaalmo.

Madaxweynuhuna wuxuu yiri: «Abaartaa nagu habsatay daraadeed ayaanu u baahanahay kaalmo lixaad leh, waxaana lama huraan ah in kaalmadaa qaar ka mid ihi ay noqoto Dhakhtaarro iyo dawooyin... Abaartu waxay waxyeelaysay Caafimaadkii dadka reer miyiga, waxaanay Soomaaliya u baahan tahay cunno.

Muddo saddex sano horteed ah markii roobabku da'een xukuumaddu waxay bilawday inay ku fuliso barnaamijka Iskaa wax u qabso dhinaca beeraha waana laga baxay cuntadii dibedda laga soo gadanayey, waxana la filayey in dibadda loo dhoofiyo, waxase la galay waqti kale oo abaareed. Wixii la hayey degdeg baa loo cunay.

Raadiyaha layska arko ee dalka Iswidhan wuxuu sii daayey bishii Juun 13dii 1973kii, barnaamij uu soo qabtay Al-Master Buweyd-Minhom... Cinwaankiisu yahay «Dadyohow iska dhaafa wahsiga oo u shaqaysta dalkiinna» Barnaamijkana waxa laga soo qabtay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Maxamed Siyaad Barre Madaxweynaha Soomaalida, waa shakhsiyad an caadi ahayn, waa Janaraal kacaan yahan ah oo Askari ah oo an arrimaha u eegin si caadi ah, umuu adeegin

dabaqadii xukunka haysatay, reerkooduna wuxuu ahaa reeguuraa, waxaanu noqday sarkaal, maxaa yeelay markaas waxay ahayd jidka kaliya ee taclliinta lagu gaari karo.

Kama fogaan, manuu khiyaamayn asalkiisa iyo dabaqaddiisa.

Ma noqon doontaa Soomaaliya dal sabool ah oo doonaya inuu horumar sameeyo. Soomaaliya waxay ku taal geeska Afrika, xaruntееduna waa Muqdisho, waa magaalo gabawday dhismaheedu Carabi yahay.

Carabtu waxay soo galeen dalka Soomaaliya kumanyaal sano ka hor, waxay ka baayacmushtarayn jireen xeebta Soomaaliya ayagaana soo galiyey dalka Islaamka waqtigii Hijrada. Islaamku waa diinta dadka, mana ah oo keliya diin ee waa ilbaxnimo iyo dhaqan ku abuuraysay dadka rumaysan inay la dagaalamaan wixii soo duula, iyo gumaystayaasha.

Taasi waxa weeyaan arrin weyn oo ka muuqatay taariikhda Soomaaliya waqtigii xukunka gumaysiga. Gumaysigu wuxuu aad u qabsaday dalka 1888kii, Ingiriisku wuxuu qabsaday gobalka woqooyiga kama aanu dhisin Dugsiyo iyo isgaarsiin, Talyaaniguna wuxuu qobsaday qoybtii Koonfureed, waxa kaloo ay gumaysan jireen Eriteriya, waxaanay ku duuli jireen dalka Xabashida oo Itoobiya la baxday 1930kii.

Waxa ay xorowday Soomaaliya 1960kii, hase yeeshee madaxbanaanidaasi may dhalin isbeddel wanaagsan ah waxa faafay musuqmaasuq iyo laaluush qaadasho.

1969kii ayaa Milatarigu qabsaday xukunka dalka, waxaanay abuureen kacaan dhab ah iyadoo uu u horseedayo Maxamed Siyaad Barre kacaankaas.

Dalkaas ay qabsadeen ciidamada qalab sida, wuxuu ahaa ka ugu saboolsan Afrika, saddex daloolow dalool dadku waa xoolo dhaqato, xoolaha noolina waa lafdhabarta dhaqaalaha dalka, waana meesha dhakhso loogu hormarin karo, hase yeeshee waa in marka hor dhawr arrimood wax laga qabtaa.



Bukaanka Xoolaha, biya yarida, aqoon darida.

Sanado yar ka hor ayaa dadku waxna akhriyi jirin waxan qori jirin.

Dad badan oo raacato ahaa, ayaa gartay faa'iidada ku jirta inay dagaan oo ay ka shaqeeyaan beeraha iyo daaqa. Xukuumaduna waxay ku dadaalaysaa dhiiri gelintooda iyo dhaqan gelinta himiladaas, shakina kuma jiro inay hagaagi doonto cunna qaybintu oo xukuumaddu si fudu ula xiriiri doonto dadweynaha, fidin doonto hanuuninta xagga siyaasadda, caafimaadka iyo waxbarashada.

Xukuumaddu waxa ay qaadday talaabo ku saabsan la dagaalanka jahliga oo ay ka qayb galeen ardayda iyo macalimiintu, sidii dadweynaha miyiga loo bari lahaa wax qorista iyo wax akhriska.

Ardayda iyo Macalimiinta tiradoodu waxay ahayd 15.000. Ardaydu waxay kala qayb gali jireen dadka reer guuraaga hawlahooda, markii ugu horraysay baanay dhex galeen bulshada weyn oo ay barteen sida ay u noolyihiin dadkaasi.

Waxan la kulmay nin da'diisu tahay 104 sano, waxaanu ka mid ahaa guddi loo magacaabay inay soo dejiso abwaanka Afka Soomaaliga.

Guulaha waaweyn ee kacaanka waxa ka mid ah dhaqan gelinta af Soomaaliga, afafkii rasmiga ahaa ee xafiisyada lagaga shaqayn jirayna waxay ahaayeen Ingiriisi iyo Talyaani, wuxuu kacaanku go'aan ku gaaray in lug Carabigu noqoto luqo rasmi ah.

Tacliinta sare waxay ka bilaabmatay dalka Soomaaliya kadib markii kacaanku dhashay waxa la dhisay kuliyaadka Sharciga, Cuuluunta, Daawada, Tababarada macalimiinta, Saayniska. Ardayda kuliyadda dawada waxa loo diri jiray dibadda, hase yeeshee taasi ma jirto hadda.

**Caafimaadka.**

Olole la mid ah kaa la dagaalanka jahliga ayaa lagu qaaday sidii loola dagaalami lahaa cudurada, loona daryeeli lahaa Caafimaadka dadka kun nool miyiga.

Dhakhtarada iyo Kalkaaliyayaashuba waxay u baxeen dhulalka fog si ay dadka buka u soo daweeyaan, waxa kaloo casharro ka siiyaan sidii ay uga hortagi lahaayeen cudurada una ilaalin lahaayeen nadaafadda, waxaynay dadka ka talaalaan cudurada oo idil.

Wuxuu igu yiri nin raacata ahi: «Haddii uu bukoodo sa-ci xagga ilaahay baa looga yimid», kacaanku markuu dalka ka curtayayaa laga dhaadhiciyey dadka reer guuraaga qiimaha dadka xoolaha daweeya oo isla markaana baraya sida habboon ee loo xannaaneeyo Xoolaha.

Waa la toleeyey Warshadaha iyo Bangiyada oo idil Soomaaliduna iyagaa samaysa qalabka dayac tirka si aanay dibadda uga soo iibsan.

Waxa iska caadi ah in Kacaanka Soomaaliyeed sida kacaamada dunida oo kale uu leeyahay cadaw gudaha iyo dibadda ah, waxa la abuuray ciidamo «Guulwade» loo yaqaan, muhimadiisuna waxa weeye inuu difaaco kacaanka Hantiwadaagga ah la dagaalamo musuqmaasuqa, laaluushka, qabyaaladda. Meeshii waloo hawli kaga soo gudboonaatana hor bay ka galayaan, waana dad lagu dayanaayo.

## MAANTA IYO BERRI

Iskaa wax u qabso waxa weeyaan, mabaadiida waaweyn ee kacaanka Soomaaliyeed, waxay tahay in la rumeeyo laguna kalsoonaado awoodda gaarka ah ee dalka iyo ta bani'aadanka Soomaaliyeed, si loo dhiso waddan, waxaana lagu dhameeyey iskaa wax u qabso mashaariic fara badan oo laga hirgeliyey Jamhuuriyadda Gobolladeeda iyo Degmooyinkeeda.

Muddo sanado laga joogo ayaa cadawga kacaanku ay dab ku qabteen hudheel weyn oo ku yiillay magaalada, hase yeeshee shaqaalaha ayaa ku dhisay hudheelkii Iskaa wax u qabso, waqtiyada ay soo dhamaystaan shaqadooda qaranka. Isaga ayaa ugu horeeyey wax barnaamijkaa lagu qabto kadibna mashaariic fara badan ayaa lagu dhisay.

Iskaa wax u qabso qiimihiisu kuma dhisna dhinaca dha-



qaalaha oo qura, ee waxa uu ku dhalinayaa dadka isku kalsooni, gaar ahaan kuwii gumaysigu ka dilay niyadda.

Dhibaato ayaa lagala kulmi jiray kacaanka ka hor lo'da magaalada jooga oo go'yn jirtay waddooyinka nadaafadana xumayn jirtay. Hase yeeshee waxa loo dhisay hadda meelo ku habboon oo leh beero iyo meelo lagu liso.

Magaalada Muqdisho way balaaranaysaa, dadkuna waa u soo shaqo doonanayaa dhibaatana waxay kala kulmayaan dadka miyiga ka yimaadda, sidii ay ula qabsan lahaayeen gaar ahaan carruurta. Si taa looga gaashaanta waxa la sameeyey xarumaha dhallinta kacaanka oo lagu ururiyo, boqolaal dhalinyartaas ka mid ah.

### Hanuuninta dadka Xabsiyada ku jira

Waxa lagu ururiyaa dadka danbiyada gala ee xukun ku dhaco inay ka shaqeeyaan mashaariicda kala geddisan, marka mudadu ka dhamaatana, waxa la siiyaa beero ay fashaan, waxaana loo sameeyey Iskaashato si ay wax ula soo baxaan. Marka uu mudada dhamaysto qofkuna wuxuu noqonayaa xubin ka tirsan Iskaashatada Beeraha.

Iskaashatooyin fara badan ayaa laga abuuray dalka ujeedadeeduna waxa weeye in kor loo soo qaado wax soo saaridda, iyo in isku filaasho laga gaaro waxyaalaha la cuno, da badana shaqo laga siiyo.

Soomaaliya waxay leedahay xeeb dheer oo dherarkeedu yahay 3000 oo Km. Kalluun ayaa ka buuxa xeebtaas, doonyaha kalluumaysiga awooddoodu ma sii ridna hase yeeshee waxa la keenay doonyo ku shaqeeye Matoorro, kaluumaystada waxa loo sameeyey iskaashatooyin. Hase yeeshee waxa jirta mushkulad aan hore looga baxayn taasoo ah Soomaalida oo an jeclayn Kalluunka oo ka horraysiiya hilibka. Waxase jirta in hadda loo samaynayo dicaayad, laaftaad loo dhajinaayo, iyo barnaamijyo idaacadda laga sii daynayo.

Ciyaaraha, Muusikada, Heesaha iyo Masraxiyaduhu kaalin weyn ayey ku leeyihiin kacaanadoo idil. Masraxa wadaniga ah ee ku yaalla magaalada Xamarna waxa lagu dhigaa

Masraxiyado kacaan ah.

Magaalada Hargeysa oo iyana xarunta labaad ah waxa laga dhisayaa Masrax weyn oo lagaga shaqaynayo Iskaa wax u qabso.

Dadyowgii inta badan la soo gumaysanayey waxay u halgamayaan sidii ay u abuuri lahaayeen shakhsiyaddooda, ilbaxnimadooda iyo hiddahooda si ay uga baxaan dhib u dhaca ka haysta xagga fikradda iyo ilbaxnimada oo uu ku reebay gumaysigu.

Ciyaarta iyo heesaha waxa laga yaabaa dadka muslimiinta ah inay salka ugu hayaan arrimo diineed. Shacbiga Soomaaliyeed wuxuu rumaysan yahay diinta Islaamka, xukuumaddu waxay rumaysan tahay inay lama huraan tahay in la dhaqan geliyo Hantiwadaagga iyo axkaamta diinta, waxayna ogsoontahay inaan iska hor imaad jirin ku lug Hantiwadaagga iyo diinta. Quraankuna wuxuu adkaynayaa sinnaanta iyo hawl jacayla, taas oo kale waxa laga rabaa culimaa'u diinku inaanay cidla iska fadhiyin ee ay tusaale u noqdaan dadka kale, kana qayb galaan dhismaha dalka.

Xukuumaddu waxay u qaban qaabisaa socdaallo ay ku maraan gobollada kala duwan ee dalka si ay dadka ugu gudbiyaan waaya aragnimdooda, kuna guubaabiyaan inay shaqeeyaan.

Marka ay dabayluhu ka dhacayaan dalka Soomaaliya, waxa jira meel ay ku urursamaan, kadibna waxay waxyeello u keenaan beeraha iyo dhulka beera qabatinka leh, sidaa darteed ayaa olole lagu qaaday bacaad celin, ciiddaasi waxay aastaa beeraha, biraha korontada. Waxa loogu yeeray xeel dheerayaal Ummadaha Midoobay ka socda, waxayna sheegeen inaan waxba laga qaban karayn,sababtoo ah Soomaaliya oo sabool ah.

Madaxweyne Siyaad, wuxuu ku dhawaaqay in dagaal lagu qaado bacaadkaas, sidaa darteed ayaa boqolaal dadweynaha iyo shaqaalaha ahi uga shaqeeyeen maalmaha Jimcaha ee fasaxa la yahay.



## WARQADDA MUQDISHO

**Waxaa Qoray:- Jamiil Caarif**

Jamiil Caarif wuxuu u duulay dalka (BONT). Dhulkii Ilaahyada; waana magacii ay caan ku noqotay Soomaaliya waqtigii Faraaciinada.

3000 oo Mayl ayuu socdaal ku maray, isagoo indha-indhaynayey meelihii abaaruhu wax yeeleeyeen. Wuxuu daawaday xeryihii gargaarka ee kacaanka Soomaalidu degdegga ugu sameeyey dadkii cayroobay, si loogu xaneeneeyo kumanyaal qof oo dadkaa ka mid ah. Noloshooduna waxay gashay halis, sababtoo ah gaajo iyo harraad marin gaaray, waxa uu indhahiisa ku soo arkay dhibaatadaas qarada weynayd ee cabsida galinays Malyuun ruux oo Carbeed oo ka mid ah dadka Carabta Muslimiinta ee ku nool Soomaali.

Maxay leeyihiin dadkaas salaad kasta iyo saacad kasta Ilaahay gacmaha hoos si uu roob u siiyo?

Xeryaha gargaarka waxa ka buuxsamay dadkii cayroobay, carruurtii uu soo eryey gaajada iyo harraadku, waxa ku dhacay xanuun aan la garanayn oo carruurta laynaya Dhakhtaraduna waxay baarayaan in Ilaahay xanuunka wax mariya ama cudurada bay'ada ama cunto xumida inuu ka dhashay. Anigu waan aqaanaa dalka Soomaaliya ama dalka Boont siday Faraaciinadu oran jirtay, laba jeer oo hore ayaan booqday.

1957kii intii aanay gobannimadooda qaadan iyo 1964kii, kaddib markii ay gobannimada qaadatay Jamhuuriyaddu, kolkaa iima cusba. Waxan xusuus nahay inaan mar weyddiiyey erayga Soo-maal ama Soomaaliya waana lagu kala weecday, waxa jira dad yiraahda wuxuu magacu ka kooban yahay laba eray oo ah Soo waxana laga soo dhanbashay erayaga sac macnihiisuna waxa weeye orod iyo erayga maal oo micnahiisu yahay lis.

Sidaasaa magaca Soomaal tarjamadeedu u tahay socoo soo lis, dadka rayigaa wataa waxay leeyihiin waxa loogu bixiyey magacaa dadka dhulka ku nool oo deeq badan.

Kooox kala waxay leeyihiin erayga soo waxa laga soo dhanbashay erayga «Sa» macnaheeduna waxa weeye neef lo' ah, marka maal lagu darana waxay noqonaysaa soo lis saca. Kooxdaas waxay leeyihiin magaca waxa u bixiyey dalka gumaystayaashii. Ujeedadeeduna waxay ahayd badida dadka oo xoolo raacato ah.

Kooxda saddexaad waxay leeyihiin erayga Soomaal asalkiisu waa Carabi waxana weeye kalmadda la yiraa (Duumaal) macnaheedu waa dadkii xoolaha badan.

Waxa kaloo iyaguna jirta koox kale oo iyagu leh, (Samaa) waxana weeye samayda waranka iyo wal, waxaana weeye macnaheedu ninka waranka dheer, iyadoo la tilmaamayo hubka uu ninka Soomaaliga ahi qaato markuu xoolaha u baxayo.

Waan tegay Soomaaliya anoo jecel inaan la kulmo dadkii aan bartay 1957kii oo xiriir joogto ahi naga dhexeeyey. Waa dad lo' dhaqato ah, laakiin waxay u raacaan sidii Faraaciinadii oo ay Soomaalida is barteen muddo hadda laga joogo 5000 oo sano, markii ay boqoraddii (Xatashbisat) u diri jirtay dalkaa Boont, halkaasoo looga keeni jiray luubaanka la mariyo jirka boqoradooda marka ay dhintaan si aanu u xumaan.

Waxan xusuusnahay in dalku markaa maraayey halgankiisa wadaniga ahaa kii ugu adkaa halkaasuu doonayey inuu iska xayuubiyo maamulkii ku sii suge ahaa ee lagu khasbay dagaalkii dunida ee labaad kaddib.

Waxa jirtay mu'aamarado la doonayey in lagu soo celiyo gumaysigii Ingiriiska iyo Talyaaniga. Halkaas waxa lagu dilay Kamaalu diin Salaax oo Masar uga wakiil ahaa guddiga ku sii sinka ee dawliga ahaa isagoo difaacaya gobannimada Soomaaliya. Waxa shirqool ku dilay gumaystayaasha iyagoo ka walwalsanaa, ma mawqiftiisii ku saabsanayd midnimada iyo madaxbanaannida Soomaalida.

Gumaystayaashu maalmahaa waxay doonayeen inay kala gooyaan Soomaalida iyo Carabta inteeda kale, hase yeeshee kumay guulaysan inay ka gooyaan dalka Soomaalida walaalihiisa Carbeed ee kale.



Wuxuu ogaa inuu yahay shacbi Carabi ah asalkiisu, dalkiisuna uu ka mid yahay dunida Carabta ee ballaaran, dhallintiisa badankeeduna waxay qabteen dalalka dibedda iyagoo dhuumanaya dalalka Carabta oo ay ku soo dhammaysteen tacliintooda Afka Carabiga.

Ma oranayo qaarkood dhuumasho ayey ku tageen magaalada Qaahir iyagoo raacay dooniyihii lo'da u siday Masar, qaarkoodna lugaha lo'da ayey galeen si aanay gumaystayaashu caddaanku u arag, qaar ka mid ihi waxay galeen kuliyadda milatariga Carbeed waxaanay barteen tacliinta Askariga, iyagoo si gaar ahaaneed loo geeyey.

Waxaan ognahay in sideed ka mid golaha sare Kacaanka Soomaaliyeed oo xukuma Soomaaliya ay ka bexeen kulliyaddaas, darjooyin milatariyana waxay ka sii qaateen Masar.

Go'aan Kacaanka Soomaaliyeed soo sooray muddo laga joogo dhawr toddobaad oo ku saabsanaa munaasabadda dabaal degga sannadka haweenka dunida ayaa buuq kiciyey, waxaanu qorayaa inay haweenaydu ninka ula simantahay dhaxalka si ay isu leekaystaan oy qaadato inta ninku qaato barkeed. Haweenayda Soomaaliyeed aad bay ugu sacaba tuntay go'aankaas.

Maxay la damacday dawladda Faransiisku meeshii ugu dambaysay u ka sameysto Afrika.
Waxa qoray Ridon Sulmaan.

Ardaydii Faransiiska ahayd ee ay soo qabsadeen koox ka mid ah Jabhadda xoraynta Xeebta Soomaaliyeed, taasoo ka dhacday magaalada Jabuuti, mar labaad ayey u soo jeedisay adduunka qadiyadda meesha isticmaarka Faransiisku Afrika ku gumaysto ugu dambaysa iyo dagaalka sida qabow uga socda gobolkaas oo Faransiisku doonayo inaanu ka tegin. Xabashiduna ay doonayso inuu sii haysto oy saaxiibtinimo ka dhaxayso.

Ujeeddada arrintaasi waxa weeye sida dadka u dhaw wakiilka Faransiiska u jooga Jabuuti ay yiraahdeen, Jabhaddu waxay doonaysaa in loo sii daayo laba qof oo muddo laba toddobaad ka hor la xiray, oo lagu eedeeyey inay qof dilayeen, ama lagu eedeeyey inay dilayeen qof ka mid ah ragga Faransiiska la shaqeeya, wada hadallo dhex mara Jabhadda iyo xukuumadda Faransiiska waxa lagu sheegay in haddii kolka hore ay dawladda Faransiisku rasmi ahaan u sheegto inay ka noqonayso aftidii laga qaadi lahaa dalkaa lana siinayo gobannimadiisa, ay Jabhaddu sii deyn doonto ardayda.

War ka soo baxay magaalada Baaris oo rasmi ah waxa lagu sheegay in wadahadaladii lala bilaabay Jabhadda. Hase yeeshee lama caddeynin mas'uulka wada hadaladaa uga qayb galay inay sii daynayso labada nin ee la sheegay iyo inay diidayso wada hadallo ku saabsan xoraynta Xeebta.

Is-afgaran waa ayaa dhex taagan Faransiiska iyo Jabhadda, weliba waxay isku khilaafsan yihiin mawqifka ururka Midowga Afrika oo ugu baaqay dadka Xeebta inay halgan dagaal ku qaadaan Faransiiska inkastooy dawladda Soomaaliya ay aad isugu taxalujinaayso mustaqbalka Xeebta oo tirada dadka deggani tahay 750.000 oo qof.

Isweydiinta mawqifka Baaris ee Jabhadda kaddib markii afduubku dhacay, waxa uu ku lug leeyahay Faransiiska oo doonaya inuu xorriyad siiyo xeebta.

Dayrtii 1974kii ayuu Madaxweynaha Soomaalida, Jaalle Siyaad kala hadlay Madaxweynaha Faransiiska markii uu booqashada ku tagay magaalada Baariis bishii Noofember ee isla sannadkaa in la siiyo xeebta gobannimadeeda. Waxaanu ku ballan qaaday in la ixtiraamayo qarannimada dawladdaa cusub, iyo inuu ku dadaalayo sidii xukunka loogu dhiibi lahaa xukuumad dadku si xor ah u soo doortay, hase yeeshee dawladda Faransiisku arrintaa way iska dhaga martay, Madaxweynaha Faransiisku wuxuu ku celiyey hadalkay weligoodba oran jireen oo ah inay dalka ku joogaan oggolaanshaha dadkiisa. Hase yeeshee intii ka danbeysay wada hadalladaa Baariis waxa xoogoobay dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka oo



ay jabhaddu hoggaaminayso, waxaana taas wax weyn u taray tallaabooyinka diblomaasiyadda ee Jamhuuriyadda Soomaalidu qaadayso ee ku saaban qaawinta beenaha Faransiiska joogitaanka xukunka shisheeyaha dalkaas.

Sidaasaa Ururka Midowga Afrikana u taageeray mawqofka dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka xeebta, markii uu soo saaray shirkii magaalada Kambaala 1975kii go'aan uu ku cambaaraynayo dawladda Faransiiska oo ka madax taagtay in ay Xeeba Soomaaliyeed gobannimadeeda siiso. Go'aanku wuxuu ugu baaqay dadka xeebta inay dagaal la galaan gumeysiga oo ay is xoreeyaan, waxaanu cambaareeyey saldhig milatiri ah oo laga dhiso dalkaas, ha lahaado Faransiisku ama cid kalaba.

Qodobka ugu danbeeya ee go'aanku wuxuu taabtay nabad galyada dalkaas iyo xeeladaha Faransiiska uu doonayo in uu u dhiibo xukunka Jabuuti si uu uga soo galo daaqadda.

Waxa suuroobaya sida ay muujinayaan wararka Baariis inuu Faransiisku u dhiibo xukunka Cali Caarif iyo Xisbigiisa hadday dantu ku khasabto, ujeedaduna waxay leedahay isaga ayaa ku guuleystay doorashadii ugu dambeysey ee dalkaas laga qaaday.

Doorashadii ugu danbeysay waxay dhacday bishii Noofamber 1973kii waxaana qaatay xisbigaas oo u adeega gumeysiga Faransiiska, xukuumadda gumeysiguna ay gacan ku siisy, taasoo dhalisay in xibigii ka soo horjeeday aanu kuraastii waxba ka helin.

Iska caadi weeye markaas inay ku andacooto dawladda Faransiisku ama ay isticmaasho doorashadaas aan saxa ahayn oo ay tiraa Cali Caarif xukuumaddii ugu horreysay ee madaxbannaanayd ha ka dhiso Jabuuti.

Cali Caarifna waxa lagu yaqaannaa inuu yahay nin u qabbaana gumeysiga Faransiiska oo jecel inuu sii joogo dalka, waxaana muuqata inuu ka helay muddadan danbe Baariis awaamiir faraysa inuu u diyaar garoobo kaalintiisa cusub. Waxaanu isu muujiyaa inuu yahay dagaalyahan u diriraya

xorriyadda Xeebta, taasoo uu ku qarinayo dabadhilifnimadiisa, iyo inuu yahay shakhsiyad uu abuuray gumeysiga Faransiisku.

Oggolaanshaha Faransiiska ayuu socdaal ku soo maray dalalka Carabta iyo Afrikaanka si uu taageero u doonto, iyadoo hadda Faransiisku u muuqato inaanu sii joogaynin Xeebta Jabuuti.

Hase yeeshee waxa muuqata inaanu guul ka soo hoynin socdaalladaas inkastoo la filayey inuu Xabashida ku haysto taageero, halkaaoo uu bishii Agoosto uu ku tegay booqasho. Si aad ah ayaa loogu soo dhaweeyey Itoobiya Cali Caarif, waxaanay soo saareen warar aan la fahmayn oo sheegaya heshiis dhex maray Cali Caarif iyo Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Amxaarada, oo ku saabsan iskaashi ballaaran oo dhex maraya Xabashida iyo Xeebta Jabuuti. Inkastoo aanu heshiiskaasi caddeynin haddana waxa la ogsoon yahay inay Xabashidu ku ilaashato danaheeda xeebta Jabuuti.

Dekadda Jabuuti waxa ku xira magaalada Addis Abeba jidka tareenka waana badda ay Itoobiya ka shaqaysato, Xayle Salaasana wuxuu weligii doonayey inuu Faransiisku haysto ama isaga lagu soo daro.

Inkastoo xukuumadda Addis-Ababa ay doonayso inaanay ka bixin diillinta guud ee Afrikaanku ka qabo in la siiyo Xeebta Jabuuti gobannimadeeda, isla markaa waxay doonaysaa inay ku ilaashato masaaliix gaar ah oo ku saabsan jidkaas tareenka ee dekadda Jabuuti. Arrintaana waxa laga gaari laaa xal wax raalli geliya, haddii aan dhaqdhaqaaqaa danbe ee Cali Caarif mugdi gelin mawqifka.

Arrinta cusub ee laga yaabo inay meesha soo gasho waa xukuumadda Addis Ababa oo ku taageerta inuu Cali Caarif qabto xukunka dalka, dhanna ay ka mid noqoto Xisbiga mucaaridka ah. Muddo dhawr bilood laga joogana Raabidada dadka Afrikaanka ee Soomaaliyeed waxay diidday hindise Cali Caarif oo ku saabsan in laga wada xaajoodo gobannimada, maxaa yeelay wuxuu ku xiran yahay gumeysiga, sidaa darteedna magaca dadka xorriyadda doonaya kumuu hadli karo.



Dawladda Soomaalidu waxay iyadu si buuxda u taageeraysay Xisbiga gobannimadoonka iyo Jabhadda xoraynta Xeebta Soomaaliyeed oo xarunteedu Muqdisho tahay.

Waxa la filayaa mar haddii uu ku soo hungoobay Cali Caarif socdaalkiisii Xabashida mooyaane, waxa laga yaabaa inuu u tago Ururka Midowga Afrikaanka oo uu ka dhaadhiciyo xalliga gumeysiga Faransiisku wato, inkastoo 13 nin oo ku jirtay Xisbigiisa ay iskaga bexeen oo ay ku biireen madaxda ka soo horjeedda.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, ma aha wax adag in la garto siyaasadda Faransiiska ee ku saabsan Xeebta Soomaaliyeed iyo Cali Caarif qudhiisu marka khasab lagaga saaro dalka, maxaa yeelay, Faransiisku wuxuu u haystaa Xeebta tiraatijiyad ahaan, dooninna mayso inay ka baxdo, maxaa yeelay wax la eego kuma haysato, Badweynta Hindiya oo hadda dagaal dawliyihi ka socdo, waxanya kordhisay kaalmooyinkii ay siinaysay dalkaas.

Sannadkii aynu soo dhaafnay waxay ugu tala gashay 1454 Doolaar oo lagu dhisay meel awoodda ah, iyo jidka Addib Ababa iyo Jabuuti sannadkanna way kordhinaysaa. Barnaamijka kaalmada Faransiisku wuxuu ku xiran yahay qiimaha istiraatijiga uu u leeyahay.

Markaad isha mariso sawirka khriidadda qaaradda Afrika iyo sida Xeebta Soomaaliyeed ku tahay Badweynta Hindiya ayeynu ogaan karnaa qiimaha Jabuuti leedahay oo aan dhulkeedu ka badnayd 22.000 km. oo isku wareeg ah.

Xeebta Soomaaliyeed wuxuu ka helayaa Faransiisku meel uu ka galayo badda Cas, waxaanay ku taallaa Mandiqo la filaayo inuu dagaal qaraar ka dhaco mustaqbalka ha noqoto xagga diblomaasiyadda ama militariga oo aan noqonayn daawada.

Arrinta Xeebta Soomaaliyeed oo mar labaad aad u muuqatay kaddib markii Jabhaddu afduubtay Ardaydaas waxay ku khasbaysaa Faransiiska inay dib uga fiirsato waxyaabihii ay ugu tala gashay iyo mustaqbalkiisa.

Madaxweynaha Soomaaliya, Jaalle Siyaad, dhambaal uu u diray Madaxweynaha Faraniiska, Distan bishii Diisamber

1975kii, wuxuu ku weydiistay in la soo dedejiyo gobannimada Xeebta Soomaaliyeed, in laga baxo warwareejinta aan waxba tarayn, ciidammada Faransiiskana halkaa laga qaado. Madaxweynuhu wuxuu uga digay Faransiiska inay dusha u ridanayso dhibaatooyinka iyo mas'uuliyadda cinaadkeeda, waxaa muuqata inaanay Baariis dhuuxin digniintaas, afduubka Jabhadda xoraynta Xeebta Soomaaliyeedna, waxay u jeeddaa ciidammada Faransiiska iyo xukunka gumeysiga, si ay dib ugu noqoto oo ka fiirsato siyaasaddeeda ku saabsan Xeebtaa, waxa ay uga digaysaa dawladda Faransiiska inaanay waxba qabanayn siligyada korontada ee ku wareegsan Jabuuti.

# "SAWT AL-ARAB,,

**Wargeyska Sawtul Carab — 15kii Agoosto 1975.**
**Jaalle Siyaad**

**Midowga Soofiyeeti Saldhig kuma laha Soomaaliya**

**Buuqa dawladda Maraykanka ujeeddadiisu waxa weeye in uu marmarsiinyo u helo Jasiiradda Diyego Geershiya Saldhigga Millatariga ee uu ku leeyahay.**

Xogwaraysi uu la yeeshay Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre, wafdi qorayaal ah oo ka socdey Lubnaan, dhawaanna dalka booqasho ku yimid.

Xogwaraysigaas wuxuu Madaxweynuhu ku beeniyey in aanay jirin dalka Soomaalida Saldhig Millatari oo Midowga Soofiyeeti leeyahay, waxaanu yiri, «Marna ma weydiisan Midowga Soofiyeeti inaan siino Saldhig Militari».

Madaxweynuhu wuxuu intaa ku daray:

Annaga runta ku hadlayna waanu ka soo horjeednaa saldhigyada millatariga ah mabda' ahaan meel kastoo laga samaynayo, waxaana nagu khasbaya asbaabaha soo socda:

1. Haddii dal uu saldhig yaallo wuxuu halis gelinayaa nabadda dalkaas laftiisa, maxaa yeelay marka loo baahdo in dagaal dhaco kollay isagaa la duqaynayaa.
2. Waxanu rumaysanahay in dhismaha saldhigga shisheeyaha uu meel ka dhac ku yahay madaxbannaanida dalka oggolaada in laga dhiso ciiddiisa, wax kasta ha ahaato sababtuye.
3. Waxanu ognahay in haddii dawladi saldhig ku leedahay dal ay xoogagga ay iska soo horjeedaan saldhig ka hor keenayaan, taasina halis gelinayso dunida oo idil.

Annaga tixgelinayna arrimahaas ayaanu diidaynaa gaashaankana ku dhufanaynaa in saldhig laga samaysto dalkayaga iyo dhul kasta oo kale, waannuna ku canaananaynaa waddanka oggolaada in dalkiisa laga samaysto saldhigyo millatari, waxaanu qabnaa in xukuumadaha ka raalliya arrintaas iyagoo ku gaboodfalaya nabadgeyada shicbigooda iyo adduunka ay ka baqayaan dadyowgooda oyna ku kalsoonayn, sidaa darteed saldhigyadaasiba ay iyaka ilaalinayaan. Annagu waanu ka duwannahay kuwaas, waxanu nahay kacaan u horseedaya dalkiisa wax wanaagsan, waxaanu rumaysanahay inuu waxa na ilaalinayaa annaga iyo dadkayagaba ay yihiin isku xirnaanta dadweynaha iyo kacaanka, waana mid soo hooysey guulo aan looga sheekayn karin qofkii aan arag.

Wuxuu yiri Madaxweyne Siyaad: «Xiriirka naga dhexeeya annaga iyo Midowga Soofiyeeti waxa habboon in laga sheego runta, aad bay noo taageeraan, gaar ahaan xagga gaashaandhigga, waxa jirta in saddex qaybood oo dalkayaga ah weli la gumeysto, xorayntooda oo la halmaamaana waa khiyaamo aan laysu dhaafi karin, walaalahayo iyo saaxiibbadayo way ka raalli noqon middaas, waxa kaloo Midowga Soofiyeeti naga taageereen cilmiga iyo dhaqaalaha iyagoon shuruud nagu xirin, arrimahayaga gudahana soo fara gelin.

Bishii hore waxa yimid qorayaal iyo weriyayaal shisheeye ah oo dunida ka kala yimid si ay u soo hubiyaan beentii Maraykanku faafiyey ee ku saabsanayd Saldhig Soofiyeetku leeyahay oo ku yaalla Berbera, meesha badda Cas laga galo ee Cadan... masaafada u dhaxaysaana waxa weeyaan 130 km.

Dekedda Berbera way yar tahay waxa ku soo xiran kara afar markab, weliba waxa ka dhiman qalabkii lagu shaqayn lahaa, waxa laga dhoofiyaa xoolaha, sannadkiiba malyuun neef ayaa laga dhoofiyaa oo loo diraa dalalka Carabta, waxa kale oo laga diraa ama laga soo geliyaa silcado gaaraya sannadkiiba 200.000 oo tan.

Qorayaashu suurad ballaaran ayey ka haysteen magaalada Berbera intii aanay tegin, taasoo ay kobcisay sawirro lagu faafiyey Wargeyska «Tiribiyuun» ee Maraykanka, dekaddaa saldhigga halista ah iyo rug uu ka goosho Midowga Soofiyeeti, sidii ay sheegtay Wakaaladda basaasidda Maraykanka iyo sawirrada ay soo qaadeen dayuuradahooda basaasidda ee Alyooto loo yaqaan.

Wararka ay ka faafiyeen dekaddaa Maraykanku, waxay sheegayaan sawaariikh, saldhigyo, guryo Soofiyeetku leeyahay, meelo lagu ururiyo hubka halista ah, dayuuradaha ku wareega dunida.

Qorayaashii way warwareegeen meelahaas oo dhan iyagoo sita sawirro, iyo khariidado meelahaas halista ah.... Tillaabo tillaabo ayey u baareen markii ay dekaddii ku soo wareegeenna waxay yimaadeen guryo la dhisay waqtigii Ingiriiska, waxay u dhisan yihiin sidii xeryo askareed, waxaana degganaa qoysas Soomaaliyeed muddo sannado ah, guryahaas waxa u dhaw masjid ay dhiseen Masaaridu beri hore, masjidkana guryo ay deggan yihiin dadka ka shaqeeya dekadda, Maraykanku waxay yiraahdeen waa guryo Soofiyeetku leeyahay markii la furayna waxa loogu tegay xaasas Soomaaliyeed oo iska deggan.

Kaddibna waxay aadeen wufuuddii Saldhigga Ciidammada Badda Soomaaliyeed, oo la yiri waa meesha taliska Soofiyeetiga.... Waa guri askariyeed ay ku nool yihiin saraakiisha Soomaaliyeed, waana rugta Millatariga maamulka Dekedda, guryo weeye isu dhawdhaw Ingiriiskii baa dhisay, waxaanay ahayd saldhiggii millatariga ahaa ee laga maamulayey millatariga markii Ingiriisku joogay dalka.

Mas'uuliyiinta Soomaaliyeed dafirimayaan,, in magaalada Berbera laga siiyo ciidammada Badda Midowga Soofiyeeti fududaynta badeed, dooni kasta ama markab kasta oo taa doonana waa la siiyaa, waxay halkaa ka qaataan biyaha macaan oo maamulka dekadda ay kaga iibiyaan kiiba shan shilin.



Kaddibna wafdiyada qorayaashu waxay qabteen dhinaca galbeed ee dekedda Berbera, waxaanu ku dhereran yahay badda Cas, halkaasoy ku arkeen meelo laga dhisayo haamaha Batroolka lagu kaydiyo, afar ayaa dhammaaday ilaa hadda, waxaana loogu tala galay in batroolka laga siiyo maraakiibta ganacsiga.

Markii ay socdaalkaa dheer galeen qorayaashu iyagoon ruux cadba arag ayey mas'uuliyiinta **weydiisteen in la siiyo** dayuurad gaar ah la siiyo si ay magaalada u dul maraan, oo ay uga bogtaan meelahan iyo kuwa kale ayna arag.

Markiiba waxa loo keenay dayuurad kuwa tooska u kaca ah oo ku dul wareejisay magaaladii yarayd inkastoyna waxba arag.

Su'aashaa markaa dad badani is weydiiyeen waxay ahayd Xaggee laga keenay beentan oranaysa waxa laga dhisay Berbera Saldhig Midowga Soofiyeeti, sideebayse Maraykanku u abuuri karaan beenta intaa le'eg?

Waxa la rumaysan yahay inay Marayanku doonayaan in marmarsiiyo u helaan ballaarinta saldhiggooda millatariga ee Jasiiradda Diyeego-Geershiya ee Badweynta Hindiya, in ay qawaacid ama saldhigyo ka sameystaan dalalka Carabta ama Afrika.

Markii uu muujiyey dagaalkii bishii Oktoobar 1973kii inaanay dawladaha reer Yurub siinaynin oggolaasho ay hubka u mariso Israa'iil.

Kolkaasaa Wasaaradda Gaashaandhigga Maraykanku fidisay dicaayad fara badan oo ku saabsan Midowga Soofiyeeti oo ku badanaya Soomaaliya, kana samaysanaya saldhigyo, taasoo halis gelinaysa dunida xorta ah, siday leeyihiin. Waxay xoojiyeen dacaayaddaas Juuntii aan ka soo gudubnay markii ay faafiyeen sawirro ay leeyihiin waxa laga soo qaaday saldhigyo ku yaalla dekaddaas Carbeed.

Wuu ismoodsiiyey Wasiirka Gaashaandhigga Maraykanka inay tahay saldhig sawaariikheed uu leeyahay Midowga Soofiyeeti. Asalka sawirradaasina waxay ahaayeen saldhigga Maraykanku ku leeyahay magaalada Qunaydara ee dalka Marooko iyo kuwa la mid ah oo Soofiyeetku ku leeyahay Yurubta Bari.

Inkastoo ay xukuumadda Soomaaliyeed caddaan dacaayaddaa u beenisay, in sawirradaa ay faafiyeen wargeysyada Maraykanka iyo reer Galbeedku ay yihiin kuwo warshadda Hilibka.... hase yeeshee may joojin dacaayaddii..... buuqii ay doonayeenna way kicisay.

Dawladda Soomaalidu waxay u yeertay niman ku jira Baarlamanka Maraykanka si ay indhahooda ugu soo arkaan inaan waxba ka jirin dacaayadda iyo inay waxa Soomaalidu ku hadlaysaa run yihiin.

Run ahaantii waxa yimid dalka Soomaalida Diwi Baarti Liit oo ay la socdaan khubaro millatari ah, markuu yimidna wuxuu ku adkaystay beentii ay faafisay Wasaaradda Gaashaandhiggu, waxaanu ku andacooday in tashiilaadka Soofiyeetku ku leeyahay dekadda Soomaaliyeed ay waajib kaga dhigayso Maraykanku inuu ballaadhiyo saldhigyada uu ku leeyahay Badweynata Hindiya, ha noqoto xagga cirka ama xagga badda'e.

Taasi waxay ahayd arrintii ay doonaysay Wasaaradda Gaashaandhigga Maraykanku si ay uga hortagto nimanka golaha sare ee baarlamanka ku jira kana soo horjeeda mashruuca Diyeego-Geershiya.

Wuxuu doonayy inuu ka dhaadhiciyo Midowga Soofiyeeti oo ay ciidammadiisu ku soo xoogoobayaan Badweynta Hindiya daraaddeed, la ballaadhiyo saldhigga ay ku leeyihiin, halkaasi, muddana waxay isku hayeen in loo oggolaado 15ka malyuun ee Doolaar ee hawshaasi u baahan tahay.

Arrintaasi waxa is hortaagay rag ku jira baarlamanka sare oo uu qabqable u yahay Sinitoor Manisfeld oo isagu fahmay ujeeddada Bintagonka.... oo ku yiri Wasiirka Gaashaandhigga, waxaa laga yaabaa inay Diyeego Geershiya u noqoto bilow ciidammo badeed oo la dejiyo halkaas.



Waxa caddaan ahayd kaddib markii wax iska beddeleen dhinaca Batroolka inuu Maraykanku xoojiyo awooddiisa millatariga si uu gacanta ugu dhigo jidadka badaha ee loo maro Khaliijka Carabta, weliba ay noqdaan ciidammada ka jooga badda Carabta kuwa ay ku cabsiin karto dalalkaas.

Arrintaasi waxa caddeeyey Madaxweynaha Maraykanka ee Foord warqad uu u diray Kongarayska uu ku taageeray hindisayaasha taliska Maraykanka. Wuxuu ku caddeeyey warqaddiisii inuu dhismaha saldhigga Diyeego Geershiya uu lama huraan u yahay Maraykanka, Badweynta Hindiya uu kaga ilaalinayo dalalka Carabta ee Batroolka haysta iyo Bariga Dhexe.

Wasiirka Gaashaandhigga ee dalkaasina warqaddaas ayuu ku gabbaday isagoo ku andacoonaya inuu Soofiyeetku halis gelinayo jidadka badda ee loo maro dalalka batroolka hodanka ku ah, waxanu ku andacooday sawaariikh hubka halista ah oo Soofiyeetku leeyahay inay yaallaan Berbera, isagoo ku adkaynaya beentiisaa sawirro ay qaadday wakaaladda basaasidda Maraykanka.

Waxa muuqata inay markaa ku guuleysteen tabtoodii markii khubaradii la socotay Senetarkii yimid kolkaasay oggolaadeen labada gole in la ballaadhiyo saldhiggaas.